# CILMIGA BULSHADA

## BUUGGA ARDAYGA

Fasalka 6aad

ISBN 978-99944-2-116-9

JAMHURIYADA DIMOQRAADIGA FADARAALKA ITOOBIYA

WASAARADDA WAXBARASHADA

Birr 68.00

CILMIGA BULSHADA Tilmaame Bare Fasalka 6aad

MOE

CILMIGA BULSHADA

BUUGGA ARDAYGA

Fasalka 6aad




JAMHURIYADA DIMOQRAADIGA FADARAALKA ITOOBIYA

WASAARADDA WAXBARASHADA

# CILMIGA BULSHADA

## BUUGGA ARDAYGA

### Fasalka 6[aad]



JUMHURIYADA DIMOQRAADIGA FADARAALKA EE ITOOBIYA
WASAARADDA WAXBARASHADA

# Buugan Ilaali oo daryeel.




**Buugani waa hanfida Dugsigiina**

**Daryeel si aynan waxyeelo u gaadhin. Hoos waxa kuxusan 10 fikradood oo ah talooyin kaa caawinaysa sida ad buuga u ilaa linaysid una daryeelaysid.**

1. Buuga ku jaldiyee jaldi ku haboon dhawrista sida Bilaastiga  waraaqad adag sida Jaraaiidka la akhristay.
2. Markasta meesha aad buuga dhigaysaa waa in ay ahaataa meel nadiif ah oo engagan.
3. Buuga marka aad isticmaalaysid waa in ay gacmahaagu nadiif ahaadaan.
4. Waxna ha ku qorin buuga jalddi giisa ama boggaga dhaxdiisa.
5. Isticmaal waraaqad yar ama kaardl yar markaad bog calaamadaysanaysid.
6. Fadlan ha ka jeexin ama haka jarin sawir ama bog.
7. Boggaga jeexma ku kab, Xamag ama bilaastar.
8. Buuga markaad dugsiga uqaadanaysid boorsada ama shayga aad ku qaadanaysid qumaati u dhaxdhig si uunan u jacdadin ama u jajabin.
9. Buuga marka aad qofkale u dhibaysid si taxadar ah ugu dhiib.
10. Buuga cusub marka ugu horaysa ee aad isticmaalkiisa bilaabaysid dhinicisa ay boggagiisa u danbeeya ay ku yaaliin u jiifi kadibna markiiba dhawr bogg fur ama banne. Marka aad bogg rogaysid, Cidhifka uu ka taxan yahay gacanta kale ku yar xaji. sidaasina daryeelka jaldiga buuga ayay u wanaagsantahay.

# CILMIGA BULSHADA

## BUUGGA ARDAYGA

### FASALKA 6^AAD


Qorayaasha, Tafatirayaasha:

Cali Muxumed Bakaal
Cabdlcasiis Maxamed Aadan (Baaruud)

Qiimeeyayaasha:

Maxamed Cabdi Roble
Maxamed Bade Maxamuud
Deeq Axmed Badal



JAMHUURIYADA DIMUQRAADIGA FEDARAALKA
ITOOBIYA, WASAARADA WAXBARASHADA

Wasaarada waxbarashada ee jamhuuriyada Dimoqraadiga Fedaraalka Itoobiya mashruuca hoos yimaad ee uqaybsan kor u qaadista iyo horumarinta tayada waxbarashada Guud oo taageero ka helay hayada IDA Credit No. 4535 ET oo ah the Fast Track Initiative catalytic fund iyo dawladaha Finland, Italy, Netherland iyo United Kingdom.

© 2011 wasaarad waxbarashada ee jamhuuriyada Dimoqraadiga Federaalka Itoobiya. Xuquuqda buuggani way u dhawsan tahay wasarada waxbarade ee JDFI. Buugga ama qayb ka mid ah buugga lama guurin karo lama daabici karo lamana baahin karo, iyada oo la adeegsanayo qalabyada eletirooniksa iyadoo ogolaansho qoraal ah aan laga haysanin wasaaradda waxbarashada ama liisan ka saamaxaya xeerka qodobka No. 4/0/2004 ee xuquuqda daabaca oo ah maqaal ay jumhuriyada Dimoqraaidiga Fedaraalka Itoobiya.

Wasaaradda waxbarashadu waxay u mahad naqaysaa shakhsiyaadka iyo kooxaha si toos ah iyo si dadban uga qayb qaatay daabicista iyo soo saaridda buuggan.

Kuwa haysta ogolaashaha qoraalka laakiin lagu eedeeyo inay gaf ka galeen xuquuqda buugga. Waa in ay la xidhiidhaan xafiis waynaha wasaaradda Waxbarashada ee ku taala Arata kiilo, Adiss Ababa, Itoobiya.

***Waxaa Soo saray oo daabacday***

STAR EDUCATIONAL BOOKS DISTRIBUTORS Pvt. Ltd.

24/4800, Bharat Ram Road, Daryaganj,

New Delhi – 110002, INDIA

**iyo**

ASTER NEGA PUBLISHING ENTERPRISE

P.O. Box 21073

ADDIS ABABA, ETHIOPIA

*Under GEQIP Contract No. ET-MoE/GEQIP/IDA/ICB/G-07/09-B.*

ISBN 978-99944-2-116-9

# Tusmada Buuga

## Cutubka 1aad


**Goobta ay dhacaan, Dagaamada iyo Dadka Afrikada Bari** 1

| | | |
|---|---|---|
| 1.1 | HALKA UU DHACO BARIGA AFRIKA | 2 |
| 1.2 | DADYOWGA BARIGA AFRIKA | 7 |
| 1.3 | DHAWRISTA, ILAALINTA GOOBAHA DHAXALKA AH IYO DHIBAATOOYINKA LA SOO DERSA GOOBAHA DHAXALKA AH | 16 |
| 1.4 | DAGAAMADA IYO HAB NOLOLEEDKA BARIGA AFRIKA | 23 |
| 1.5 | XAALADAHA SALDHIGA U AH KALA DUWANAANSHAHA DEGAAMAYNTA IYO HAB-NOLOLEEDKA | 33 |


## Cutubka 2aad


**Dhulka Aynu Ku Noolahay** 44

| | | |
|---|---|---|
| 2.1 | OOGADA SARE EE DHULKA | 45 |
| 2.2 | QAABABKA DHULKA BERRIGA AH EE UGU WAAWAYN BARIGA AFRIKA | 54 |
| 2.3 | KHEYRAADKA BIYAHA EE BARIGA AFRIKA | 61 |
| 2.4 | BIYAHA BARIGA AFRIKA IYO KA FAAIIDAYSIGOODA DHAQAALE | 66 |
| 2.5 | GIBILKA HAWADA | 71 |
| 2.6 | CALAAMADAHA IYO ASTAAMAHA CAALAMIGA AH | 78 |

## CUTUBKA 3[AAD]


**DEEGAANKA** 90

3.1 BAADKA(DHIRTA) DABIICIGA AH IYO XAYAWAANKA DUUR – JOOGTA BARIGA AFRIKA 91

3.2 SAAMAYNTA UU AADAMUHU KU LEEYAHAY DEEGAANKA 107

3.3 HABABKA DARYEELKA CARRADA IYO BIYAHA 110

3.4 DHUL-SEEREYAASHA QARAN IYO AHMIYADA AY U LEEYIHIIN ITOOBIYA IYO BARIGA AFRIKA 113


## CUTUBKA 4[AAD]


**ARIMAHA DADWAYNAHA** 118

4.1 ARRIMAHA DADWAYNAHA 119

4.2 XUQUUQAHA CARUURTA IYO ISTIRAATIJIYADAHA BADBAADADOODA 133

4.3 ARRIMAHA ISKAASHIGA 139

# CUTUBKA 1

# GOOBTA AY DHACAAN, DAGAAMADA IYO DADKA AFRIKADA BARI



## Ujeeddooyinka Cutubka

***Marka uu Cutubkani dhamaado ardaydu waxay awood u yeelan doonaan inay:***

- Aqoonsadaan ama gartaan halka ay dhacaan dalalka Bariga Afrika.
- Fahmaan ilbaxnimadii qadiimiga ahayd iyo dhaxalka taariikhiga ahaa ee bariga Afrika.
- Aqoon u yeeshaan dhibaatooyinka haysta dhaxalka taariikhiga ah.
- Garwaaqsadaan saamaynta ay ku leeyihiin dagaamaynta iyo habnololeedka Bariga Afrika cimilada iyo kheyraadka debiiciga ah.

## Tusmooyinka Muhiimka ah


**1.1** HALKA UU DHACO BARIGA AFRIKA

**1.2** DADYAWGA BARIGA AFRIKA

**1.3** BADBAADINTA IYO DHOWRISTA GOOBAHA DHAXALKA TAARIIKHIGA AH IYO DHIBAATOOYINKA KA HOR IMAN KARA

**1.4** DAGAANKA IYO HABNOLOLEEDKA BARIGA AFRIKA.

**1.5** XAALADAHA DHALIYA KALA DUWANAANSHAHA DAGAAMADA IYO HABNOLOLEEDKA

- *Gunaanadka cutubka*
- *Layliska Guud ee Cutubka*

# HORDHACA CUTUBKA

Cutubkani waxa uu ka kooban yahay casharo ku saabsan Juqraafiga iyo taariikhda Bariga Afrika. Waxaana loo sii kala qaybiyay shan (5) cashar-hoosaad oo kala duwan oo la xiriira Bariga Afrika. Ugu horayn, waxaad ku baran doontaan goobta ama halka uu dhaco ama ku yaalo Bariga Afrika.Waxaa kaloo aad isla falanqayn doontaan macnaha halka uu dhaco, derisa ahaan iyo xariiqaha dhigaha iyo loolasha ee ay dhacaan dalalka Bariga Afrika. Kadibna, waxaad falanqayn doontaan sidoo kale dadyowga Bariga Afrika. Waxaa kale oo aad ku baran doontaan ilbaxnimooyinkii hore ee Aksum iyo Nuubiya, ilaalinta iyo daryeelka goobaha laga helo dhaxalka (Hidaha) taaariikhiga ah iyo sidoo kale dhibaatooyinka haysta goobaha dhaxalka taariikhiga ee Bariga Afrika iyo qodobo kale oo ka mid ah cutubka.

Ugu dambayn, halkan waxaad ku falaqayn doontaan dagaamada iyo hab-nololeedka Bariga Afrika.

**Ereyada Furaha u ah**

- Deris ahaan (dhaca agtooda)
- Ilbaxnimo
- Dhaxalka (hidaha)
- Dadwaynaha
- Filiqsanaanta Dadwaynaha
- Saamiga koritaanka dadka ee dabiiciga ah
- Magaaloobid
- Hab-nololeed
- Dhawritaan
- Hannaanka Degitaanka
- Koriinka degdega ah ee tirada dadka
- Dhaqdhaqaaqa Dadwayne

## 1.1 HALKA UU DHACO BARIGA AFRIKA

***Marka uu casharkani dhamaado ardaydu waxay awoodi doonaan inay:***

- Qeexaan Halka uu dhaco Bariga Afrika
- Faah-faahiyaan faraqa u dhaxeeya halka ay dhacaan deris ahaan iyo xariiqo (Dhigo iyo Lool) ahaanba.
- Sharaxaan halka ay dhacaan Bariga Afrika deris ahaan iyo xariiqo ahaanba.



**Hawl-galka 1.1**

Maxaad ka fahamtay fikrada halka ay meeli dhacdo? Ma ka tilmaami kartaa Gobalka Bariga Afrika khariirada siyaasadeed ee Afrika korkeeda?

Halka ay dhacdo waa " Meesha " ay goobi ku taallo, taasoo sheegaysa halka laga helo goobta. Halka ay meeli dhacdo waxaa lagu qeexi karaa labadan siyaabood ee kala ah:


Xariiqo ahaan iyo Deris ahaan.

Xariiqo ahaan, waxaa lagu qeexaa adeegsiga xariiqaha Dhigaha iyo loolasha. Mida kalena, deris ahaan waxaa lagu qeexaa adeegsiga dhulka berriga ah ee deriska la ah iyo oogooyinka biyaha ah ee ku xeeran ama dhinaca ku haya xuduud ahaan.

## Halka uu Dhaco Bariga Afrika Deris ahaan

Afrika waa mid ka mid ah todobada (7) qaaradood ee aduunka, waanna qaarada labaad ee ugu baaxada wayn qaaradaha tirada dadkana waa talabaad ee ugu badan dunida. Afrika waxaa loo kala qaybiyaa shan (5) qaybood, mid ka mid ah shanta qaybood waa Bariga afrika.

Baro! Khariiradan soo socota aqoonsada deris ahaan halka ay dhacaan shanta (5) qaybood ee Afrika.





Jaantuska 1.1:Gobolada Afrika





## Hawl-galka 1.2

Adiga oo adeegsanaya khariiradahan soo socda ee Afrika, isku day inaad ka Jawaabto su'aalahan.




Khariirada "B"






Khariirada "T" Khariirada "J"

**Jaantuska 1.2: Khariirada Afrika**

## Su'aalo

1 Midabee qaybta Afrika ee loo yaqaano Bariga Afrika (adeegso khariirada "T")

2 Isku day magacyada waddamada laga helo Bariga Afrika iyo caasimadahooda (adeegso khariirada "J")

3 Magacaw qayb-biyoodka ugu muhiimsan ee dhinaca ku haya Bariga Afrika (adeegso khariirada "B")

4 Waa kuwee qaybaha Aduunka ee ugu dhaw Bariga Afrika (adeegso khariirada "J")

5 Magacaw waddamada xuduudaha la wadaaga Itoobiya (adeegso khariirada "J")

6 Adiga oo adeegsanaya khariiradaha "B" iyo "J" tilmaan dalalka aan badaha lahayn ee Bariga Afrika.

Bariga Afrika waa gobolka Bari ee qaarada Afrika islamarkaana, wuxuu dhinaca ku hayaa oo laga helaa Badda cas, Gacanka cadmeed iyo Badwaynta Hindiya. Sidoo kale waxaa aad ugu dhow Jasiirada carbeed ee Bariga dhexe. Gobolka Bariga Afrika wuxuu ka kooban yahay sagaal iyo tobon (19) waddan, todoba (7) wadan oo ka tirsani malaha bad, halka shan (5) ka mid ahi ay yihiin, Jasiirado ku yaalla Badwaynta Hindiya, halka todobada (7) dal ee soo hadhay ay yihiin dalalka xeebaha leh ee Bariga Afrika. Shaxdan soo socota waxaan ka helaynaa warbixin ama xog ku saabsan Bedka, Tirada dadka, iyo Caasimadaha waddamada Bariga Afrika.

**Shaxda 1.1: Bedka, Tirada dadka iyo caasimadaha dalalka Bariga Afrika**

| No | Wadanka iyo calankiisa | Bedka (km$^2$) | Tirada dadka oo milyan (2009) | Cufnaanta (km$^2$kiiba) | Caasimada |
|---|---|---|---|---|---|
| ***1 | Burundhi | 27,830 | 8.3 | 322.9 | Bujumbuura |
| **2 | Komoros | 2,170 | 0.7 | 346.7 | Morooni |
| *3 | Jabuuti | 23,000 | 0.9 | 22.4 | Jabuuti |
| *4 | Ereteriya | 121,320 | 5.1 | 46.5 | Asmara |
| ***5 | Itoobiya | 1,127,127 | 82.8(73.9) | 75.6(65.6) | Addis-Ababa |
| *6 | Kiiniya | 582,650 | 39.1 | 66.0 | Nayroobi |
| **7 | Madhagaskar | 587,040 | 19.5 | 35.1 | Antananaarifo |
| ***8 | Malaawi | 118,480 | 14.2 | 120.4 | Lilongwe |
| **9 | Mawriishiyas | 2,040 | 1.3 | 629.5 | Boort Luwis |

| No | Wadanka iyo calankiisa | Bedka (km$^2$) | Tirada dadka oo milyan (2009) | Cufnaanta (km$^2$kiiba) | Caasimada |
|---|---|---|---|---|---|
| **10 | Mayoota | 374 | 0.2 | 489.7 | Maamudsaw |
| *11 | Mosaambiik | 801,590 | 22.2 | 27.0 | Mabuuto |
| **12 | Riiyuunyan | 2,512 | 0.8 | 296.2 | Saynt Dhenis |
| ***13 | Ruwaandha | 26,338 | 9.9 | 397.6 | Kigaali |
| **14 | Siishalis | 455 | 0.1 | 192.2 | Fiktooriya |
| *15 | Soomaaliya | 637,657 | 9.1 | 15.4 | Muqdisho |
| *16 | Taansaaniya | 945,087 | 43.7 | 43.3 | Dhodhooma |
| ***17 | Yugaandha | 236,040 | 30.7 | 137.1 | Kambaala |
| ***18 | Saambiya | 752,614 | 12.6 | 15.7 | Lusaaka |
| ***19 | Simbaabwi | 390,580 | 12.5 | 29.1 | Haraare |
| Wadarta | | 6,384,904 | 314 | 174 | |

(**Xusuus:** **Dalalka xeebaha leh, ** Jasiiradaha, *** Dalalka aan xeebaha lahayn.*

**Ilaha:** *xafiiska tirokoobka maraykanka; waddamada iyo darajado bedka iyo tirada dadka; 2009 iyo xogta tirade dadka Dunida; 2009 * Jamhuuriyada Dimoqraadiga Federaalka Itoobiya Gudiga tiro koobka Dadka, 2008).*

Wadarta Bedka Bariga Afrika waa 6,384,904 km$^2$ taas oo ka dhigan 23% Bedka qaarada Afrika. Xagga baaxada tirada dadkana Bariga Afrika waa ka ugu dadka badan qaarada Afrika, waxaana lagu qiyaasaa tirada dadka Bariga Afrika 314 milyan oo qof, taas oo ka dhigan tahay 30% wadarta tirada dadka ee qaarada Afrika. Dhamaan dalalka Bariga Afrika Itoobiya ayaa ugu wayn xagga Bedka, dhulka iyo tirada dadka labadaba.



## Hawl-galka 1.3

Adiga oo tixraacaya Shaxda 3.1 ka jawaab su'aalahan:

1 Waddamadee baa Bariga Afrika kaga jira kaalinta 1aad, 2aadd iyo 3aad xagga Bedka dhulka? Waddanka ugu baaxada yar waa dalkee?

2 Waa kuwee saddexda (3) dal ee gobolka Bariga Afrika ugu tirada dadka badan? Kuwee baase ugu dad yar?

3 Waddamadee baa leh cufnaanta ugu saraysa iyo cufnaanta ugu hooseysa siday u kala horeeyaan?

# 1.2 DADYOWGA BARIGA AFRIKA

***Marka uu casharkani dhamaado ardaydu waxay awoodi karaan inay:***

- Aqoon u yeeshaan xarumihii ilbaxnimooyinkii hore ee Bariga Afrika.
- Sheegaan muuqaaladii ugu muhiimsanaa ilbaxnimooyinkii Aksum iyo Nuubiya.
- Sharaxaan Dhaxalka taariikhiga ahaa ee Boqortooyadii Aksum.




## Hawl-galka 1.4

Falanqeeya odhaahadan hoos ku xusan ee xigmada ah:
*"Taariikhdu waa saacad ay dadku u isticmaalaan siyaasadoodii iyo wakhtigii ay ku dhaqmi jireen maalin. Sidoo kalena waa Jiheeye ay u adeegsadaan si ay uga helaan laftigoodu khariirada korkeeda juqraafiga Aadamaha"* **John Hennik Clarko**.

1. Maxaad ka og tahay xarumihii ilbaxnimo ee qadiimka ahaa ee Bariga Afrika?
2. Weligaa ma maqashay xadaaradihii Aksum iyo Nuubiya?
3. Xageebay ku yaaleen goobahaasi?
4. Maxayse ku soo kordhiyeen ilbaxnimooyinkii dadyowgaasi gobolka?

## 1.2.1 Ilbaxnimadii Hore ee Nuubiya iyo Aksum

Afrikada Bari waa mid ka mida xarumihii ilbaxnimooyinkii qadiimiga ahaa. dadyawga gobolkani waxay lahaayeen hab-nololeed xadaarad ku dhisan xiliyadii qadiimiga ahaa. Taariikhdoodii kumanaanka sanno ahayd waxay gaadheen ilbaxnimo heer sare ah taasoo jiilba jiil ka dhaxlay hadaba xadaaradihii hore ee Nuubiya iyo Aksum oo faah faahsan waa kuwan hoos ku xusan.




**Jaantuska 1.3: Aksum iyo Nuubiya dhul deegaan ahaan halkay ku yaaleen**

## Ilbaxnimadii Nubiya

Nuubiyaanku waxay ahaayeen dadyaw deganaa dhinaca waqooyiga Bari ee qaarada Afrika, kuwaasoo degenaa labada dhinac ee dooxada webiga Niil gaar ahaan inta u dhaxaysa Aswaan oo Masar ah iyo Khartuum oo Suudaan ah. Dhinaca waqooyi ee dalka Suudaan ee wakhtigan xaadirka ah gaar ahaan xuduudka uu dalku la wadaago dalka Masar ayaa loogu Magac-daray Gobolka Nuubiya. Nuubiyaankii deganaa Webiga Niil isku mid ma'ahayn dabiici ahaan gobolkaas oo qaybo ka mid ahi ay ahaayeen kuwo ku haboon xaga beeraha, halka ay qaybaha kale ay ahaayeen kuwo aan la degi karin oo laga guuray markii la is bar bar dhigo. Gobolkan oo aad u baaxad wayn oo ku yaal dhinaca waqooyi Bari ee Suudaan waxaa laga helaa lamadegaanka Nuubiya.

Haddaba markii aynu dib u fiirino taariikhdii hore ee ay lahaayeen Nuubiyaanku, waxay mar marka qaarkood ku midoobi jireen hal boqortooyo oo keliya, halka ay mar marka qaarkood u kala bixi jireen laba iyo in ka badan oo boqortooyo. Mid ka mid ah xarunteedu waxay ahayd Nuubiyada hoose, mid kalena Dongoola, halka ay mida sadexaad ka ahayd koonfurta fog oo gaadhsiisnayd ilaa Shendhi.

***Nuubiyada Hoose:*** Waa meesha ay hada fadhiistaan biyaha harada Nasiir ee ka soo noqda Biyo xidheenka sare ee Aswaan, waana dhulka aadka ugu dhow uguna ahmiyada wayn ee saamaynta ku leh dhaqanka Masaarida.

***Dongoola:*** Waxay ahayd xaruntii Nabaata taas oo ahayd mid ka mid ah boqortooyinkii ugu horeeyay ee Nuubiya.



Jaantuska 1.4: Qalcadii Nuubiya

Boqortooyadii Nabaata mar marka qaarkood waxaa loo yaqaanay boqortooyadii kuush, waxayna ka soo shaac baxday Dongola waxayna gaadhay. Intii u dhaxaysay Qarniyadii 9aad C.H ilaa 4aad C.H markii dambana waxaa qabsaday Meroe oo la wareegay xeerarkii ay boqortooyadii Nuubiya isku xukumi jireen laga bilaabo Qarnigii 4aad C.H ilaa iyo Qarningii 4aad C.D.

Sannadkii 641 C.D dawladii Carbeed ee Masaaridu waxay weerar ku soo qaaday Nuubiya oo ay kala wareegtay Dongola, waxayna markii dambe cuqaashii Nuubiyaanka ka dalbeen inay bixiyaan canshuuraha sannadkiiba oo ay uga bixiyaan adoonsi ahaan

Markii maamulkii Masaaridu liicay kadib 1100 C.H, Nuubiyaanku waxay dib u hanteen madaxbannaanidoodii loo yaqaanay kuush, waxayna aasaaseen xarumo cusub oo xagga maamulka iyo diintaba ku haboon, waxaana ka mid ahaa Nabaata oo ay agteeda ka dhiseen qalcadii Afraad, dhaqankoodii Kushitiskuna ku soo shaacbaxay.

Xusuus:

*Nuubiyadii hore waxay xarun ka dhigatay Nuubiyada hoose iyo Dongola. Dongola waxay ahayd xaruntii Nabaata, Boqortooyadii Nabaata Mar mar waxaa loo yaqaanay Boqortooyadii Kuush. Beerihii iyo dhaqaalihii Kuushka wuxuu ku salaysnaa dhaqashada Lo'da, Beerashada Galayda iyo Hadhuudhka, sidoo kale kharashka ay ka heli jireen gobolada iyo ka ganacsiga fool maroodiga, hargaha iyo geed loox madow oo koonfur ka iman jiray.*

Ku dhawaad 770 C.H. kuushkii waxaa qabsaday Masaaridii oo kana aasaasay Boqortooyadii 25aad (ku dhawaad 770 – 657 C.H.) goobta la yidhaahdo Tebes (Thebes), markii dambena kushitisku waxay iska saareen Masaaridii Qarnigii 7aad C.H, kadib markii ay qabsadeen Asiiriyaanku Bariga Dhexe.

Kushitisku waxay Isaga baxeen Nabaata ayaga oo mar kale u fogaaday dhinaca koonfureed ilaa Meroe raaciyeena qabsashadii ama duulaankii ay Masaarida sannadkii 593 C.H. Meroe intii u dhaxaysay Qalcadihii shanaad iyo lixaad, Nuubiyaanku waxay ka asaaseen Boqortooyo cusub oo ku salaysnayd farsamo casri ah oo cusub oo shaqada Birta ah.



## Hawl-galka 1.5

Su'aalahan soo socda la falanqee saaxiibadaa

1. Halkee bay ku taalay Nuubiya?
2. Maxaa ka mid ahaa guulihii ugu waawaynaa ee Nuubiyiinta?
3. Muxuu ku salaysnaa Dhaqaalihii Nuubiya?

***Muuqaaladii ugu Muhiimsanaa (waawaynaa) ilbaxnimadii Nuubiya:***

- *Boqortooyadii kuushka oo caan ku ahayd horumarinta magaalooyinkeedii, kuwaasoo ay ka mid ahaayeen Meroe iyo Nabaata oo ahaa xarumo u adeega maamulka.*
- *Kushitisku waxay horumariyeen habka dhalaalinta biraha oo ay ka samayn jireen waxyaabo kala duwan.*
- *Waxay dhiseen Ahraamtii Masar oo kale, taallooyin iyo macbadyo.*
- *Inkastoo xukuumadihii ama taliyeyaashii Nuubiyaanku ay u hogaansanaayeen maamulkii Masaarida ee diinta ku dhisnaa, tan iyo ku dhawaad 600 C.D, Nuubiyaanku waxay markii dambe noqdeen kiristaan ilaa iyo qarnigii 15aad C.D.*
- *Boqortooyadii kuushku waxay u guureen xaruntoodii dhanka koonfureed iyaga oo ka yimid Nabaata una guuray Meroe ku dhawaad 300 C.H.*
- *Nuubiyaanku waxay isticmaali jireen Fartii Masaaridii hore ee Hiiroglafiska ahayd.*
- *Waxay qaateen hab dawladeedkii boqornimada iyo diiniga ahayd ee Masaaridii hore.*
- *Moroe waxay ahayd xaruntii ugu waynayd ee wax soosaarka samaynta biraha oo ay ka samayn jireen warmaha iyo fallaaraha waxayna horumariyeen Dhaqankoodii, luuqadoodii iyo Qoraalkoodii.*
- *Waxay caabudi jireen sanamyo ay aaminsanaayeen ay ka midka ahaayeen sanamkii Birta ee Abodemik (Apodemick).*
- *Waxay Boqoradooda dhinta ku aasi jireen qabuuro ku dhex yaalay Ahraammo yaryar.*



t) *Fartii Masaarida ee Hiirogliifis (Egyptian Hieroglyphics)*



b) *Ahraamta kuush (pyramid of kush)*

**Jaantuska 1.5: Ahraamta kuush iyo Fartii masaaridii hore**

## II *Ilbaxnimadii hore ee Aksum*

Boqortooyadii Aksum waxay ka soo ifbaxday xeebaha Badda Cas oo ah haatan Itoobiya iyo Eritriya meelo ka mid ah. Boqortooyadani waxay ka dhalatay Waqooyiga Bari ee Afrika, laga bilaabo Qarnigii koowaad ee C.H ilaa iyo horaantii qarnigii Todobaad C.D. Aksum waa mid ka mida Bariga Afrika ilbaxnimooyinkii hore ee ka jiray, gobolka ay ku taallay waa qaybaha waqooyi ee Geeska Afrika oo u badan Itoobiyada iyo Eriteriyada maanta. Xarunteedu waxay ahayd Magaalada Aksum, oo ku taala waqooyiga Itoobiyada maanta. Dhaqan ahaan waxay aad isugu dhawaayeen Dadyawga Koonfuurta Carabta, waxaana ka dhexeeyay xidhiidh luuqada iyo caadooyinka ah. Boqortooyadii Aksum waxaa horumariyay markii ugu horaysay ismaamul hoosaadyo yaryar oo gobolka ka jiray. Ismaamuladaas waxaa ugu caansanaa Dhamat oo ka jirtay ilaa qarnigii shannaad C. H, taasoo aasaastay xaruna ka dhigatay xeebta oo la odhan jiray Yeha.

Reer Aksum ilbaxnimadoodii way horumartay, waxayna awood u yeesheen inay dhisaan wadooyin, buundooyin (kaabado) taalooyinka caanka ah ee dhaadheer iyo dhulka ay u qorshaysteen inay degaan.




## Hawl-galka 1.6

Su'aalahan soo socda isla falanqeeya adiga iyo saaxiibadaa fasalka gudihiisa.

1 xaggee bay Aksum ku taallay?

2 Ma tixi kartaa qaar ka mid ah guulihii ugu waawaynaa ee Reer Aksum?

3 Muxuu ku salaysnaa Dhaqaalihii Aksum?



Jaantuska 1.6: Taallada dheer ee Aksum



Jaantuska 1.7: Qoraaladii saabiyaanka

Aksum waxaa markii ugu horaysay laga helay, qoraal taariikhi ahaa oo uu ka qoray nin Giriig ah oo hage ama naakhuude ka ahaa markab socdaal ku maray xeebaha Badda cas. Qoraalkaas oo uu ugu magacdaray "Safarkii Badda Ereteriya" ,taariikhdu markay ahayd qarnigii koowaad C.D. Aksum waxay horumarisay oo ay balaadhisay ganacsigeedii Badda cas, iyada oo isticmaalaysa dekadeedii Adhuulis. Boqorkii ugu horeeyay Aksum wuxuu ahaa Soskales, sida ka muuqata qoraalada taariikhiga ah ee laga helay meelaha ku yaala waqooyiga Aksum (gudaha Ereteriya), sida ay qoreen Giriigii hore. Boqorkii Aksum ee wakhtigaas waxaa loo yaqaanay Boqorkii Boqorada.

Aksum waxay caan ku ahayd lacag qadaadiic ah oo uu ku sawirnaa Boqor la odhan jiray Endubis, magaciisuna ku qornaa taasoo ku beegnayd 270 C.D. Haddaba laga bilaabo xilligan ilaa iyo horaantii qarnigii 7aad C.D, lacagta waxaa ku sawirnaa Boqoradii isku xigay ee Aksum iyo magacyadoodiiba.



Jaantuska 1.8: Lacagtii qadaadiicda ahayd ee Aksum

Boqoradii Aksum ee qarniyadii $3^{aad}$ iyo $4^{aad}$ C.D waxay galeen olole milatari oo ay ku qabsadeen Badda cas labadeeda dhinac, waxaa kale oo ay Aksum ka taageen taallada caanka ah. Badhtamaha qarnigii $4^{aad}$ C.D, Boqorkii Aksum ee Isaana (Ezana) wuxuu qaatay diintii kiristaanka, waxayna dhalisay inay Carabtii weeraro iyo duulaano ku soo qaadaan guud ahaan Badda Cas agagaarkeeda. Aksum waxay ku weyday (lumisay) in badan oo ganacsigeedii Badda Cas ka mid aha, waxayna noqotay go'doon, aakhirkiina Boqortooyadii way burburtay waxayna sii jirtay oo ay ku soo gabagabowday Qarnigii $10^{aad}$ C.D.

Muuqaaladeedii ugu muhiimsanaa, waxaa kamid ahaa kaniisadaha oo badbaadiyay boqortooyadii Itoobiya ee is-xig-xigtay sidii maamul diimeed. Awoodii ay Aksum lahayd oo u suuro gelisay Ganacsigii iyo waxyaabihii ay dhoofin jireen ee ay soo saari jireen sida:- Fool maroodi, Qolofta Diinka, Haraga wiyisha, xawaashka, Dahabka iyo dhagxaan qaali ah oo laysku qurxiyo iyo Addoonta. Waxayna ku soo bedelan jireen badeecadaha ay ka mid yihiin:- Hubka, waxyaalo ka samaysan biro laysku qurxiyo, maacuun ka samaysan qaruurado, dharka, dhar kale oo gaar u ahaa dadka Qasriyada Boqortooyada jooga oo ilaa jilbaha gaadha, iyo dheriyo. Ganacsigaas oo ahaa mid habka toos wax u kala bedelka ee cidina u dhaxayn.



## Hawl-galka 1.7

Adiga iyo saaxiibadaa isla falanqeeya su'aalahan soo socda:

1 Magacaw Badeecadihii ay Aksum dhoofin jirtay iyo kuwii ay la soo degi jitay?

2 Sharax ka bixi Dhaxalka taariikiiga ee ay Aksum ka tagtay?

Boqortooyadii Aksum, waxay balaadhisay ganacsigeedii, waxayna aas'aastay xidhiidh Dibloomaasiyadeed iyo mid ganacsi oo wanaagsan oo ay la yeelatay. Koonfurta Carabta (Yeman), Beershiya (Iiraan), Hindiya, Sirilaanka iyo Shiinaha intaas waxaa u dheeraa, Duulaamadii ay hogaaminaysay ee ay kaga gudubtay

Badda cas oo ay hogaaminaayeen sida duulaankii uu hogaaminayay Boqor kaaleb oo uu ku qaaday hogaamiyeyaashii Yeman 514 – 530 C.D

## 1.2.2 Dhaxalkii Taariikhiga ee Boqortooyadii Aksum

***Maxaad kataqaannaa Dhaxalkii taariikhiga ahaa ee Aksum? Isku day inaad magacowdid qaar ka mid ah guulihii ay soo hoysay Aksum?***

Kuwan soo socda qaar ka mid ah waa guulihii ugu waawaynaa ee ay Aksum uga tagtay jiilba jiilkii ka dambeeyay:

- *Aksum waxay bilowday shubida lacagta qadaadiicda ah oo ah noocii Roomaanka oo kale oo wax kala badalashada sahashay iyo soo ururintii cashuuraha.*
- *Waxay dhalaaliyeen Birta oo ay ka samayn jireen hub iyo Agab kaleba.*
- *Magaalada Aksum oo ay ka taageen taallada caanka ah.*
- *Luuqadoodu waxay ahayd Ge'iis kaasoo ahaa halka ay xuruufta Amxaarigu ka soo jeedo*
- *Waxay tarjumeen kitaabkii Baybalka oo ay ku qoreen Ge'iis (kaas oo noqday Asalka qoraalka Amxaariga casriga ee Itoobiya)*
- *Waxay qaabeeyeen heerarka bulsho ee Boqortooyada oo ku salaysnaa kuwan:* Dabaqada laandheerayaasha oo ku xeernaa Boqorka iyo kuwa kuxiga laandheerayaasha oo ay ka mid ahaayeen Baayacmushtarka, Farsamayaqaanada iyo muusiq yaqaanada siday u kala horeeyaan.




### Hawl-galka 1.8

1 Idinka oo Koox – koox ah isla falanqeeya Ahmiyada wayn ee ay taalada Aksum u leedahay Itoobiya?

2 Soo jeediya taariikh yar oo kooban oo ku saabsan taalladii dhawaan dalkeena lagu soo celiyay ee mudada dheer tiilay Rooma waddanka Talyaaniga?

*Sawiradan soo socda waxay ku tusayaan farshaxankii iyo farsamadii ay lahayd Aksum.*




**Jaantuska 1.9: Dhalaalintii Birta ee Aksum**

## Xasuus

- *Boqortooyadii Aksum waxay ka soo shaac baxday waqooyiga Bari ee Afrika Qarniyadii 1aad C.D ilaa 10aad C.D*
- *Boqoradii ugu caansanaa Aksum waxaa ka mid ahaa Soskales, Isaana, Kaaleb, Endubis*
- *Boqor Isaana wuxuu qaatay diinta kiristaanka oo uu si rami ah maamul diiniya uga dhigay qarnigii 4aad C.D*
- *Diinta Islaamku waxay ku soo fidday Itoobiya Bilowgii qarniigii 7aad C.D*

**Shaxda 1.2:(b) wakhtigii iyo waxyaabihii ugu muhiimsanaa xadaaradii Nuubiya**

| Xadaaradii Nuubiya (Kuush) | |
|---|---|
| Wakhtigii | Waxyaabihii ugu muhiimsanaa |
| 2575 – 2134 C.H | Soo faragellintii badnayd ee sii kordhaysay ee masaaridu ku haysay Nuubiya |
| 1700 – 1567 C.H | ◊ *Boqortooyadii kuushka oo u talinaysay waqooyiga Nuubiya*<br>◊ *Kushitiskii Nuubiya waxaa xukumayay Boqortooyadii 25aad ee Masaarida.*<br>◊ *Nuubiyaanku waxay deganayeen xaruntii Boqortooyadooda ee Memfis.* |
| 590 C.H | Masaaridii waxay soo weerartay Nuubiyada sare |
| 400 C.H | Nabaata waxay ahayd xaruntii maamulka islamarkaana dawladii Boqortooyada kuushku fadhiday |
| 1525 C.H | Masaaridii waxay balaadhisay xuduudaheedii gumaysatayna Nuubiya |
| 1550 C.H | Boqortooyadii 18aad ee Nuubiya waxaa hoos uga dhacay aqoonsigii Masaarida ee ahaa inay gobol yihiin kamid ah |
| 712 – 660 C.H | Kushitiskii Nuubiya ee Masaarida xukumayay waxay xarun ka dhigteen Memfis |
| 1-100 C.H | Meroe waa xiligeedii ugu fiicnaa |

**Shaxda 1.3: (t) wakhtigii iyo waxyaabihii ugu muhiimsanaa xadaaradii Aksum**

| Xadaaradii Aksum | |
|---|---|
| Wakhtigii | Waxyaabihii ugu muhiimsanaa |
| Qarnyadii $1^{aad}$C.H - $7^{aad}$C.D | Boqortooyadii Aksum soo shaac baxday |
| | ◊ *Aksum waxay ka adkaatay oo ay baabiisay xoogii Nuubiya ee maamulayay Meroe.*<br>◊ *Magaalo madaxdoodu waxay ahayd agagaarka webiga Niil*<br>◊ *Koonfurta Nuubiya waxay hoos tagtay Boqor kaleb kii Aksum Martkii uu qabsanayay Bada cas xuduudihiisana fidinayay Q.$6^{aad}$ C.D* |
| 330 C.D – 320 C.D | ◊ Waa xilligii uu Boqor Ezana qaatay diinta Kiristaanka xukuumadiisiina kadhigay<br>◊ Boqor Ezana wuxuu duulaan ku qaaday Beeja oo ah qawmiyad ku kacsanayd. (kasoo horjeeday) |
| Qarniyadii $7^{aad}$ – $12^{aad}$ C.D | Waxaa loo yaqaanaa waayihii madoobaa ee Aksum maxaa yeelay Awoodeediibaa liicday |

# 1.3 DHAWRISTA, ILAALINTA GOOBAHA DHAXALKA AH IYO DHIBAATOOYINKA LA SOO DERSA GOOBAHA DHAXALKA AH

***Ujeeddada gaarka ah ee casharka***

***Markii uu casharkani dhamaado kadib, ardaydu waxay awoodi doonaan inay:***

- Qeexaan dhaxalka taariikhiga islamarkaana faahfaahiyaan,
- Sharaxaan Dhawrista iyo ilaalinta Dhaxalka Dabiiciga ee Bariga Afrika,
- Sharaxaan Dhibaatooyinka goobaha Dhaxalka ee Bariga Afrika haysta.



## Hawl-galka 1.9

Maxaad ka fahantay Dhaxalka?

***Deegaankiina ama meesha aad degan tihiin ma laga helaa dhaxalka taariikhiga ah? Koox ahaan isla falanqeeya Ahmiyada Dhaxalka?***

Dhaxalku waa taariikhdii, caadooyinkii iyo tayadii waddan ama Bulsho ay lahayd ilaa iyo haatana sannado badan loo tix gelinayay ahmiyadooda qayb ka ah dabeecadahooda.

Sida ku xusan diiwaanada taariikhda ee tilmaamaya goobaha dhaxalka taariikhiga ah, waa kuwo ka kooban deegaanka debiiciga iyo deegaanka bulshada. Aqoonyahannada ku takhasusay goobaha dhaxalka taariikhiga ahi waxay ku qeexaan inay goobaha dhaxalku yihiin hanti, isla markaana u kala baxaan laba qaybood oo kala ah: goobaha dhaxalka ee debiiciga iyo kuwa dad-sameega ah.

Tusaaleyaasha ugu muhiimsan waxaa kamid ah ee Dhaxalka: Dhismayaasha Taariikhiga ah, Dagaamada burburay, Macbadyada, Goobaha diiniga, muuqaalada kala duwan ee dhulka sida Buuraha, Dooxooymka. Kaymaha, Biyo dhacyada, Tuulooyinka gaboobay iyo kuwo kale.



**Hawl-galka 1.10**

Isla falanqeeya su aashan soo socota

◊ Sidee bay dadku u isticmaalaan Dhaxalkooga?

## 1.3.1 Goobaha Dhaxalka iyo ahmiyadooda

Goobaha dhaxalku dadka waxay u leeyihiin faaiidooyin badan. Waxay u adeegi karaan tirada Bulsho – dhaqaale, dhaqan iyo ujeedooyin kaleba. Haddaba kuwan soo socda iyo kuwa kaleba Dhaxalka taariikhiga waa kuwo ahmiyad guud u leh.

### I *Raad-reebka Taariikheed*

Waddamo badan oo waxaa jira sida ay Diiwaanada taariikhdu tilmaamayaan, dadku sidii ay waayadii hore u noolaayeen lagu qaadaa dhigi karo iyada oo loo sii marayo goobahan oo kale. Tusaalaha ugu fiican waxaan inoo noqon kara Aksum oo ina tusaysa Qasriyada Boqortooyo gabowday ama hore, ee ay ka midka ahaayeen boqoradii Shaba iyo taallada Aksum. Meelaha ay degaan dadka reer Koonso oo ka tirsan shucuubta iyo qawmiyadaha koonfureed ee Itoobiya, sidoo kale waxay caan ku ahaayeen habka carada loo xanaaneeyo oo ay taariikh u lahaayeen gaar ahaan Hab-qodaal naxaraynta buuraha. Waxayna ka jiraan dalka Itoobiya qaybo kala duwan oo ka mid ah Ma magacaabi kartaan qaar ka mid ah oo laga helo Itoobiya? Isla falanqeeya.



Jaantuska 1.10: Qalcadii Burburtay ee Boqoradii Sheba

## II *Dakhliga ka soo gala*

Dadyow kala duwan oo farabadan ayaa ka kala yimaada dunida qaybo ka mida, soona booqda goobaha dhaxalka, iyagoo si toos ah iyo si dadbanba kharash u soo gelinaya dalka. Tusaale hadii qaar kamid ah dalxiisayaashu ay Huteelo dagaan, iibsadaana alaabo 1.w.m. Sidaa darteed Huteelada iyo dukaamaduba way cammirmi karaan, nolosha dadkeenanna wax wayn baa iska bedelaya.

## III *Soo Jiidashada Dalxiiska*

Dalxiisayaashu waa dadka u safra meel ilaa meel, si uu u soo arko goobaha la yaabka leh ee Dhaxalka iyo ujeedooyin kaleba. Waxay ka helaan oo xusuus ku reebta meelaha kala duwan iyo waayo aragnimo iswaydaarsiga dhaqamada kala duwan. Markay meel booqosho u tagaan waxay uga sheekeeyaan saaxiibadood ama xaga warbaahinta. Tusaale ahaan meelaha layaabka leh ee dalkeena sida: Niilka Buluuga ah, Buuraha Semein ee ku yaalla gobolka Amxaarada, Buuraha Baali ee gobolka Oromada oo dhamaantood ah kuwo soo jiidan kara dalxiisayaasha.



Jaantuska 1.11: Biyo dhaca Niilka Buluuga

## IV *Cilmi baadhista iyo waxbarashadda*

Goobaha dhaxalku waa kuwo aad muhiim ugu ah xag daraasadeed iyo tacliinta dadka. Tusaale: Arkiyoolojiistayaasha dhulka ee raadinaya Hadhaagii iyo qalfoofkii waxay qaadaa-dhigaan ama lafa guraan waa waxyaabihii hore ee la soo dhaafay. Tusaalaha ugu fiican ee goobaha Dhaxalka waxaa inoo noqon kara, Gobolka Canfarta oo laga helay lafihii dadkii ugu horeeyay dunida oo kala ah: Lusii iyo Ardi. Aksum iyo waxa ku xeeran ee ay qodaan Arkiyoolojiistayaashu.


Dhanka kalana culimada ku takhasustay barashada dadka iyo dhaqamadooda ee daraasada ku sameeya dhaqamada Bulshadu waxay iyaguna adeegsadaan ujeedooyin daraasadeed. Tusaalaha ugu fiicani waa meelaha ay dagaan Koonso iyo Hamer oo deegaanka Shucuubta Koonfureed ee Itoobiya ka tirsan.

## V *Goob-dalxiis*

Goob-dalxiis waa mid ka mid ah noocyada kala duwan ee dalxiiska, meeshaas oo ay dadku deegaanka dabiiciga ah ka samaysan karaan xarumo dalxiiska ku haboon. Muuqaalada dabiiciga ah ee noqon kara goob-dalxiis waxa ka mid ah kaymaha, Dhul-cawseedyada i.w.m, halkaas oo si wada jir ah looga heli karo midkood dhirta iyo xayawaanka isla deegaan qudha laga heli karo oo noqon kara goob dhaxal ah oo kale. Goobaha dhaxalka ee laga samayn karo goob dalxiis ee dalka Itoobiya waxaa ka mid ah:- Buurta Saalooda oo ku taal Cadwa (Tigraay), Buuraha Baali ee Deegaanka Oromada, halkaas oo aad ku arki karto Niyaalaha iyo Dacawada cas, Buuraha waqooyi oo ku yaal Deegaanka Amxaarada oo laga helo Waaliya Ibekis iyo nooca daanyeerka ka midka ah ee loo yaqaano Jildha Babuun (childa Baboon).



b) ***Dacawada Cas***



t) ***Waaliya***

**Jaantuska 1.12:**

## 1.3.2 Goobaha Dhaxalka Ee Itoobiya

Waxaa jira goobo kala duwan oo ah dhaxalka taariikhiga ah ee dalka Itoobiya. Waxayna ku kala yaallaan deegaamo kala duwan. In kastoo ay badan yihiin, hadana ilaa haatan intii la rabay in ka hoosaysa ayay xogtooda ka hayaan xafiisyadii shaqada ku lahaa ee dalkeena sida wasaarada Dhaqanka iyo Dalxiiska

Federaalka iyo xafiisyada Dalxiiska Deegaamada Dalkeena.

Kuwa ugu caansan waxaa ka mid ah: *Aksum, lalibeela, Gonder, Buuraha Baali, Godka Suufi Cumar, Dire Sheekh Xuseen, Konso,* Goobaha xayawaanka lagu dhaqo ee qaranka sida: *Awaash, Mago, Omo, Gambela I.W.M.*



b) *Qasriga boqor Fasildaas (Gonder)*



t) *Dhagxaanta tiya (Tiya Stone)*



j) *Gurigii Giyorgis (Laalibela)*



x) *Masaajidkii Axmed Nejaash (Tigreega)*

**Jaantuska 1.13: Goobaha dhaxalka**



**Hawl-galka 1.11**

Su'aashan soo socota islafalanqeeya fasalka gudihiisa.

◊ Idinka oo adeegsanaya khariidada dalxiiska ee Itoobiya sharaxaad ka bixiya goobaha ugu muhiimsan ee Dhaxalka Itoobiya

## 1.3.3 Dhibaatooyinka la soo Dersa Goobaha Dhaxalka

Dhibaatooyinka ka hor imaan kara goobaha dhaxalku, waa kuwo kala duwan oo isbad-badalaya. Waxayna noqon karaan kuwo dabiici ah iyo kuwo ay Dadku sameeyeen.

*Dhibaatooyinka goobahan haysta kuwa ugu waawayn waxaa ka mid ah:*

## I *Tuugada (xatooyada)*

Waayahan dambe tuugada ama xatooyadu waxay noqotay dhibaatooyinka ugu waawayn ee haysta goobaha Dhaxalka. Alaabta (Agab) kala duwan oo taariikhi ah ayaa meelo ka mid ah dunida laga xaday ama laga qaatay. Masaajidyo, kaniisado iyo madxafyo badan ayay waxyeelo u gaysteen tuugadu ama xatooyadu.

## II *Waxyeelada Dabiiciga ah*

Dhaawacyada ugu badan ee goobahan haysta ee uga imaanaya dhinaca Dabiiciga waxaa kamid ah: Roobka, Dabaysha, qorraxda i.w.m xaaladaha noocaas ahi waxay sababi karaan Burbur ama cimilawga, Dildilaacin iyo isbedel ku dhaca midabka asalkiisii uu sheygu lahaa.

Tusaalaha ugu fiican waxaynu u qaadan karnaa kaniisaddaha Lalibella.

## III *Ugaadhsiga Sharci – darrada ah*

Kaymaha iyo Buuraha silsilada ah waxaa laga helaa noocyo badan oo duurjoog ah, waxaana khatar wayn ku haya ugaadhsiga sharci darrada ah. Dadyaw waxaa jira u ugaadhsada xayawaanka duurjoogta ah, cunno ahaan, Harag iyo Dhogor ahaanba. Arimahan iyo kuwa kaleba waa kuwo baabiin kara ama dabargoyn kara duurjoogta Dhaxalka ah kana dhigi kara meelahaas kuwo aan soo jiidasho lahayn.

## IV *Dabka*

Dabkuna wuxuu kamid yahay kuwa ugu khatarta badan ee goobaha dhaxalka baabiin kara haddii aan laga hor tagin.Dabku wuxuu baabiin karaa kaydadka dhamaan goobaha iyo warbixinadoodii (xogtoodii). Dhismeyaasha ay yaallaan Agabka ama Alaabta ay ka mid yihiin: Buuggaagta, farshaxanka, waxyaabaha la qoray I.W.M oo uu dabku aafayn karo. Sidoo kale dabku wuxuu asiibi karaa kaymaha, Dhirta iyo xayawaanka laga dhex helaba.



## Hawl-galka 1.12

Islafalanqeeya su'aalahan soosocda:

1 Ma magacaabi kartaan qaar kamid ah dhibaatooyinka ugu waawayn ee haysta goobaha dhaxalka ee dalkeena Itoobiya?

2 Maxaad ku cabiri kartaan, maka fikirteen talaabooyin haddii la qaato lagaga bad-baadin karo goobaha Dhaxalka hagardaamooyinka haysta?

## 1.3.4 Hababka Dhawrista goobaha Dhaxalka

Sida aynu soo wada aragnay ilaa xad goobaha Dhaxalku aad bay muhiim u yihiin sababo badan oo jira awgeed. Sidaa awgeed, Waxaa loo baahan yahay inaynu dhawrno. Haddii aynu u baahan nahay inaynu faa iidada ugu badan ka helno. Waxaa jira habab kala duwan oo loo dhawri karo dhaxalka waxaana ka mid ah:

### I *In lasiiyo lahaansho sharci iyo cid masuul ka noqota*

Waxaa jira kuwo leh lahaansho sharciyeed oo ay ka mid yihiin:- Dawlada, Bulshada ama shaqsiyaad hantiiley ah oo ka badbaadin kara dhaawaca lasoo gudboonaan kara goobahan maxaa yeelay Hantiilayaashu waxay ku daryeeli karaan hantidooda. Tusaale ahaan: Milkiileyaasha ka qayb qaadan kara waxaa ka mid ah Masaajidada ama kaniisadaha, Degmooyinka ama gobolada iyo Dawlada Dhexe.

Waddamo badan oo kala duwan oo dunida ka jira, ayaa dad khaas ahi gaar u leeyihiin meelaha ay ka mid yihiin Madxafyadan ama goobaha lagu kaydiyo waxyaabaha Dhaxalka ama Aataarta taariikhiga ah.

### II *Ka qayb qaadashada Bulshada*

Bulshadu inaanay tixgelinba siinin ayaa laga yaabaa, arimaha ka qayb qaadashada mudan ee qayb ka ah dhawrista goobaha dhaxalka. Haddii ay hantidan u arkaan inay dawladu leedahay, Bulshadu ama shaqsiyaalba ha noqotee, waxay ka heli doonaan faaiidooyin toos ah iyo faa iidooyin dadban.

Tusaale: waxay samaysan karaan Dukaamo oo ay ku iibin karaan waxyaabaha dalxiisayaashu xiiseeyaan, waayo argnimo is-dhaafsi, Dakhli xoog badan oo inaga soo gala 1.w.m

## III *Wacyigelin la siiyo Bulshada*

Bulshada ku xeeran goobaha dhaxalka, waxaa laga yaabaa inaan la siinin wacyi gelin ku saabsan faa iidada goobaha dhaxalka. Sidaa daraadeed, waa in ay kooxaha ay khusaysaa sameeyaan wacyi gelin iyaga oo u adeegsanaya dhinacyada waxbarashada, siminaarada, bulshada oo la ururiyo iyo wax kastoo lagu wacyi gelin karo.

Tusaale: Dadka dega agagaarka Buuraha waqooyi ee gobolka Amxaarada iyo kuwa ku hareeraysan Buuraha Baali ee Oromada maxaa yeelay, wacyi gelintu waxay abuuraysaa inay bulshadu uga faaiidaysato habab kala duwan.

## IV *Daryeelista iyo Xannaanaynta*

Goobaha Dhaxalku waxay u baahan yihiin Daryeel, dhawris iyo ilaalin.

Tusaale hadii la daryeelo kaymaha, xayawaanka duur joogta ahi kama qaxayso oo aadi mayso meelo kale. Carrada iyo Biyuhuna si fiican bay u badbaadayaan.

Tusaale kale oo fiican, agagaarka Koonso waxay carrada soo xannaanayn jireen saddex kun oo sanno in ka badan.



### Hawl-galka 1.13

Isla falanqeeya su'aalahan soo socda

1 Sideebay dadku uga badbaadin karaan goobaha dhaxalka dhaawaca?

2 Maxaad dawlada ku boorin lahayd inay qaadato talaabooyin noocee ah oo ay ku badbaadinayso goobaha dhaxalka ah?

# 1.4 DAGAAMADA IYO HAB NOLOLEEDKA BARIGA AFRIKA

***Marka uu casharkani dhamaado kadib, waa inay ardaydu:***

- Sheegaan cufnaanta iyo filiqsanaanta Dadyawga Bariga Afrika,
- Sharaxaan Arimaha saamaynta ku leh Baahsanaanta Tirada dadka Bariga Afrika,
- Faah-faahiyaan Dhaqdhaqaaqa dabiiciga ah ee Dadwaynaha Bariga Afrika,
- Sharaxaan Hannaanka degitaan ee dadwayanaha Bariga Afrika,
- Tilmaamaan Noocyada ugu waawayn Hab-nololeedka Bariga Afrika.

Dadyaw kala duwan ayaa ku nool Bariga Afrika, kuwaasoo leh dhaqamo iyo hab-nololeed kala duwan, iyada oo ay sidaa tahay ayay hadana ku kala duwan yihiin hababka Degitaan iyo nolol maalmeed. Haddaba, falanqaynta soo socota waxaynu ku arki doonaa hab-nololeedka iyo Dagaamada Dadyawga Bariga Afrika.

## 1.4.1 Baahsanaanta Dadyawga Bariga Afrika

Badhtamihii sannadkkii 2009, Bariga Afrika waxaa lagu qiyaasay tirada dadka 314 milyan oo qof. Tani oo ka dhigan 30% tirada dadka qaarada Afrika. Tani waxay gobolka Bariga Afrika ka dhigaysaa midka ugu dadka badan Afrika. Dalka ugu dadka badan Bariga Afrikana, waa dalkan Itoobiya. Dalka ugu dadka yarina waa Jasiirada siishalis.

Haddaba baahsanaanta ama kala filiqsanaanta dadyawga bariga Afrika waa midaan is le'ekayn. Tani oo ay ugu wacan tahay arimo badan oo saamayn ku leh hab – degitaanka Aadaminimo. Waxa aad arkaysaa meelo dadku ku yar yahay iyo meelo dadku ay lsku cufan yihiin. Cufnaanta tirada dadku waa cabbiraada baahsanaanta dadka. Waxaana lagu xisaabiyaa tirada dadka oo loo qaybiyay wadarta bedka meeshaas ay ku nool yihiin waxaana ereyadan lagu sheegaa tiro ahaan

$$\frac{\text{Tirada dadka}}{\text{kiilomitir labajibaran}} = \frac{T.D}{km^2}$$


Masheegi kartaa sababta dadyowga ku baahsan gobolka Bariga Afrika aanay isu le'ekayn? Halkeebaad u malaynaysaa inay dadku isku cufan yihiin? Waa maxay kuwa tirada dadku aadka u yar tahay? Sheeg sababta?



### Hawl-galka 1.14

Adiga oo adeegsanaya khariidada cufnaanta Tirada dadka ee Afrika tilmaan kuwan soo socda:

1 Meelaha cufnaanta tirada dadku sarayso;
2 Meelaha cufnaanta tirada dadku Hoosayso;
3 Meelaha xoogaa ama in yaroo dad ahi joogaan ama aan cidiba joogin ama ku noolayn.




**Jaantuska 1.14: Khariirada Baahsanaanta Dadka Afrika**

Baahsanaanta Dadyawga Bariga Afrika, waa mid ku xidhan oo ay xakameeyaan laba Arimood oo kala ah:

i *Arrimo Dabiici (Rabaani):* waa xaaladaha Dabiiciga ah ama Rabaaniga ah ee saamaynta ku leh baahsanaanta dadka ee ay ka mid yihiin – cimilada, kala saraynta joogga dhulka, carrada san, Biyaha, Caafimaadka, Deegaanka iyo kheyraadyada kale ee dabiiciga ah.

ii *Arrimo dad-samee:* Waa kuwa aanuu asalkoodu dabiiciga ahayn, waxayna ka kooban yihiin – Dhaqdhaqaaqa Dhaqaale ee adeegyada Bulshada (dugsiyada, cusbataallada, xafiisyada, dhismayaasha, warshadaha i.w.m) iyo hababka ama hannaanka kale ee dhaqdhaqaaqa dadwayne.

Bariga Afrika tirada dadku waxay aad u saraysaa oo ay isku cufan yihiin dhulka joogga sare leh. Taas oo ay ugu wacan tahay cimilada meelaha jooga sare leh oo

ku haboon inay dadku ku noolaadaan. Maxaa yeelay waxay:

- *Leedahay cimilo qoyan, taas oo ku haboon isla markaana leh roob wanaagsan oo quudiya beeraha*
- *Leedahay heer kul dhex dhexaad ah*
- *Xor ka tahay cudurada Dhulalka kulaalayaasha ka jira sida: Duumada ama malaariyaada, Cagaarshowga iyo xanuunada kale ee loo seexdo.*

Taas waxaa lidkeeda (Kasoo horjeeda), Dhulka joogiisu hooseeyo oo ah meelo aad u kulul, qalalan oo ay ku badan yihiin cudurada laga helo kulaalayaasha. Waana ta keentay in ay noqdaan meelaha ugu dadka yar Bariga Afrika

Si kastaba hanoqotee, daamaha (agagaarka) wabiyada iyo meelaha kale ee Biyaha badan laftigoodu, Degitaanka way ku fiican yihiin xataa jooga dhulku mid uu hooseeyo ha noqdee.

Cufnaanta dadka ee sare sidoo kale waxaa laga helaa agagaarka Haraha waawayn, waxaana tusaale loo qaadan karaa Bariga Afrika, waxaa laga helaa harada ugu wayn Afrika ama harooyinka ugu waaawayn Afrika. Meelahaasi Bariga Afrika oo keliya uguma dad badna ee qaaradda oo dhan bay ugu dad badan yihiin



## Hawl-galka 1.15

Waa maxay sababta aad ugu malayni inay yihiin meelaha ugu cufnaanta dadka badan dhulka haraha waawayn leh?

*Waddamada ugu cufnaanta dadka badan waa Mawriishiyas, Mayotte iyo Ruwaandha oo cufnaanta dadkoodu tahay 629.5 qof/km$^2$, 4897 qof/km$^2$ iyo 397.6 qof/km$^2$ siday u kala horeeyaan sannadkii 2009. Waxaa taa kasoo horjeeda oo lidkeeda noqonaysa Somaaliya, Saambiya iyo Jabuuti oo noqonaya waddamada ugu cufnaanta dadka hooseeya 15.4 qof/km$^2$, 15.7 qof/km$^2$ iyo 22.4 qof/km$^2$ sida ay u kala horeeyaan.*

Dagaamada dhulka joogga sare leh waa kuwo joogto ah oo ku salaysan habka isku dhafka beeraha, dhinaca kalena dadka dega meelaha Jooga hoose leh waa kuwo la qabsaday reer guuraanimada. Taas oo ay macnaheedu tahay waxay haystaan xoolo ay kamid yihiin lo'da iyo adhiga kuwaa oo ay ula guuraan meel ilaa meel, xiliyada kala duwan si ay ula raadsadaan meel baad iyo biyo leh. Waxaana hab nolleedkooda bedela cimilada kala duduwan. Dhulka jooga sare lehi wuxuu kaga duwan yahay qoyaanka iyo kulaylka dhexdhaxaadka ah, sidaas awgeedna u ogollaaday inay dagaan dalagyana kasoo saartaan.

Dhulka joogga sare leh ee Itoobiya, agagaarka gobolka harooyinka waawayn, dhuka joogga sare leh ee Rwanda, Brundi iyo Kiiniya dadku aad bay u cufan yiliin. Dhinaca kalena, meelaha joogga hoose leh ee ay cimiladoodu kulushahay isla markaana qalalan tahay dadku way yaryihiin.

## Dhaqdhaqaaqa Dadka

Dhagdhaqaaqyada Dadku waa kuwo Astaamo guud oo isku mid ah leh. Dadku waxay ka guuraan meel ilaa meel sababo kala duwan awgeed. Taas waxaa loo yaqaanaa reer guuraa. Reer guuraanimada dadka waxaa looga tix-raacaa dadka dhaqdhaqaaqiisa meel ilaa meel kale. Dhaqdhaqaaqa noocan ahna waa mid caam ka ah Bariga Afrika, dadkuna ay u guuraan waddamada meel ilaa meel kale.



### Hawl-galka 1.16

Isla falanqeeya

- ◊ Waa maxay sababta ay dadku uga guurayaan meel una guurayaan meel kale? Adiga oo la falanqaynaya ardayda tilmaan ka bixi arimaha sababa?

Dadku inay ka qaxaan dagaamadooda waxaa ugu wacan sababo Bulsho, Dhaqaale, deegaan ama siyaasadeed. Sababaha qaarkood waxaa ka mid ah:- Baadigoob shaqo, waxbarasho, adeegyo bulsho oo ka fiican iyo Dhibaatooyinka kala soo gudboonaada Deegaanka sida:- Abaaraha, Gaajada, xaalufka iyo Masiibooyinka dabiiciga ah oo ku qasba inay dadku ka qaxaan dagaamadooda ka jira.

Waxa kaloo dadka ku qasbaya inay qaxaan dhubaatooyinka siyaasadeed sida:- Rabshadaha, dagaalada sokeeye iyo khilaafaadyada kale ee dagaamadooda.

## Sheeko-gaaban 1.1

### Dhaqdhaqaaqii Dadka Oromada

Dhaqdhaqaaqii dadka Oromadu wuxuu ahaa kii ugu balaadhnaa Itoobiya, wuxuuna dhacay qarnigii 16$^{aad}$ C.D (laga bilaabo 1522). Asal ahaan Oromadu waxay ku noolaan Jireen meesha loo yaqaano Madda Walabu xuduuda u dhaxaysa Baali ilaa Borena.

Dhaqdhaqaaqan waxaa sababay arimo badan oo dabiici iyo aadamiba isugu jira. Isku dhacyo iyo khilaafaadyo ka dhacay geeska Afrika iyo isbadalka cimilada oo la aaminsan yahay inuu dhulkoodii ka kaxeeyay. Baadigoobka meel kafiican oo ay ku badbaadaan ayay bilaabeen inay u guuraan dhulka jooga sare leh.

Oromada waxaa loo kala qaybiyaa laba qaybood oo kala ah Borena iyo Barentu, oo ukala guuray jihooyin kala duwan oo gudaha iyo dibada Itoobiya ah, Barentu waxay u guurtay Waqooyiga Bari ee Itoobiya, halka ay Borena u guurtay Waqooyiga Galbeed ee Itoobiya. Dhaqdhaqaaqani wuxuu socday sanado badan gaar ahaan intii dhaxaysay (1522 – 1618). Dhaq-dhaqaaqani wuxuu saamayn ku yeeshay hannaankii daganaansho ee Itoobiya Oromadu wakhtigan waa dadka ugu dhulka balaadhan itoobiya, waana mid ka dhalatay dhaqdhaqaaqii dadka ee qarnigii 16aad. Oromadu waxaa kale oo ay u guureen isla wakhtigaas jihooyinka Kiiniya iyo Soomaliya.

Dhamaan sababahaas aynu kor ku soo xusnay waxay, ahaayeen Dhaqdhaqaaqa dadwayne ee gobolka u gaarka ahaa, waxaa kale oo intaas u sii dheeraa, degenaansho la'aanta siyaasadeed ee ay khilaafaadyadu sababeen ee waayadan dambeba ka aloosnaa dalal badan oo ku yaalla Bariga Afrika sida: Ruwanda, Soomaaliya iyo Suudaan oo Keenay inay dad badani ka qaxaan dalalkoodii. Taasi si la mid ahna gaajo iyo abaaro laxaad leh oo ku habsaday dalka Itoobiya ayaa iyana dhalisay in dad badani ka qaxaan hoygoodii.

Qaxootigu (Doolaalku) wuxuu leeyahay Saamayn fiican iyo mid xun waxaana alkuma; Nabadgelyo la'aan, iskudhacyo dhaqameed, qalalaase haybta ah iyo kuwo kale oo haajirida alkuma. Tani bedelkeeda (lidkeeda) waa mid suura geliya inay helaan fadhiisimo xirfado iyo shaqo leh. Xaga qaxootiguna waa inay helaan waxyaabo fiican oo dhaqan dhaqaale markii ay u guuran meelo ka fiican oo ka horumarsan hoygoodii

## 1.4.2 Korodhka Dhaqsaha ah ee dadka iyo Saamayntiisa

Qaarada Afrika, waa qaarada ugu xawliga badan dunida dhinaca koritaanka dadka. Koritaanka dadku waa natiijada (jaddeeyada) ka dhalata farqiga Dhalashada iyo Dhimashada. Mid ka mid ah qaybaha Afrika oo ah Bariga Afrika, waxaad ku arkaysaa Koritaanka ugu yaabka badan ee tobonaankii sanno ee lasoo dhaafay. Waxaana ugu wacan hagaajinta adeegyada caafimaad iyo sidoo kale nadaafada waxaana ka dhashay:

- *Nolosha caadiga ah oo korodha*
- *Saamiga dhimashada oo yaraada.*

Xataa haddii uu saamiga dhalashadu hoos u dhaco gobolkan waa mid ka dhalatay korodhka isticmaalka qorshaynta qoyska. Haweenka Bariga Afrika waxay dhalaan in ka badan celceliska haweenka dalalka horumaray.

Tirada dad ee saafiga ahi waxay kordhisay nolosha caadiga ah, yaraynta dhimashada, dhalashada sare laakiin hoos u dhacday ee gobolkani, waxay keentay dhaqsaha koritaanka dadka. Saamiga koriinka ee dadka Bariga Afrika ka fiiri shaxdan soo socda:

**Shaxda 1.4: Saamiga Koriinka dadka ee Bariga Afrika**

| No | Dalka | SKD | No | Dalka | SKD |
|---|---|---|---|---|---|
| 1 | Burundhi | 2.1 | 11 | Mosaambiik | 2.4 |
| 2 | Komoros | 2.5 | 12 | Riiyuunyan | 1.3 |
| 3 | Jabuuti | 1.9 | 13 | Ruwaandha | 2.5 |
| 4 | Ereteriya | 2.9 | 14 | Siishalis | 1.0 |
| 5 | Itoobiya | 2.7 | 15 | Soomaaliya | 3.0 |
| 6 | Kiiniya | 2.7 | 16 | Taansaaniya | 2.3 |
| 7 | Madhagaskar | 2.9 | 17 | yugaandha | 3.4 |
| 8 | Malaawi | 3.1 | 18 | Saambiya | 2.9 |
| 9 | Mawriishiyas | 0.7 | 19 | Simbaabwi | 1.4 |
| 10 | Mayoote | 3.6 | Celeceliska Gobolka | | 2.6 |

*SKD = Saamiga Korodhka dabiiciga*

*Illaha: Warqada xogta tirada dadka dunida, 2009*

Saamiga Korodhka Dabiiciga ah waa faraqa u dhaxeeya saamiga dhalashada iyo saamiga Dhimashada ee dad lagu siiyay, intaad labada saami kala goyso (Jarto) waxaad u qaybisaa farqiga kuu soo baxay 10 markaa, waxaad helaysaa saamiga Boqolkiiba xisaab ahaana waa sidan:

$$SKD = \frac{SDha - SDhi}{10}$$

SDha = saamiga dhalasda
SDhi = saamiga dhimashada



## Hawl-galka 1.17

Adiga oo tixraacaya shaxdan sare ka Jawaab Su'aalahan

1 Waddamadee baa ugu sareeya saamiga korodhka xilliga laga tixraacay?
2 waddamadee baa ugu saami korodhka hooseeya sannadkii 2009 kii?

Bariga Afrika waxaa lagu tilmaamaa koriinka ugu dhaqsaha badan ee dadka celcelis ahaana koriinka waxaa lagu qiyaasaa 2.6% sannadkii 2009kii. Xataa hadii uu hoos u dhaco saamigu ilaa haatan wuu sii kordhayaa. Haddii uu sidaa ku sii socdana mustaqbalka wuu labalaabmayaa qiyaastii 27 sanno. Tanina waa mid aad iyo aad u kordhaysa.

Labanlaabka wakhtiga tirada dadku waxay u baahan tahay, in tirada laftigeeda la labanlaabo oo 70 loo qaybiyo saamiga korodhka dadka. Xisaab ahaanna waxay noqonaysaa.

$$LW = \frac{70}{SK}$$ LW = labalaabka Wakhtiga, SK = Saamiga korodhka



## Hawl-galka 1.18

Ilaa iyo xad waxaynu ku soo sheegnay Bariga Afrika midka ugu korodh dhaqsaha badan dadka.oo ah ta keentay korodhka Baaxada tirada dadka Haddaba ma faa iiday u tahay mise faaiido – darro wadamada gobalka? Sababee? Adiga oo la falaqaynaya ama la kaashanaya Ardayda fasalka

Koritaanka Tirada dadku waxay leedahay Faa'iido iyo faa'iido – darro labadaba, si kasta ha noqotee, waddamada Bariga Afrika waa dalal aan horumarin oo sabool ah, aad bay khasaare ugu tahay. Qodobadan soo socda waa qaar ka mid ah koritaanka degdega ah ee dadka gobalkan saamaynta ugu wayn ku leh.

### I Cadaadiska adeegyada Bulsho

- ***Adeegyada Waxbarasho:*** *Markii uu dhaco korodhka degdega ah ee dadku waxaa kordha, tirada gaadhay waxbarashada da'da caruurta ka qayb gelaysa Dugsiyada, tani hadii aan laga digtoonaanna dhalin doonta Adeegyada waxbarasho oo yaraada.*
- ***Adeegyada Caafimaadka:*** *Dad badan waxay ka dhigan tahay, baahi badan oo loo qabo adeegyo Caafimaad, waana ta dhalinaysa korodhka baaxada tirada dadku inay cadaadis saaraan adeegyadii Caafimaad.*
- ***Adeegyada Gaadiidka:*** *Aadamigu Dabiici ahaan waa mid socod badan, meel bay ka tegi waxay aadi meel kale ujeedooyin kala duwan. Tani waxay keentay in loo baahdo adeeg Gaadiid, si kasta ha noqotee dadka Bariga Afrika way sii kordhayaan, waxaana aan isku dheeli tirnayn dalabka iyo helista. Tani waxay abuurtay dhibaatooyin xaga is-dhex-galka iyo dhaqdhaqaaqaba.*
- ***Guriyaynta:*** *Waa mid ka mid ah Baahida aasaasiga ah ee dadka guryuhu. Markii Tirada dadku ay korodhaba, waxaa sidoo kale kordhaya guryaha baahida loo qabo. Sidaa darteed, haddii aan dhibaatadan xal loo helin wakhtigeeda dadku waxay ku fashilmayaan inay helaan Guryo caadi ah.*

## II *Yaraanshaha Dhul beereedka iyo dhul-daaqsimeedka*

Sida qaalibka ah dhulka ayaa ah ka keliya ee wax laga soo saari karo. Markii Tirada dadku ay, korodho si degdeg ah, waxaa imaanaya cadaadis fuula dhulkii miyiga ku yaalay. Natiijadeeduna waxay noqoni in dhul beereedkii yaraado qasabna ku noqoto dadkii inay ka qaxaan.

## III *Waxyeelaynta Deegaanka*

Koritaanka degdega ah ee dadku ugu horaynba, waa deegaanka meesha ay khatartu ku dhacayso. Tani waa sababta keenta inay dadku si qaldan u isticmaalaan deegaanka markii tiradoodu korodho, xaqiiqdii awooda uu qaadi karo deegaanku. Si khaldan u adeegsiga deegaanka waxaa ka dhasha qodobadan:

B Carro guur
T Dhir xaaluf
J Daaqsin xaddhaafa
X Wasakhow (dikhow)
KH Nabaad guur

## IV *Shaqo - la'aanta*

Dad badan macnaheedu wuxuu noqonayaa korodhka xooga shaqaale, si kasta ha ahaatee, markii uuna dhaqaaluhu qaadi karin xoog shaqaale oo uu wax ku soo saaro waxay noqonaysaa inuuna waxba shaqaalaynin taasina ay saamayso shaqsi ahaan iyo gobol ahaan labadaba.

## V *Saboolnimada kordhaysa*

Haddii dadka intiisa badan ay noqdaan keliya kuwa isticmaala khayraadka ay haystaan, hantidoodu way baaba'aysaa iyadoo ay u hogaamin doonta saboolnimo. Haddaba koriinka degdega ah ee dadku hadii uuna wadanin koboc dhaqaale oo degdeg ah. Waxaa ka dhalanaya saboolnunadii oo sii korodha.

## Magaalaynta iyo saamaynteeda Bariga Afrika

Magaaloobida garowga Bariga Afrika waa mid si guud uga muuqdata. Fiditaanka ay fidayaan magaalooyinka la degayo iyo korodhka baaxada tirada dadka. Gobolkan waxaa lagu Asteeyaa saamiga ugu sareeya ee ka qixitaanka miyi ilaa magaalo iyaga oo ay dadku raadinayaan waxbarasho, shaqo iyo nolol cusub.

Si kasta ha noqotee, Afrika waa qaarada dunida ugu magaaloobida yar in ka yar 38% oo keliya baa ku noolaa magaalooyinka sannadkii 2009 kii. Markii la barbar dhigo Bariga Afrika gobolada kale ee Afrika waa gabolka ugu reer magaalka yar oo 22% keliya ayaa ku noolaa magaalooyinka sanadkii 2009 kii. Si kasta ha noqotee, waa gobolka ugu saamiga sareeya qaaradda oo dhan dhinaca magaaloobida.

Magaaloobida degdega ahi waa natiijada saamiga sare ee miyiga ilaa magaalo u qaxaya (qulqulaya). Dadka ka imanaya Baadiyuhu waxay magaalooayinka ku hayaan Arimo ku Riixid ah iyo soo Jiidid ah. Arimaha ku Riixida ah:- waa dhibaatooyinka meelaha baadiyaha (miyiga) ka jira sida: Dhul beereed and Daaqsin yaraanta, Deegaan xumaanta, Adeegyo waxbarasho la'aanta 1.W.M. Arimo soo Jiididda ah:- Waa Xoogga soo jiidasho ee ay ka mid iyhiin:- fursadaha shaqaalaynta, adeegyo Bulsho oo ka fiican iyo Rabitaanka meelaha magaalooyinka ah.

Saamiga koritaanka magaalo ee Bariga Afrika waa mid ka mid ah kuwa dunida ugu sareeya. Si kastaba ha noqotee, Heerka Magaalaynta ayaa aad u hooseeya Magaalaynta degdega ahina waxay keenaysaa isbadal iyo ahmiyad degdeg ah oo ku yimaada dadka iyo Hab nololeedkiisa iyo Deegaanka ay ku nool yihiin.

## Hawl-galka 1.19



Isla falanqeeya Iskuna daya inaad taxdaan qaar ka mid ah saamaynta Magaalaynta Barlga Afrika

Dadka ka qaxaya miyiga ee u qulqulaya magaalooyinka, marmarka qaarkood waxay kala kulmaan dhibaatooyin. Dhibaatooyinkaas oo khatar u gaysta xaaladahooda nololeed. Qaarkood dhaqankoodii baa ka xumaada iyo hab nololeedka kala duwan. Dhinaca magaalooyinka ay dadkan noocan ahi ku soo qulqulayaan waxay keentaa Adeegyadii Bulshada oo yaraada sida:

- *Gaadiidka*
- *Biyaha*
- *Guryaha I.W.M*

Marmarka qaarkood dadku waxay heli karaan nasiib wanaagsan, oo ay ku guulaysan karaan inay helaan lacag badan, heli karaan nolol raaxo leh. Inkastoo magaalooyinka qaar aad qani u yihiin qaarna sabool yihiin, Bariga Afrikana magaalooyinkiisu ma aha kuwo aanan laga filaynin sidaas oo kale.

# 1.5 XAALADAHA SALDHIGA U AH KALA DUWANAANSHAHA DEGAAMAYNTA IYO HAB-NOLOLEEDKA

## Khayraadyada iyo cimilada

***Ma ogtihiin in aduunyadan ay ku nool yihii 6 Bilyan oo qof? Miyay kala baahsan yihiin?***

Inta badan dadku waxay isugu soo urureen 30% ka dhulka qaybtiisa berriga ah. Halka 70% ay tahay qaybta oogada dhulka ee badaha waawayn halkaas oo dadyawga laga helaana Halkii kiiloo mitir laba jibbaaranba xoogaa dad ah yihiin.

Tani waxay ina tusaysaa in tirada dadku aanay sidaa u sii kala baahsanayn oo ay waxyar uun ku kala duwan yihiin waxaana ka mid ah cimilada iyo khayraadka, waana qodobada masuulka ka ah kala duwanaanshaha.

***Cimilada:*** Dadku sidiisaba ma aha mid dabiiciyan ay soo jiitaan meelaha cimilada xun ee aad u kululu ama aad u huurka badan iyo diiranba. Tusaalaha ugu fiicana-na waxaa inoo noqon kara:

- *Meelaha cidhifyada (aad u qabow)*
- *Lama-degaanka saxaaraha Afrika, lama-degaanka carabta iwm. (kulul oo qalalan)*
- *Saxanka koongo iyo Amasoon (Diiran oo huursan)*

### Sheeko-gaaban 1.2

## Iskiimooska

Dadka loo yaqaanno Iskiimoosku waxay degan yihiin Waqooyiga Kanada. Waxay ku dhaqmaan nidaamyadii hore ee casri Jaahiligii ee ku dhisnaa wax wada wadaagista, in wax la wada helo, wixii aan qiimo ugu fadhiyina dhinac looga soo wada jeesto, shaygaas ama markii ay cunto yaraani ka dhacdo.

Waxay ku nool yihiin meelaha qabowga darran ee cidhifyada dhulka, markii uu ku xumaaday deegaankii ay deganaayeen. Markii jiilaalka khatarta badan la gaadho, waxay isaga sugnaadaan guryahooda ka samaysan Barafka ee loo yaqaano igloos. Inta lagu jiro xiliga xagaayada gaagaaban waxay galaan guryo ka

samaysan Haraga iyo maqaarka oo lamoodo Teendhooyinkeena oo kale. Haragan ama maqaarkan oo ah xayawaano ay meelo fogfog ka soo ugaadhsadeen.

Qaabkii ay u noolaayeen baa ku adkaaday ugaadhii, kaluunkii baa ka fogaaday markaa iyaga oo markii horeba ahaa xoogaa yar, ayay u guureen meel aad uga sii dhib badan halkii ay ka soo guureen, kana cufnaan yar, Tobankii qof ama in ka yarba waxay ku mool yihiin Hal kiiloo mitir oo laba jibaaran, tani waxaa lidkeeda ah meelaha cimilaadoodu soo jiidashada leedahay ee caafimaadka qabta ee ay ku noolyihii dadka faraha badan Tusaalaha ugu fiican aynu u qaadan karno.Losaanjalis oo ku taalla gobolka Kalafoorniya ee Maraykanka waa meel cimilo ku soo jiidanaysa oo ku raali gelinaysa oo ah cimilada Midhiteraaniyanka, dadka halkaa joogaana, waa dad ladan oo hab-nololeed heer sare ah ku nool, isla markaana uu hogaaminayo hab-nololeedkooda fiican

## Khayraadka

Ereygan khayraad waa isutagga waxyaalaha ay kamid yihiin: Biyaha, xaabada lashito, Quwada korontada, Beeraha yaryar, dhul cawseed, difaaca 1.w.m.

- ***Biyaha:** Biyuhu waxay yihiin kuwa aasaasiga ah ee laf dhabarta u ah noole dhamaantii meel kasta ha joogee. Tani waa sababta ay xadaaradii hore ee masaarida, Mesobataamiya i.w.m ay uga soo if baxeen daamaha ama dhinacyada webiyada dhaadheer kadib, markii la isku halayn kari waayay biyihii roobka oo yaraaday kuwii ceelashuna ay fogaadeen.*
- ***Dhulka ku haboon Dalaga beeraha:** Waa mid kamid ah waxyaabaha aas aa siga ah ee lagama maarmaanka u ah inay dadku si wada-jir ah ugu noolaadaan oo ay ka heli karaan quudin. Dhulka ku haboon dalag-beerashadu waa mid u baahan in laga beero dalaga ku haboon ee noqon kara isha cunnada. Sidaa awgeed, waa in dhulka ku haboon beerashada laga ilaaliyo waxyaabaha ku qasbaya inuu isu bedelo dhul kale.*
- ***Xaabbo lashito:** Dadku aad bay ugu baahan yihiin si ay wax ugu karsadaan, casrigan iminka lagu jiro inkasta oo koronto la istimaalay haddana waa ilaha ugu muhiimsan wadamada soo koraya. Waddamada horumaray laftigooda meelo ka mid ah aadba ha u yaraatee waa laga helayaa*
- ***Quwada dhalinta korontada:** dhawaanahan dambe oo ay dadku aad uga faaiidaystaan iyo habka casriga ah ee magaalo nololeedka waxaa lagaga dhaqmaa awooda korontada oo noqotay mid bedesha xaabadii*

*lashidan jiray ee dhirta waana ta keentay inay dad badani meelahaa isugu yimaadaan. Meesha aanay ka jirin ama ay ku yar tahayna dadku aanay degayn.*

- ***Difaaca:*** *waa mid aad muhiim u ah, oo ay dadku u baahan yihiin inay si wada jira nabad galyadooda u ilaashadaan, dhinacna uga soo wada jeestaan cadawgooda. Tusaale, markii Itoobiyaankii hore ay dagayeen dhulka jooga sare waxaa ay dhibaato ka haysatay dhinaca biyaha iyo weeraro lagu soo qaadayay, sidaa darteed bay difaac ahaan, Dhulka Jooga sare dhufays uga dhiganayeen.*

## Sheeko-gaaban 1.3

### Dadka Reer Koonso

Dadka Reer Koonso, waa qowmiyad ka mid ah qowmiyadaha ku nool shucuubta koonfureed ee dalka Itoobiya, waxayna degaan meelaha jooga sare leh ee u dhaxaysa harada Jaw-baahir ee dooxada Rifti iyo harooyinka yar yare ee dooxada Rift ku dhex yaalla Waxay degeen dhulka taagga ah si ay isaga difaacaan Jinsiyo (dadyow) kala duwan oo ku xeernaa oo uu dagaal iyo khilaafyo ka dhexeeyeen oo socday sannado badan.

Markaa Dadkii Reer Koonso ahaa waxay dantu ku qasabtay inay beerihiina la koraan dhulka sare ee ay degeen laakiin dhibaato wayn ayay kala kulmeen waxayna samaysteen hab-dhaqan gacmeedka loo yaqaano “ Naxaraynˮ (Terracing) si ayna carradu u nabaad-guurin ama carro guurin.



## Hawl-galka 1.20

Tilmaan haddii deegaankiinu yahay mid cimiladiisu xun tahay ama aad u fiican tahay? Isna bar- bar dhiga tirada dadka ku nool deegaankiina iyo degmooyinka ama gobolka? Hadii ay jiraan kala duwanaansho falanqeeya sababta ay ku dhacday?.

## Xasilooni darada iyo Dagaalada sokeeye

Xidhiidhka ka dhexeeya dawladaha maanta dunida ka jira, mudo badan waxay ku soo jireen kacaan u horseeday, inay si wada jir ah uga baxaan iyaga oo iska kaashanaya la haystenimada.

Marmarka qaarkood, waxay kuwani sababeen in si qaldan looga fikiro oo aan loo baahnayn, isla markaana hubsiimo la'aan ah. Si kasta ha noqotee, waa maxay sababta ay xukumaduhu midba midka kale ula dagaalamo? Sababaha keena khilaafyada ka dhexeeya dawladaha, waa mid soo if baxda markii ay doonto dawladi, inay guulo kasoo hoyso hadafkooda meesha ugu saraysa ee awoodeed, ee ka dhanka ah kuwa kale, waxaana aasaas u ah loolanka dhinaca awoodda ah iyo xoojinta aqoonsigooda nidaamyada caalamiga ah.

Mawduucan, khilaaf waxaa looga jeedaa iska hor-irmaad dhex mara shaqsiyaad, kooxo, iyo dawlado taasoo sare u qaada shucuurta dhexdooda waxaana ugu wacan kala duwanaanshaha danaha ay kala wateen ee iska horyimid. Waxayna u dhacdaa laba ama in ka badan oo dhinacyada qiimaha, kheyraadka iyo afkaartaba oo keenaya isku dhacyo aanay weligood heshiin.

Sababaha ugu mihiimsan ee dhaliya khilaafyada dawladaha dhexmara waxaa ka mid ah:

- *Kheyraadka yaraaday sida: lacagta, qalabka, Adeegyada.*
- *Kala duwanaanshaha Aragtida, qiimaha, ama Awooda wax-qabad.*
- *Ku heshiin la'aanta baahidooda, ujeedadooda iyo danahood.*
- *Isgaarsiin liidata.*
- *Qaab- dhismeedka urur ahaaneed oo liita.*
- *Koox-u-wada shaqayn la'aan.*
- *Kaalintooda iyo masuuliyadahooda oo aan cadayn (muuqanin).*



## Hawl-galka 1.21

Sameeya koox- koox u wada falan qayn

◊ Xubnaha ka tirsan bulshada "A" waxay ka wada xaajoonayaan Ajendahooda (Arimahooda) guud oo ku saabsan deegaanka waxayna raadinayan xal kale si ay u najaxdo dantoodu

Laakiin waxay ku guul daraysteen inay ka tanaasulaan ugu dambayntii waxtarka ay u leedahay xaalada hada lagu jiro.

Inaga oo ku salaynayna qodobada aynu sare ku soo xusnay ee ah waxa keena ismaandhaafka. Haddaba aynu fiirino noocyada ugu caansan khilaafyada ilaa xad la soo maray waxaa kamid ah:

- *Muranka dhinaca xuduudaha ah oo ay ku jiraan go'aamada isku daygu.*
- *Khilaafyada ay awooda siyaasadeed ka dambayso*
- *Khilaafyada Dhaqaale sida: ganacsiga, la dagaalanka mukhaadaraadka (maandooriyaha). i.w.m*
- *Khilaafyada xaga Jinsiyadaha.*
- *Khilaafyada diinta.*

Dhamaan noocyadaas la ina siiyay, waa kuwa noqon kara khilaafka ka dhexeeya Itoobiya iyo Eriteriya. Inkastoo ay jiraan hawlo kala duwan oo balada aloosay iyo isu tanaasulkii oo lays kaga tagay, si loo xaliyo khilaafka ka dhexeeya labada dal bilcaksigeedana (kasoo horjeeda), muranada oo ahaa kuwo sirgaxan caqabadna ku ah nabada caalamka Tani waxay naqotay, sababta keentay inay qarxaan dagaalo waawayn, taasoo ay waddamada dunidu ku qasbeen in colaada la joojiyo wada hadalna lagu dhameeyo khilaafka.

Arimahan soo socda waa kuwa sababa khilaafaadyada.

## Sheeko-gaaban 1.4

### Jeejniya

Jamhuuriyada muslimka ah ee Jeejniya, waa mid aad qani (Hodon) ugu ah saliida oo isku dayay, inay ka go'aan Ruushka horaantii sannadkii 1990dii tani waxay dhacday burburkii midawgii soofiyeeti kadib. Si kastaba ha ahaatee Dawlada Federaalka ah ee Ruushku waxay qaaday talaabo ay kaga hor tagayso kuna baabiinayso hawlgaladaas kadibna, waxay dhulka la sintay magaalo madaxdii jeejniya ee Garoosni. Hase yeeshee Ruushkii waxaa soo wajahay weeraro iska caabin ah oo uga imaanayay Jabhada xoraynta Jeejniya ilaa haatanna dhibaatadii way taagan tahay.

***Ma qiyaasi kartaan sababaha dhaliya khilaafyada? Ma kula tahay xoog wayn oo la yeesho in macnaheedu yahay in lagu dego meelo muramo ka jiraan?***

Dadka qaarkii daraasadahaa aynu soo magacawnay waxay ugu yeedhaan dagaalo sokeeye. Dagaal sokeeye waa khilaafyo hubaysan oo u dhexeeya kooxo wadaaga hal dal ama xukun oo u dagaalamaya sidii uu mid waliba xukunka u qaban lahaa

# Sheeko-gaaban 1.5

## Soomaaliya

Ka hor 1991kii, Soomaaliya waxay ahayd, dawlad dastuuri ah oo leh Madax wayne, kaasoo ahaa madaxa maamulka dawlada iyo Hogaamiyaha wadanka oo lahaa hal xisbi oo keliya oo iska leh Awooda fulinta ilaa iyo 1969 kii. Kadib markii Max'ed Siyaad Bare laga tuuray xukunka dawladii Soomaaliya waxay isu rogtay dal dagaalo sokeeyeay la hadheen oo aan lahayn dawlad dhexe. Kadibna way ka sii xumaatay oo ilaa haatan waxaa ku dagaalama hogaamiye kooxeedyo.

Falanqeeya Daraasadan sare idinka oo isku dayaya qodobadan:

- *Soo koob arrimaha u horseeday Soomaaliya khilaafaadkooda.*
- *Maxay ahayd qaddiyada ay dagaal oogayaashu ula dagaalamayaan midba midka kale?*
- *Khilaafkoodu muxuu ku sallaysan yahay?*
- *Waa noocma khilaafkoodu?*
- *Ma tixi kartaa natiijooyinka ka dhashay dagaalada sokeeye ee Soomaaliya?*

## Dagaaladii Sokeeye ee Itoobiya

Waa xilligii ay Boqortooyadu kaalinta ku lahayd Itoobiya. Xilligaasoo ay ka hor yimaadeen dhibaatooyin aad u ba'naa oo kaga imaanayay kooxo kala duwan oo dadyow ah. Dadka Itoobiya gaar ahaan bulshadii beeralayda ahayd waxay galeen halgan khadhaadh oo ay ku dalbanayeen sinnaan, caddaalad iyo Dimuqraadiyad. Sababihii ugu waawaynaa kacdoonkii Itoobiya wuxuu ahaa:

- *Siyaasad ku dhisnayd caanshuur takooridnimo*
- *Canshur xad-dhaaf ah oo noocyo badan oo saarnaa beeralayda*
- *Hantidii ay dadku iska lahaayeen iyo xuquuqdoodiiba looma aabayeelin, beeralayda badankoodna, dhulkiibaa laga qaatay*
- *Xukun milatari oo keli talis ahaa oo cadaadis daran ku hayay.*
- *Arbushaad iyo Jaha wareer ku habsaday xuquuqihii Aadminimo iyo Dimuqraadiyadeed.*
- *Qoomiyadaha iyo quruumaha oo aan si isle'e kayn dhinacyada xuquuqda u heli jirin*

Qodobadaas iyo kuwa kaleba wakhtiyadaas waxay ahaayeen hab dadka loogu diido degenaanshaha oo ka dhigtay inay yihiin Adoomo oo kale (waxaan qiimo lahayn) iyo halku dhegyo kale oo badan oo loogu yeedhi jiray

Kacdoonkii ugu horeeyay ee beeralaydu, wuxuu ahaa kii Tigraay ee loo yaqaanay woyane I (1943) halgankoodii ugu horeeyay ee hubaysnaa waxay kaga soo horjeesteen Boqortooyadii iyo kii labaad oo isna kaga soo horjeesteen xukunkii keligii taliska ee milatariga ahaa 1975kii Beeralayda kale ee Dhaqdhaqaaqii Goojaam 1966kii Baali 1963 – 1970kii Gediyo oo isna dhacay waxay ku dalbanaayeen sinnaan iyo cadaalad

***Isla-falanqeeya natiijooyinkii ka dhashay dhaqdhaqaaqyadani halgankii ay la soo galeen talisyadii cadaadiska ahaa?***

Dhaqdhaqaaqyadaasi waxay noqdeen kuwii u horseeday in waddanka Itoobiya isbedelo siyaasadeed ka dhacaan. Bulshadii beeralayda, xoolo dhaqataada, ardayda, shaqaalaha dawlada ahayd, waxay dhamaantoodba taageero siin jireen jabhadihii halganka kula jiray talisyadii cadaadiska ahaa ee kala duwanaa. Waxayna ugu dambayntii keentay in boqortooyadii xilligeedii soo gebageeboobo sannadkii 1974kii. Kadib waxaa taladii la wareegay kacaankii milateriga ahaa ee keli talisnimada ku dhisnaa. Bulshowayntii Itoobiya markii ay ku hungoobeen waxyaabihii ay ku taamayeen ayay dib isu abaabuleen halgankiina ay halkiisii ka sii wadeen, waxayna ugu dambayntii ka guulaysteen kacaankii milatariga ahaa sannadkii 1991kii. Dhamaan dhaqdhaqaaqyadii iyo kooxihii kala duwanaa ee halganka ku soo jiray waxay isu bedeleen ururo siyaasadeed oo ay hogaaminayso Jabhada xoraynta Dimuqraadiyada dadka Itoobiya (EPRDF).





Jaantuska 1.15: Gaajadii ba’naydee wollo iyo Tigreega ku habsatay

***Falanqayn: Falanqeeya sababihii keenay inuu degdeg u jabo kacaankii 1974 kii***

## Sheeko-gaaban 1.6

### Khilaafka Itoobiya iyo Ereteriya

Dawladdan maanta madaxa bannaan ee Eriteriya waxay kamid ahaan jirtay dalkeena Itoobiya, waxaana soo kala gumaysan jiray Talyaani iyo Ingiriiska, siday u kala horeeyaan.

1952 kii ayay Itoobiya soo raacday oo federal la noqotay, iyada oo shacabkeeduna garwaaqsanaayeen inaanay u cuntamayn xukunka Boqortooyadu: xaaladii hal mar ayay si bilaa tanaasul leh kacdoon cirka isku shareeray, waxaana ka dhashay Dhaqdhaqaaqii xoraynta Eriteriya oo laba hab siyaasadeed kala wata oo la aasaasay 1958kii kana dalbay Itoobiya madax-bannaani. Intaas kadib, Jabhadii xoraynta Eriteeriya (EPLF) Waxay mar kufto marna soo jiitantaba dagaaladii ay la soo gashay, Boqortooyadii iyo xukunkii Milatariga waxay keeneen ugu dambayn in xukunkii Milatari dhaco Ereteriyana ay xorowdo Bishii meey 28 keedi 1993 kii. Si kastaba ha noqotee, Itoobiya iyo Eriteeriya waxaa ka dhex dhacay dagaal 1998 kii badhtamihiisii oo ka dhacay xuduudka labada dal, dagaalkaas oo sababay dhimasho iyo dhaawac badan baabiiyayna hanti. Ilaa maantana mid ba mid ka kale buu isha ku hayaa weli.

***Falanqayn: Idinka oo koox-koox samaynaya falanqeeya sababaha keenay khilaafka u dhexeeya Itoobiya iyo Eriteeriya iyo natiijadoodii.***

Laakiin noqo mid huba in khilaaf yahay dhibaato, markii ay:

- *Dib u rido waxsoosaarkii*
- *Niyad jabyo keento*
- *Sare u qaado noloshi iyo khayraadyadii dadka*
- *Dadku haystaan nolol iyo khayraad*
- *Leeyihiin saamaynta baabiinta iyo kharibaada xadaarada dadka*
- *Natiijadeedu noqoto xaalad lagu guul daraystay*

Sidaa darteed, ka fogow, khilaaf iyo dagaal si aad u guulaysatid

# GUNAANADKA CUTUBKA

- Halka ay meeli dhacdo waxaa lagu sharixi karaa Deris ahaan iyo Xariiqo ahaan. Bariga Afrika wuxuu deris ahaan dhacaa beriga ku xeeran iyo baddaha uu dhinaca ku hayo.
- Boqortooyadii Aksum waxay kasoo If baxday agagaarka xeebaha Badda cas ee maanta loo yaqaano Itoobiya iyo Ereteriya. Waana Boqortooyadii ka dhalatay waqooyiga Bari ee Afrika Qarnigii koowaad C.H Ilaa horaantii Qarnigii Todobaad C.D.
- Goobaha Dhaxalka ahi faaiido badan ayay u leeyihiin dadka. Waxaana loo adeegsadaa ujeeddooyin Bulsho-dhaqaale Dhaqan I.W.M.
- Goobaha Dhaxalka ee ugu Caansan Itoobiya waa:- Aksum, Lalibella, Gonder suufi cumar, Dire sheikh Xuseen, Konso Goobaha Xayawaanka lagu dhaqo sida:- Awash, Mago, Omo, Gambella I.W.M.
- Afrika waa qaarada ugu Xawliga badan koritaanka Tirada dadka dunlda. Koritaanka dadku waa Natiijada farqiga u dhexeeya Dhalashada iyo Dhimashada.
- Bariga Afrika meelaha Jooga sara leh Degitaankuba waa mid Joogto ah oo ku salaysan habka Isku dhafka ah ee Beeraha. Sidoo kale meelaha Joogga hoose lihina waa Reer guuraa.
- Cufnaanta Dadka waxaa lagu cabbiraa baahsanaanta Tirada dadka waxaana lagu xisaabshaa Tirada dadka oo loo qaybshay wadarta bedka goobta oo $km^2$
- Magaalowga Bariga Afrika waa mid si guud u muuqda. Koritaanka xawliga ee magaalawgu waa saamiga sare ee miyiga ilaa magaalo u soo hayaamaya. Dadka doolaalka kaga imanaya miyiga (Baadiyaha) ee u dalandoolaya magaalooyinka waxaa ugu wacan laba xaaladood.
  - xaalad soo jiidasho leh oo dadku ku
  - Xaalad ku riixaya inuu dadku ka tago meesha.

# LAYLIISKA GUUD

**I** ***Weedhahan soo socda haddii ay run tahay Run ku qor, haddii ay been tahayna Been***

1. Itoobiya waa dal ka mid ah Bariga Afrika.
2. Gobolka Harooyinka waawayn waa mid ka mid ah, meelaha ugu cufnaanta dadka badan Bariga Afrika.
3. Koritaanka degdega ah ee dadka Bariga Afrika dhibaato kuma hayso.
4. Adeegyada Arimaha bulshada ee dabiiciga ah, waa kuwa saamaynta ku leh baahsanaanta dadka Bariga Afrika.
5. Todoba dal oo Bariga Afrika ahi Bad ma laha.
6. Bariga Afrika waa mid ka mid ah, xarumihii Ilbaxnimooyinkii Hore.

## II Goobo geli ama kadooro xarafka saxda ah

1 Dalalkan soo socda dalkee bayna Itoobiya deris ahayn

B Ereteriya J Jabuuti

T Kiiniya X Ruwaandha

2 Arimaha muuqaaleed ee saamaynta ku leh Baahsanaanta Tirada dadka ee Bariga Afrika waa:

B Khilaafyada siyaasadeed J Fursada shaqo abuuris

T Joogga kala saraynta X Jiritaanka adeegyo Bulsho

3 Waa dalkee dalalkan ka ugu cufnaanta dadka sareeya.

B Kiiniya J Mawriishiyas

T Itoobiya X Simbaabwe

4 keebaa kuwan soo socda ah ka saamaynta koritaan ee xawliga ah ku leh tirada dadka

B Cadaadiska Adeegyada Bulsho

T La'aanta Dhulka la beerto

J Shaqo la'aanta baahday

X Dhamaan

5 Dalka ugu Baaxada wayn Bariga Afrika waa

B Kiiniya J Ruwaandha

T Simbaabwi X Itoobiya

6 Dalka ugu Baaxada yar Bariga Afrika waa

B Ereteriiya J Soomaaliya


T Itoobiya X Mayoote

## III Isku aadi joogu taxa "B" iyo joog u taxa "T"

| "B" | | "T" | |
|---|---|---|---|
| 1 | Kiiniya | B | Djibouti |
| 2 | Saambiya | T | Antananarivo |
| 3 | Burundhi | J | Harare |
| 4 | Jabuuti | X | Lusaka |
| 5 | Madhakaskar | KH | Bujumbura |
| 6 | Aksum | D | Nairopi |
| 7 | Dongola | R | B/cooyadii ugu horaysay Nubia |
| | | S | Goobaha Dhaxalka |

## IV *Buuxi meelaha bannaan*

Magacyada dalalka Xarfaha B – Kh iyo magaalo madaxyadooda kaga Jawaab adiga oo adeegsanaya khariidadan Afrika.




| Magaca dalka | M/madaxda |
|---|---|
| Xarafka "B" waa | ______ |
| Xarafka "T" waa | ______ |
| Xarafka "J" waa | ______ |
| Xarafka "X" waa | ______ |
| Xarafka "KH" waa | ______ |

# CUTUBKA 2
# DHULKA AYNU KU NOOLAHAY



## Ujeedooyinka Cutubka

***Marka uu Cutubkani dhamaado kadib Ardaydu waxay awood uyeelan doonaan:***

- Inay taxaan halka ay dhacaan qaaradaha iyo oogooyinka Biyaha Dunidu,
- Inay sawiraan khariirada Bariga Afrika ee kutusaysa iyo muuqaaladooda dhuleed,
- Inay sharaxaan khayraadka Biyaha ee Afrikada Bari,
- Inay falanqeeyaan Lakabyada GIbIlka,
- Inay tilmaamaan summadaha iyo Astaamaha khariiradaha korkooda lagu muujiyo.

## Tusmooyinka Muhiimka ah


**2.1** OOGADA SARE EE DHULKA

**2.2** QAABABKA DHULKA UGU MUHIIMSAN EE BARIGA AFRIKA

**2.3** KHAYRAADKA BIYAHA EE BARIGA AFRIKA

**2.4** BIYAHA IYO WAXTARKOODA DHAQAALE EE BARIGA AFRIKA

**2.5** GIBILKA HAWADA

**2.6** CALAAMADAHA IYO SUMMADAHA CAALAMIGA AH EE BARIGA AFRIKA

- *Gunaanadka cutubka*
- *Layliska guud ee Cutubka*

# HORDHACA CUTUBKA

Cutubkani wuxuu ku salaysan yahay muuqaalada duleed ee dhulka, guud ahaan iyo Bariga Afrika gaar ahaan. Wuxuuna khuseeyaa oogada sare ee dhulka oo ka kooban qaradaha, iyo oogooyinka biyaha sida Baddaha waawayn iyo kuwa yaryar (Oceans and seas).

Sidoo kale cinwaanadu waxay si aad ah ugu xidhan yihiin, Bariga Afrika sida Berriga iyo khayraadyada Biyaha. Dhulka Gibilkiisa (Atmosfeerkiisa) iyo dabeecadihiisa iyo weliba calaamadaha iyo summadaha caalamiga ah ee loo isticmaalo khariiradaha iyo qodobo kale oo aydin ku baran doontaan cutubkan.

## 2.1 OOGADA SARE EE DHULKA

***Marka uu casharkani dhamaado kadib ardaydu waxay awood u yeelan doonaan inay:***

- Taxaan qaaradaha dunida iyo halka ay dhacaan,
- Magacaabaan Baddaha waawayn ee dunida iyo halka ay dhacaan,
- Tilmaamaan Noocyada kala duwan ee muuqaalada biyaha dhulka.

### Ereyada Furaha u ah casharka

- Qaarad
- Badwayn
- Har
- Bad
- Biyo macaan
- Biyo khadhaadh
- Webi



### Hawl-galka 2.1

Maxaad ka taqaan meerayaasha kale waa maxay sababta dhulka loogu qeexo "Meeraha Biyaha leh" ama "meere Biyood"?

Wadarta oogada sare ee dhulku waa 510 milyan oo kiiloo mitir laba jibbaaran. 70% dhulku wuxuu ka kooban yahay Biyo, inta soo hadhay oo ah 30% waa Berri una sii kala baxa todoba qaaradood. Sikasta ha ahaatee, Biyaha dhulka laga helo waxaa u badan Baddaha qaybta Berriga ahna Dhirta ku hagoogan qaaradaha. Oogada sare ee dhulku waa midka samaysan dhadhaabo. Lakabka ugu sareeya wuxuu ka samaysan yahay, qolof adag oo dhagxaan ah oo ka samaysmay qarax folkaane kadib, markii dab holac (laafa) uu sagxada sare ee dhulka soo gaadhay qaboobayna 4.5 Bilyan oo sannadood ka hor.

Hadda bal aynu isbar-bardhigno bedka oogada sare ee dhulka iyo meerayaal dhawr ah oo ka tirsan Bah Cadceedeedka. Fiinas waxaa loo tixgeliyaa inuu yahay mataanka meereheenna. Wuxuuna aad ugu eg yahay xagga Baaxadda. Laakiin Fiinas xaqiiq ahaan 90% oo keliya ayuu uga eg yahay dhulka oogadiisa sare. halka uu Maaris 28% oo keliya a uu qiyaastii ka yahay oogada sare ee dhulka waana ta aynu u door bidnay inaynu is barbardhigno bedka Berriga dhulka. Sidaa daraadeed wadarta oogada sare ee Maaris waa mid ay si aad ah Isaga eg yihiin berriga qalalan ee aan sinayn ee dhulka oogadiisa sare. Dayaxu wuxuu uga eg yahay oo keliya 7% sagxada sare ee dhulka.

## 2.1.1 Qaaradaha



### Hawl-galka 2.2

1 Qaaradeebaa sannadkii 2010 ka koobkii kubbada cagta ee FIFA martigelisay?

2 Qaaradee baad ku nooshahay?

3 Ma taqaanaa Astaanta mareegaha ee u taagan Ciyaaraha olombikada?

Magaca qaarad wuxuu ka yimid ama uu ka soo jeedaa. Eray laatiini ah “kontiinar” kaas oo macnihiisu yahay “Beriga aynu dul noolahay” In ka badan 70% oogada dhulka waxaa ku hagoogan Biyo, waana sababta dhulkeenan loogu yeedho “Meere Biyood” ku dhawaad saddex Meelood meel $\left(\frac{1}{3}\right)$ dhulkeenu wuxuu ka kooban yahay Berri.

Kelmada ama Ereyga Qaarad, waxaa loo isticmaalaa kala duwanaanshaha u dhexeeya bededka waawayn ee kala duwan ee dhulka, kuwaasoo loo kala qaybiyay dhulka oogadiisa. Sidaa darteed Qaarad, waa dhulka qaybtiisa berriga ah ee la dul socon karo.

Waxaa jira Todoba (7) qaaradood oo laga helo dhulka oo kala ah:

1 Aasiya
2 Afrika
3 Waqooyiga Ameerika
4 Koonfurta Ameerika
5 Antaartika
6 Yurub
7 Awstareeliya




**Jaantuska 2.1: Todobada Qaaradood ee Dhulka**

## Hawl-galka 2.3


Baro jaantuska sare ku xusan oo ka Jawaab su aalahan:

1 Qaaraddee baa ugu wayn?

2 Qaaraddee baa ugu yar?

Sida dhabta ah, Qaarad waxaa lagu qeexay berrigan aynu dul soconayno, (aynu ku dulnoolahay) Badwaynta Baasifiga, waxaa Jira Jasiirado ku yaalla oo aan ahayn qaarad. Laakiin mar waxaan odhan karnaa oo aynu siin karnaa qaarad loogu yeedho oo la yidhaahdo. “Awsheeniya” waana marka la raaciyo qaarada Austraaliya (Awstraaliya iyo Awsheeniya). Dhamaan qaaraduhu waxay ka kooban yihiin beri ahaan ⅓ (saddex meelood meel) oogada dhulka ama 30% markii la barbar dhigoqayb-biyoodka oo ah ⅔ (saddex meelood laba meelood) ama 70% oo oogada dhulka ka mid ah oo ay biyo fadhiyaan.

Waayadii hore wixii ka horeeyay 1960 kii, waxaa dugsiyada lagu dhigan jiray inay jiraan shan(5) qaaradood oo ⅔ (Saddex meelood laba meel) dhulka oogadiisa beriga ah oo laga helo Nus dhuleedka Waqooyi. Shanta qaaradoodna waxay kala ahaayeen: *Aasiya, Afrika, Ameerika, Yurub* iyo *Awstaraaliya*. Tusaale ahaana, waxaa lagu asteeyay shanta silsiladood ama mareegood ee Astaanta u ah Ciyaaraha Olombikada aduunka.



**Jaantuska 2.2: Astaanta Olombikada**



## Hawl-galka 2.4

Mareegaha Astaanta u ah Olombikada ee u taagan shanta qaaradood ee dunida: ma magacaabi kartaa shantaas qaaradood?

Khariirada Aduunka waxaad ka baadhi kartaa in Badaha waawayni ay dhulka oogadiisa ka yihiin 70% . Berriguna ka yahay 30%. Waxaa kale oo aad ku arkaysaa in Baddaha waawayni ku xeeran yihiin Todobada (7) qaaradoodba. Dhinaca qaaradahana aad ku arkaysid xuduudo Caalami ah oo kala Xaddeeya waddamada dunida ee kala duwan.

## 2.1.2 Oogooyinka (Dulaha) Biyaha



## Hawl-galka 2.5

1 Magaaladiinu Xageebay biyaha la cabo ka heshaa?
2 Magaaladiina oogada biyahee ugu dhaw?
3 Magacaw oogooyinka Biyaha ee ugu w/wayn dunida (Badwayno, Bado yaryar, Harooyin, Wabiyo)

Ereyga (kelmada) Biyaha Oogadiisa ama oogada Biyaha isu wada gee, waa kuwa dhulkeena intiisa badan ku daboolan. Waxayna ka kooban yihiin Badwayn, Bad, iyo Harooyin. Waxaa kale oo sidoo kale laga yaabaa inay ku Jiraan meelaha yar yar ee sida: Barkadaha Dhijaamaha, dhulalka qoyan (Dhoshoqa ah), webiyada, togoga, kannaalada iyo muuqaalada kale ee Juqraafiyeed waana meelaha biyuhu ka tagaan ayaga oo aadaya meelo kale. Oogooyinka Biyaha qaarkood waa dad samee sida: Keydiyeyaasha waawayn, Biyo xidheenada ama marin biyoodyada. Laakiin badan koodu waa kuwo dabiici ah.

Badwayn: waa biyo aad u wayn oo laga helo oogada dhulka. Waana(4) Afar Badood oo waawayn oo kale ah:

- *Badwaynta Baasifiga (ta ugu wayn)*
- *Badwaynta Atlaantika*
- *Badwaynta Hindiya*
- *Badwaynta Aartika (ta ugu yar)*

Wabi:- waa marin biyood aadu dheer oo ka soo bilaabma meelaha Jooga sare leh biyaha ka soo rogmada oo noqda togag isutagay ayaa sameeya.

Wabiyada kuwa ugu caansan waxaa kamid ah:

- *Wabiga Niil (ka ugu dheer dunida) Afrika*
- *Wabiga Amasoon (ka ku xiga) K/Amerika*
- *Wabiga Mississibi (Maraykanka)*
- *Wabiga shaang (shiinaha)*
- *Wabiga yeniisi (Ruushka)*

***Badaha yar yar:*** waa qayb kamid ah bad waynta ama ka goan.

Waxaana kamid ah kuwa ugu caansan: Badda kaasbiyanka oo ah biyo aadu wayn oo khadhaadh oo berri ku wareegsan yahay. Badda midhitireeniyanka oo ku xidhan Badwaynta Atlantika iyo Sargaso badda la yidhaahdo oo ah qayb kamid ah Badwaynta Atlaantika waxaana ku xeeran biyo.

Haro kasta oo wayn oo laga helo biyo khadhaadh ama milix waxaa loo yaqaanaa Badd (sea) marka laga reebo, Badda Galilee oo ah runtii haro biyo macaan.

- ***Ballay:*** *Waa haro yar oo badanaa ah dhul godan oo dabiicii ah oo u eg tog ay fadhiyaan biyo. Ereyga har waxaa looga jeedaa biyo kasta oo dhulka meel ka mid ah isugu ururay inkastoo baaxadoodana loo tixgelinayo.*
- ***Godadka:*** *waa kuwa ugu yaryar markii loo eego Haro, Badyar, iyo Badwayn.*
- ***Gacan:*** *waa dhulka qaybka mid ah oo badanaa qotoda ka hooseeya heerka Badda leh Gacamada ugu caansan dunida waxaa kamid ah: Gacanka beershiya, Gacanka Kaliforniya i.w.m.*



## Hawl-galka 2.6

Koox u wada falanqayn:

◊ Magacaw Badwaynta, Harada, Ballayga iyo gacanka kuugu dhaw meesha aad ku nooshahay.

## 2.1.3 Noocyada Biyaha



### Hawl-galka 2.7

Waa maxay sababta ayna dadku biyaha Baddaha ugu isticmaalin cabitaanka?

Biyaha si guud ahaaneed baa loogu Sharaxaa asalkooda isticmaalkooda ama dabiici ahaanba inay yihiin Biyo. Sifooyinka laga bixinayaana waa kuwo leh fogaan u dhaxaysa oo laga bilaabo si gaar ahaaneed oo sare ilaa si guud ahaaneed oo kadhigaysa mid aan la qeexin.

Biyaha dhulku waxay asal ahaan ka soo jeedaan ilaha hoose ee ay biyuhu kasoo maaxdaan ee laga helo sida ceelasha. Markii la is barbar dhiigo oogada biyaha sida: Haraha, wabiyada iyo Badaha. 97% biyaha dhulku waa kuwo milix ( Cusbo) leh halka 3% oo keliya ay ka yihiin biyo macaan biyahaas oo 2/3 (saddex meelood laba meel laga helo cidhifyada dhulka ee uu barafku qariyay kadib marka ay dhalaalaan. Inta ka soo hadhay oo ah biyaha macaan intooda badan waa kuwo laga helo dhulka qaybtiisa Beriga ah inta ka soo hadhayna waa biyaha uumiga ah ee ku jira hawada.

### Biyaha Macaan

Biyaha macaan waa biyaha aan lahayn milixda ama ay ku yar tahay waxaa laga helaa in ka yar 1% oo milix ah sida caadiga ah. Dhirta iyo xayawaanka laga helo meelaha kala duwan ee dunida waa kuwo dhamaantood ku xidhan biyaha macaan ee ay milixda ku yar tahay. Meelahase ay milixdu ku badan tahay ama xoogan tahay sida badaha waawayn kuma noolaan karaan. Biyaha macaan dabiici ahaan waxaa laga helaa oogaada dhulka sida: Balliyada Haraha, wabiyada iyo togaga iyo weliba illaha durdurada ah ee dhulka hostiisa ka soo maaxda.

Biyaha macaani waxay leeyihiin dabeecadahan kala ah millan milix ah oo aan aad u xooganayn iyo milano  kale oo adke ah. Waxaa kaloo aan odhan karaa waa wixii ka soo haray Baddaha waa wayn iyo yar yar. Noocyada kala duwan ee biyaha macaan waxaa kamid ah: Ballayada iyo Haraha Togaga iyo wabiyada iyo dhulalka qoyan. Saddexda qaybood ee biyaha Macaan  laga helo dabeecadahoodu

waa sidan soo socota:

- ***Balliyada iyo Haraha:*** *Balliyada qaarkood waa kuwo xilliyeed ah Balliyadu waxay biyaha hayn karaan ilaa laba billood halka ay Haruhu hayn karaan Boqollaal sanno ama in ka badan.*

*Balliyada iyo haruhu waxay leeyihiin kala duwanaansho xadidan oo dhinaca isirkooda ah tan iyo markii ay ka gooni noqdeen ilaha kale ee biyaha laga helo sida wabiyada iyo Baddaha waawayn.*

- *Togaga iyo webiyada: kuwan waa Biyaha u qulqulaya hal Jaho. Waxaana laga helaa meel kasta oo ay ka bilaabmaan ilaha biyahoodu. Kuwaas oo ugu horayn biyaha ka hela Biyaha Roobka, Barafka dhalaalay, xataa harooyinka qaarkood biyaha saaidka ka noqda kadibna waxay biyuhu u socdaalaan ilaa ay ka gaarayaan halka ugu dambaysa oo ah Afka wabiga oo badanaa ku dhamaada Baddaha.*
- ***Dhulalka Qoyan:*** *waa meelaha biyo fadhiisimada ah ee ay biyuhuu iska jiifsadaan waxaana socod la'aanta ka caawiya: Dhirta badan ee cufan, halka ay iska galaan Berriga iyo Badda dhulka u dhaxeeya ee Jooga hoose leh ee faafka ah, iyo meelaha tuulimaadka ah ee qashinka dhirta dhimatay iyo waxyaabaha kale ee wax nuuga ay ku badan yihiin dhamaantood waxaa loo tixgeliyaa dhulalka qoyan.*

Baahsanaanta biyaha macaan ee dunida waa mid uu gobolba gobolka kale ka duwan yahay. Dhulka biyihiisa badan ee sida xorta ah isaga dhex socdaalaya waxaa lagu tilmaamaa qiyaastii in 97% dunida biyaha laga helaa ay yihiin biyaha Badda ee cusbada leh inta kasoo hartayna ay yihiin 3% biyaha macaan.

Biyaha caadiga ah ee Barafka (Baraf guurka qaaradeed iyo Buureed). Waa kuwa ugu wayn biyaha macaan laguna qiyaaso inay biyaha dhulka ku kaydsan ka yihiin 2%, wadarta guud ama in ku dhaw 69% wadarta Biyaha macaan ee dunida.

Biyaha macaan sidoo kale, waxaa laga helaa dhulka hoostiisa waxaana lagu qiyaasaa 30% wadarta biyaha macaan ee dunida iyo Biyaha kale ee dhulka oogadiisa ku kaydsan ee ay hayaan: *Haraha*, *togaga*, *Biyo-qabatinka*, iyo *dhulka ay biyuhu ku fatahaan*.

Biyaha macaan waxaa kale oo ay kayd ku yihiin carrada dhexdeeda, Gibilka (At mosfeerka) iyo Nooleyaasha (dhir iyo xayawaan).

Biyaha macaan sidoo kale, waxaa isha ugu muhiimsan ah biyaha ka yimaada dhinaca Gibilka isaga oo qaababka kala duwan ah sida: Roob, Baraf iyo sayax. Oo dhamaantood markay dhulka soo gaaraan noqda biyaha macaan.

## Biyaha Badda (marine water)

Ereyga “ Marine” waa mid in badan soo noqda oo la xidhiidha Badwaynta iyo Baddaha. Waxaynu odhan karnaa waa sabooyinka aan biyaha milixda leh. Waana sabo ka qoto dheer Badwaynta ama Baddaha milixda leh.

Baddaha yaryar  waa kuwa ay biyahooda milixda lihi si wayn u kala baxsan yihiin laakiin deegaanka sabada biyaha milixda leh marka la bar-bardhigo Badaha kaluunka iyo Noolayaasha kaleba aadbay dhib ugu qabaan qotoda dheer ee biyaha, guud ahaanba waxayna helin diirimaadka cadceeda. Sabadan waxaa lagu qiyaasaa Afar meelood saddex meel (3/4) inay ka tahay oogada sare ee dhulka. Waxayna ka kooban tahay: Badwayn, Lakabyo Dhadhaabyo ah, Lakabyo carro (ciid) iyo dhagaxaan isugu jira iyo Har-baddeed (lagoon) oo ah (dhul yar oo badaha hoostooda ah oo la moodo har). Nooc ahaan biyaha badduhu waxay ka kooban yihiin qiyaastii 3.5% soodhiyam koloraydh, inkastoo ay diciif tahay milixda ku jirta biyaha oo ay fasaqeen biyaha macaan ama falaaraha qoraxda ee had iyo jeer uumi bixinaya.

Dhamaan geyiga (ecosystem) ugu wada wayn oogada sare ee dhulku uu leeyahay, wuxuu noqonayaa Badwaynta oo ah Dulaha ugu wayn biyaha. Waxaana laga helaa noocyo kala duwan oo noole ah oo aad uga badan ka laga helo Berriga.

Biyaha milixda leh waa kuwo ka samaysmay dhaqdhaqaaqa ay biyaha Berriga dushiisu ay mudo badan samaynayaan iyaga oo soo qaadaya dhagaxaanta iyo adkeyaasha kale kadibna marka ay ku milmaan biyaha badda noqda qayb ka mid ah milixda. Biyaha milixda leh ama Biyaha Baddu waxay leeyihiin dabeecado ay isaga mid yihiin Biyaha macaan iyo farqi u dhaxeeya maxaa yeelay, milixdu waxay ku millantaa biyaha.

Tusaale ahaan: wax iska caabinta gudaha biyaha baddu way ka sareeyaan biyaha macaan. Cufnaanta biyaha badu sidoo kale way ka sareeyaan biyaha macaan. Barta fadhiisadka Biyaha baddu way ka hooseeyaan Biyaha macaan barta karkana biyaha badda ayaa ka sareeya biyaha Macaan. Dhinaca kalena biyaha badda ayay walaxi si ka fudud ugu dul-sabayn kartaa biyaha macaan. Dadka laftigiisu biyaha badda ayay dul-sabayn karaan laakiin ma karaan biyaha macaan.

## 2.1.4 Biyaha iyo ka faaiidaysigooda Dhaqaale



### Hawl-galka 2.8

1 Waa maxay faaiidooyinka ay innoo leeyiliin khayraadyada Biyuhuu?

2 Magaaladiinu ma leedahay Quwadda korontada ee laga dhaliyo Biyaha?

Kheyraadka Biyaha ee laga helo dhulka oogadiisa sare waxaa lagu qiyaasaa inay 30% yihiin Biyo macaan (daray ah) taas oo ay maanta aadamuhu siyaabo kala duwan uga faaiidaystaan iyaga oo wakhti kasta isticmaalaya. Inta kasoo hadhayna waa kuwa cidhifyada dhulka ku oodan ama Barafka ama Biyaha uumigaa midkood. Biyuhu waa aasaaska Nolosha aadamaha ee suurageliyay in ay nololi ka jirto Meerahan aynu ku noolahay. Dhamaan noolaha oo dhan sida Dadka, xayawaanka iyo Dhirtuba Jiritaankooda waxaa saldhig u ah Biyaha.

Tusaale ahaan oogada jidhka Bini-aadamku waxay ka kooban tahay 70% Biyo lamana soo koobi karo faiidadooda. Aadamuhu waxay u adeegsadaan arrimaha ay ka mid yihiin: Isticmaalka tooska ah, ee cabitaanka cuntaada iyo nadaafadda, Beero waraabka kaluumaysiga, Dhalinta Quwadda korontada, warshadaha waxsoosaara. Dalxiiska, safarada xaga badaha iyo wabiyadaba, Difaaca deegaanka, Dhimista iyo yaraynta wasakhda warshadaha iyo. naqaska ay siidaayaan

- ***Isticmaalka Guryaha:*** *Biyaha dadku waxay u adeegsadaan uyeeddooyin toos ah iyo midaan toos ahaynba (dadban) waxyaabaha loo adeegsado waxaa ka mid ah:- Cabitaan cuntada, maydhashada, jidhka iyo dharka iyo Alaabtaba, waraabinta beerta guriga xataa xoolaha iyo xayawaanka gurijoogta ah (dab-joogta ah) waa la siiyaa oo loogu maydhi karaa Waxaana lagu qiyaasaa in 8% dunidu ay biyaha uga faaiidaystaan guryaha.*
- ***Beeraha:*** *Waxaa looga faaiidaystaa caadi ahaan, dhinaca waraabka. Baahida loo qabo biyuhu si caadi ah ayay sare ugu kacday dunida oo dhan maadaama ay yaraadeen roobab sannadeedkii la heli jiray.*

*Biyuhu waxay aad muhiim ugu yihiin koritaanka dalagyada kala duwan. Dalagyada waraabka ku baxa aad bay u sii badanayaan si loo daboolo baahida cunno ku filan tirada dadka ee sii koraysa maalinba maalinta kasii dambaysa.*

*Waxaa lagu qiyaasaa in 69% dunidu u isticmaasho biyaha dhinaca waraabka inta u dhaxaysa 15 ilaa 35% oo ka mid ahaa.*

- ***Dhalinta Quwada korontada:*** *Quwada korontada Biyaha waxaa laga dhaliyaa korontada aynu isticmaalno. Quwadan waxay Ka timaadaa ama ka dhalataa biyaha soconaya oo dhexmaraya mishiino waawayn. Quuwadani waa mid aad u jaban xaga kharashka, aan lahayn wasakhow (Diqaw), Loona bedeli karo ilo – tamareed.*
- ***Warshadaha:*** *waxaa lagu qiyaasaa in 22% ay dunidu u isticmaasho warshadaha. Warshadaha ugu muhiimsan ee isticmaala waxa kamid ah:- warshadaha waawayn ee dhaliya quwadaha sida Nukliyeerka kuwa Awooda biyaha u bedela tamarta iyo kulka. Warshadaha qaarkood oo soo saara biraha culculus oo u adeegsada qaboojin ahaan, sifaynta saliida shidaalka ah kuwaas oo u adeegsada nidaamyo kiimikaad iyo warshadaha Alaabada fudud soo saara. Kuwaas oo u adeegsada milida. Waxaa kale oo ay u adeegsadaan ku qaboojinta Alaabta ay soo saarayaan maalin walba kadib.*



### Hawl-galka 2.9

1 Wabigee ama haradee buu dalkeenan Itoobiya u isticmaala Dhalinta Quwada korontada?

2 Waa kee wabiga uu dalkeenan Itoobiya u isticmaalo Habka warabka ee Beeraha?

3 Waa kee wabiga ama Harada dalkeenan itoobiya ee caanka ku ah kaluumaysiga?

## 2.2 QAABABKA DHULKA UGU MUHIIMSAN EE BARIGA AFRIKA

***Marka uu casharkani dhamaado kadib ardaydu waa inay awood u yeeshaan inay:***

- Tilmaami karaan muuqaalada duleed ee ugu muhiimsan Bariga Afrika.
- Qeexi karaan macnaha Dooxada Rifti.
- Cadayn karaan ahmiyada wayn ee ay leedahay Dooxada wayn ee Rift.
- Kala saari karaan Bariga iyo Galbeedka Dooxada Rifti ee Bariga Afrika
- Tixi karaan Haraha waawayn ee ku yaalla Dooxada Rifti dhexdeeda

## Ereyada Furaha u ah Casharka

- Dooxada wayn ee Rifti
- Buuralayda
- Ban-Cawseedka (safaanaha)
- Haraha Dooxada Rifti
- Bannaanada
- Oogada sare ee siman



## Hawl-galka 2.10

1 Itoobiya ma qayb kamid ah baa Dooxada wayn ee Rifti?

2 Tuuladiina ama Magaaladiinu Ma ku taalaa Dooxada Rifti?

Bariga Afrika waxaa Juqraafi ahaan loo kala qaybiyaa saddex qayb-hoosaad. Qayb hoosaadka hore wuxuu ka kooban yahay: Yugaandha, Kiiniya, Tanzania, Rwanda, iyo Burundi. Gobal hoosaadka labaad, waa Geeska Afrika, waxaana kamid ah: Itoobiya, Ereteriya, Jabuuti iyo Soomaaliya. Gobol-hoosaadka saddexaad waa Jasiiradaha Badwaynta Komoros iyo Siishalis ka midka yihiin Jasiiradahani oo ah kuwo ku dhexyaalla Bad waynta Hindiya isla markaana ka tirsan dalalka bariga Afrika ee xeebaha Badwaynta hindiya dhereran kala tagsanaantan ama kala duwanaantan waxay ku salaysan tahay noocyada kala duwan ee Baadka, waxtarka Biyaha iyo muuqaalada kala sarayneed ee (3) saddexdan gobol-hoosaad.

Markii aynu ka hadlayno muuqaalada Duleed, waxaynu mudnaanta siinaynaa jooga kala saraynta dhulka, qaabkiisa iyo muuqiisa iyo weliba sida dhulka biyuhu u qulqulaan. Kuwaas oo u kala baxa: Webiyo, Harooyin, Buuralayda, dhul sare oo siman iyo dhulka aadka u qoyan ee ay biyuu dhex-jiifaan.

Afrikadda bari waxaa astaan u ah qaab dhuleed xoogaa kala yar dur-durugsan oo aad isugu dhawdhow dhinaca kala saraynta waana ta ina siinaysa inuu gobolkani noqdo mid leh dabeecado kala duwan iyo isu ekaanshaba.

Afrikada Bari waa gobolka ugu muuqaalada kala duwan qaaradda oo dhan muuqaalada waxaa looga Jeedaa is bar-bar dhiga muuqaalada duleed ee dhaca marka laga gudbayo qaybaha dhuleed (Berriga) sida: Buuralayda Dooxooyinka iyo muuqaalada kale ee Dabiici ama dad sameega ah.

Inta badan qaabka samayska dhulka Bariga Afrika waa mid uuu caan ku yahay Dooxada wayn ee Rifti. Dooxadani waxay ka samaysantay dhaqdhaqaaqa labada

dil-dilaac khadka u dhexeeya ee aadka u godan ee dhulka. Waxaa kale oo uu mas'uul ka yahay samaysanka buuraha, Dooxooyinka iyo Haraha laga helo bilow ilaa dhamaadka meelaha ay ku taallo Dooxada Rifti.

Run ahaantii meesha ugu dheer qaaradda Afrika waxaa laga helaa Dooxada wayn ee Rifti waana Buurta Kilimanjaaro oo ku taalla dalka Taansaaniya oo dhererkeedu dhan yahay 19,340 fiit (5,895 m) oo ka saraysa Heerka badda.

Meelo badan oo Bariga Afrika ka mid ah oo waxaa jira caan ku ah goobaha dalxiiska. Waxaa laga yaabaa inaad mar horeba maqashay mid kamid ah goobahaas loo daawashada tago oo la yidhaahdo seeraha safaari oo Bariga Afrika ku taal oo ay dadku u daawasho tagaan si ay usoo arkaan:- Libaaxa, Geriga Haramacadka, Maroodiga iyo Duurjoogta kaleba. Waxaa kale oo halkaas laga helaa xeeb qurux badan, Buuro ku cajab gelinaya, Goobo taariikheed iyo magaalooyin bilic leh oo loo dalxiis tago kuna haboon oo kuyaal Bariga Afrika dadyawga dunidana waa meelaha sida aad ka ah u soo jiita. Haddaba muuqaalada duleed ee ugu waaawayn Afrikada Bari waxaa ka mid ah:

1. ***Dooxada Wayn ee Rift:*** Waa dooxoo silsilad ah oo kasoo bilaabanta waqooyi ilaa koonfur kana gudubta dhamaan Bariga Afrika. Qaarada Afrikana si tartiib – tartiib ah ayay labadan dildilaac u kala qaybinayaan.
2. ***Webiyada iyo Haraha:*** Waxay dhacaan ama laga helaa gudaha iyo agagaaraha Dooxada wayn ee Rift. Harooyin dhawr ah oo ah kuwa ugu waaawayn ah.

Dooxada wayn ee Rift waxay ka Kooban tahay harooyinka Dooxada Rifti oo ay ka mid yihiin qaarkood kuwa ugu qotada dheer dunida. Harooyin badan oo yaryar oo ku yaal Itoobiya iyo xoogaa dhaadheer oo dhuuban oo harooyin ah.

Harooyinka xusitaanka mudan waxa ka mid ah Turkana (Rudolf) iyo Nyasa (malawi) waxay dhacaan ama ku yaallaan isla halkii ay biyuhu uga imanayeen waqooyiga harada Nayaasa waa uun Laanta Galbeed, kuwaas oo hadana waqooyi u qulqula.

Kuwa ugu dheer waxay dhereran yihiin xuduudka Bari ee kongo (kinashasa) Laantani waxay astaan u tahay silsilada harooyinka kala ah: Taanganiika, kifu, Idhwaardh iyo Albeert (Mobuuto)

Harada Fiktooriya ka mid ma aha harooyinka laga dhex helo Dooxada wayn ee Rifti laakiin, waxay u dhaxaysaa Dooxada inteeda wayn iyo laamaha Galbeed ee

isla dooxadan Rifti. Harada Fiktooriya waa harada labaad ee dunida harooyinka biyaha macaan ugu wayn. Waxaana loo tix-geliyaa qayb kamid ah dooxada Rifti inkastoo ay dhacdo ama ku taallo inta u dhaxaysa labada laamood. sidoo kale haradani waa isha biyaha ee wabiga Niil. Wabiga Niil oo ah wabiga ugu dheer qaarada Afrika iyo Aduunkaba. Waxay ishiisu ka soo bilaabantaa harada ugu wayn Afrika. Harada Fiktooriya waxaa sidoo kale loo yaqaanaa Nayaansa.

Harada Tanganiika waa mid xusid mudan xaga qotonkeeda oo waxaa lagu qiyaasaa 4,823 fiit (1471 m) waana harada labaad ee dunida ugu qotonka dheer Afrikana waa ta koowaad.

3 ***Buuraha:*** Bariga Afrika waxaa laga helaa Buuro aad cajiib u ah oo sare u kacsan oo dhaadheer dusha sarena baraf ku samaysmo iyada oo uu maro xariiqa loo yaqaano dhulbadhaha oo ah meelaha ugu kulul dunida.

Buuraha ugu fiiqa dhaadheer waxaa kamid ah: Buurta Kilimanjaro oo dhererkeedu yahay 19,340 fiit (5,895 m) oo ku taalla Tanzania; Buurta Kiiniya oo dhererkeedu dhan yahay 17,058 fiit (5199 m) oo ku taal Kiiniya isla Waqooyiga Kiiniya qayaastii ilaa 200 mayl (9322 km) iyo silsilada buuralayda Ruwensoori oo fiiqoodu sareeyaa gaarayo 16000 fiit (500 m) waana Buuraha caanka ah ee loo yaqaano “ Buuraha Dayaxa” waxayna dhereran yihiin xuduudka u dhexeeya Yugaandha ilaa koongo (kinshasa) oo hada ka hor la odhan jiray  Saiir.

Dhulka jooga sare leh ee Itoobiya waa gobol ka kooban oogooyin sare oo siman iyo buuralay gaarsiisan qaybo badan oo Itoobiya ah, Ereteriya, Waqooyiga Soomaliya oo dhamaantood ka tirsan Gobolka Geeska Afrika. Dhulka sare ee Itoobiya wuxuu leeyahay qaabka ugu bedka wayn ee uu la socdo joogga aad ka u sareeya qaarada oo dhan, wax yar oo kasoo hadhay oo waxaa jira oogadoodu ka hoosayso 1500 mitir marka laysku wada daro uu joogu gaadhayo 4550 mitir. Marmar waxaa loogu yeedhaa “ Saqafka sare ee Afrika” iyadoo loo eegayo joogooda iyo baaxad waynidaba.

Dhulka joogga sare leh ee Itoobiya waxay dooxada Rifti u kala qaybisaa dalka laba qaybood oo kala ah waqooyi galbeed iyo koonfurbari, waxaana laga helaa harooyin badan oo biyahoodu milix leeyihiin.

Qaybta waqooyi Galbeed waxay gaadhsiisan tahay: Tigraay iyo Amxaarada waxayna ka kooban yihiin sida: Buuraha waqooyi ee dalka Itoobiya oo qayb ka

mid ah loo qorsheeyay beerta xayawaanka lagu dhaqo ee qaranka. Buurtooda ugu fiiqa dheer waa Raas Dhashan 4550 mitir waana buurta ugu dheer dalka Itoobiya, Harada Tana oo iyana ah isha kale uu biyaha ka helo wabiga Niil loona yaqaano Niilka Buluga ah waxay iyaguna dhacaan ama ku yaalaan. qaybta waqooyi galbeed ee Joogga sare ee Itoobiya. Qaybta kale ee koonfurta bari ee fiiqoodu aad ka u dhaadheer yahay waxaa laga helaa gobolka Baali ee deegaanka Oromada. Buurahan waxaa laga ag sameeyay Beerta xayawaanka lagu dhaqo oo lamid ah kuwa waqooyiga oo kale oo ku haboon dalxiiska.

Buurahan Baali ku yaala dhererka fiiqoodu wuxuu gaadhaa ilaa 4000 mitir sida Tuulu Demtu 4337 mitir waana buurta labaad ee itoobiya u dheer. Batu 4307M cimilo gooreedka (Jawiga) meelahan Joogoodu sareeyo badanaa qabow iyo qoyaan.weeyaan



## Hawl-galka 2.11

1 Tax magacyada buuraha aad ka taqaanid dalkeena itoobiya?

2 Waa tee buurta kuugu dhow ee ugu dheer meesha aad ku nooshahay?

4 ***Ban-Cawseed (Safaanaha):*** Ereyga safaane waxaa lagu qeexaa “Dhul aan lahayn geeddo laakiin caws dhaadheer ama gaagaaban midkood leh”. Safaanaha waa ban-cawseed geyi dabeecadaha dhireed ku dabayar tahay ama ay teel teel ku yihiin isla markaana dhir la’aan ah falaadhaha cadceeduna toos u soo gaadhaan dhulka taageerana siiya cawska oo ka mid ah lakabyada aan jajabin.

sidoo kale hababka loo kala saaro waxaa la garwaaqsaday in Ban-Cawseedku yahay meel bilaa geeddo ah. Bannanka oo dhanna waxaa ku hagoogan cawska adag, cufan ee ay dhirtu teel teelka tahay. Waxaana dhamaantood laga helaa Bariga Afrika oo dhan.

Kuwa ugu caansan waa Bannaanka loo yaqaano Serengeti oo hoy u ah duur joog kala duwan safanaha Bariga Afrika waa Ban-Cawseedka kulaalayaasha qalalan wuxuuna hoy u yahay xayawaanka orodka badan, xayawaanka hilib ku noosha ah sida libaaxa iyo haramacadka, xayawaanka kale ee cawska cuna sida Dameer – farowga (Dameer dibadeedka) maroodiga, Geriga iyo noocyada ugaadha kala duuwan sida: Garanuugta, Biciidka, Goodirka iwm.

Dhulka safaanaha ee Bariga Afrika waxaa loo kala saaraa (abla-ableeyaa) kulaale iyo kulaal xigeen Ban cawseed ah iyo kulaale iyo kulaale xigeen dhir iyo caws isugu jira.

Bariga afrika safaanaha ku yaalla noocyadiisu ugu caansan ee kale waxaa ka mid ah dhirta qodaxda leh ee looyaqaano magoolayaasha siiba qudhaca oo aad ku arkayso Beeraha waawayn ee xayawaanka ee loo dal xiis-tago Kiiniya iyo Taansaaniya iyo Sidoo kale Simbabwe, Botswana Koonfurta Afrika iyo Naamibiya. Bulshada halkaas degan waa bulsho reer guuraa dhib  badan ah (inkastoo hada la maareeyay oo aad loo xakameeyay) cadaadiskii iyo dabkii ay qabad-siin jireen.

Bannaanada laga helo Tanzania waxaa ugu caansan Serengeti oo ah safaane cawskiisa aad loo horumariyay oo laga ilaashay daranyada hadana wuxuu hodan ku yahay carada folkaanaha.

***Dooxada Wayn ee Rifti:*** Waa mid ka mid ah muuqaalada Juqraafiyeed ee layaabka leh ee Afrika ee ugu dilaaca wayn Dooxadani waxay asal ahaan ka soo bilabantaa waaqooyiga dalka suuriya oo koonfurta Galbeed ee Aasiya ilaa Mosambiik oo ah koonfurta Afrikada Bari waxayna ka kooban tahay muuqaalada Buuraha Afrikada Bari oo laba gobol oo waawayn u kala baxa. Maanta Ereyga ugu badan ee badanaa loo adeegsado ee Dooxada Afrikada Bari laga tixraacaa waa ayada laftigeeda oo ah xuduudka kala qaybiya ama ay oogooyinka sare ku kala leexdaan oo kala baxsan laga bilaabo saddex geesoodka  canfarta dhinacaa koonfureedna uga sii gudba BarigaAfrika waana habka ay ukala go'een ama u kala soocmeen labada oogo ee kala baxa cusub.

Bariga Afrika wuxuu caan ku yahay labadeeda laamood ee ay leedahay Rifti ee Bari iyo Galbeed. Dooxada Rifti asal ahaan waxay ka samaysantay natiijadii ka dhalatay dhaq-dhaqaaqa dhulka'ee ay sababeen dildilaaca dhulka ee qolofta sare.

Dooxada Rifti ee wayni waxay kala baxsan tahay laga bilaabo 395 mitir ka hooseeya Heerka Badda (Badda maydka) oo u dhaxaysa Jordan iyo Israel ilaa 6000 fiit  ama 1,830 mitir. Oo ka sareeya heerka Badda u ku taalla koonfurta Kiiniya. Qaybo badan waxaa aafeeyay carro guur laakiin meelaha  xusitaanka mudan ee kale waa taagag dhawr ah oo kumaan kun fiit oo sare ah oo ay dooxadu dhinacyada ka kala marto. Raadadka maanta lagu arkayaana waa kuwo laga soo bilaabo waayihii dhexe ee abuuritaankii aduunka ama Caalamka ee loo yaqaano

Xilligii Dhexe oo laga yaabo inay dooxada Rifti ka dhalatay nidaamka ku xidhan qulqulka kulka gudaha dhulka ee lakabka dhexe (mantle).

Bariga Afrika dooxadan ku taala ee Rifti waa mid aad u firfircoon gobalka qaarad ahaan Rifti waxaa ka muuqda xuduudka barleexadka dulaha lisanka iyo Rifanku (isbedelka carro-guurku keeno) sida aadka ah ugu sii badanayo.

Dooxada Rifti ee Bariga Afrika waxay u kala baxdaa laba laamood oo kala ah:- Dooxada Bari ee Rifti iyo Dooxada Galbeed ee Rifti. Galbeedka Dooxada Rifti waa qaybta ugu wayn Dooxada waxay ka timaadaa saddex geeska Godanta Canfarta dhinaca koonfureed bay dooxadani uga sii gudubtaa Bariga Afrika qaybta dooxadan ka midka ah ee ugu da'da wayn Rift waxay ku dhacdaa gobolka canfarta ee Itoobiya dooxadan waxaa loogu yeedhaa Riftiga Itoobiya. Harada Malawi waxay dhacdaa laanta Bari ee Dooxada Rifti. Dhinaca ka sii fog koonfurta ee taxani waxay dhacdaa Galbeedka dooxada Rifti waxayna ka kooban yihiin:- Harada Albert ee Rifti oo ka kooban iyana Haraha Bariga Afrika ee u waawayn.

Laanta Bari waa laba qaybood oo aan is Le'ekayn ama aan sinayn oo raf ah ee Kiinya oo Waqooyi ilaa koonfur u socda khad aan sidaa uga fogayn Galbeedka Nayroobi.

Harada Albert ee Rifti geeskeeda waxaa laga helaa Buuraha ugu joogga dheer Afrika oo ay ka mid yihiin: Mitumba iyo Ruwanzori oo ah kuwo taxan ama silsilad ah. labadan laamood waxaa si wada jira loogu yeedhaa Dooxada Rifti ee Bariga Afrika (East African Rift) oo noqonaysa soo gaabin ahaan (EAR)(Dheg) Halka qaybaha Bariga Afrika ee laanta bari ee dooxadan loogu yeedho Riftiga Kiiniya.

## Hawl-galka 2.12



1 Magacaw labada laamood ee dooxada Rifti?
2 Tilmaan Haraha laga helo laanta Bari iyo laanta Galbeed ee Dooxada Rifti?
3 Waatee Harada ugu qotonka dheer Dooxada Rifti?

Bariga dhexe ilaa Mosaambiik ayay fidsan tahay dooxadan Rifti waxayna ugu horaynba ay Afrika kasoo gashaa Itoobiya. Waxayna dalka Itoobiya ku leedahay muuqaalada cajiibka ah ee taxan sida kul, qalayl iyo dhul aan waxsoosaar lahayn ilaa harooyin aad u quruxbadan.

Folkaanaha (Dab-dhulka) firfircoon ayaa qayb wayn ka qaatay samaysan Dooxada Rifti, ee soo socday ilaa iyo haatan. Itoobiya waxaa laga heli sharaxaad (macluumaad) ku tusaya jiritaanka biyaha kulul ee qaybo badan oo dalka laga helayo. Xataa folkaanaha Afka hore u dhuuban (toobinka ah) ee laga helo Dhulka godanta ah ee Danaakilada (Canfarta) ee dhinaca waqooyi Bari Itoobiya.

Meelaha ugu yaabka badan Dooxooyinka meereheena waa Dooxada wayn ee Riftiga. Itoobiya ayay ka gudubtaa waxaana ka alkummay (abuurmay) Todoba (7) Harood, oo qani ku ah qaababka nololeed Itoobiya waxay leedahay sagaal (9) seere oo lagu dayeelo xayawaanka oo dalxiiska loogu tala galay iyo Afar (4) lagu xannaaneeyo in badan oo ka mid ah xayawaanka iyo shimbiraha kuwaas oo caan ku ah isu ekaanshahooda, sidii wax aan dabiici ahayn oo dhalanteed ah. Waxaad kale oo aad ku arkaysaa xayawaanada duurjoogta ah ee u gaarka ah deegaamadan oo aan meel kale laga helayn. Waxaana ka mid ah noocyada badan ee aan meel kale laga helin 31 ka mid ah 277 Naasalay; 16 kamid ah 861 shimbiro ah; 24 kamid ah 63 Nooc Beri biyood ah; 9 kamid ah 210 nooc xamaarato ah iyo 4 nooc oo kamid ah 150 nooc oo kaluun ah.

Tirada dhirta ubaxlayda ahi waa mid le'eg ugu yaraan 1000 nooc oo ka mid ah 7000 nooc oo noocyada kala duwan ee dhirta ah.

## 2.3 KHEYRAADKA BIYAHA EE BARIGA AFRIKA

***Marka uu casharkani dhamaado kadib ardaydu waxay awood u yeelan doonaan inay:***

- Magacaabaan webiyada, Haraha iyo Baddaha Afrikada Bari;
- Isbarbar dhigi karaan kala duwi karaan isla markaana sheegi karaan Biyaha macaan iyo Biyaha Badda Astaamahooda.
- Faah faahin karaan faaiidada dhaqaale ee ay u leeyihiin Biyuhu Bariga Afrika.

### Ereyada Furaha u ah Casharka

- Webi
- Haro
- Bad
- Biyo macaan
- Biyo Khadhaadh
- Bariga Afrika

## 2.3.1 Haraha Bariga Afrika

Har waa meel ay biyo fadhiyaan oo uu Berri ku hareeraysan yahay. Koox Harooyin ah ayaa laga helaa Bariga Afrika, badankoodu waxay dhacaan gudaha Dooxado Rifti ee Bariga Afrika. Harahaas oo ka mid ah qaybaha ka samaysmay dul-duleelada waawayn ee is daba taxan ee oogada sare ee dhulka ee gaarsiisan dhinaca Waqooyi laga bilaabo Dooxada webiga Saambiisi siina mara Bariga iyo waqooyiga Bari ee Afrika iyo Badda Cas ilaa dooxada wabiga Jordan ee koonfur Galbeed Aasiya.

**Shaxda 2.1: Haraha Bariga Afrika**

| No | Harada | Bedka $km^2$ | Wadanka |
|---|---|---|---|
| 1 | Fiktooriya | 69,485 | Kiiniya, Taansaaniya iyo Yugandha |
| 2 | Tanganiika | 32,900 | Taansaaniya |
| 3 | Nayaasa (Malaawi) | 29,600 | Malaawi/Taansaaniya |
| 4 | Turkaana (Rudholf) | 6,405 | Kiiniya/Itoobiya |
| 5 | Albert | 5,594 | Yugaandha |
| 6 | Kifu | 2,693 | Koongo (Kinshaasa) |
| 7 | Rukwa | 2,590 | Taansaaniya |
| 8 | Idhwaardh | 2,150 | Yugaandha |

Bariga Afrika harooyinka ku yaalla badankoodu way biyo macaan yihiin, halka ay in yari ka yihiin kuwa nulixda leh. Harada Fiktooriya waa harada ugu wayn Gobolka Bariga Afrika waxaana wadaaga dalalka: Kiiniya, Taansaaniya iyo Yugaandha.

Harooyinka kale ee waa wayn waxaa ka mid ah: Tanganiika, Rukwa iyo Malawi oo kuyaal Taansaaniya, Kiyooga Albert, Edward, Wamala katwe oo ku yaalla Yugaandha; iyo kuwa kale ee ku yaalla Kiinya sida: Turkana (Rudolf), magadi i.w.m katwe iyo Magadi waa harooyinka tusaale loo qaadan karo ee milixda leh.



### Hawl-galka 2.13

1 Tax dhamaan haraha dalkeena itoobiya laga helo?

2 U kala saar Harooyinka ku dhex yaal Dooxada Rifti iyo kuwa aan ku dhex oolin?

3 Waatee harada ay wadaagaan Kiiniya, Taansaaniya iyo Yugaandha?

## Sheeko-gaaban 2.1

### Harada Tanganika

Harada Tanganyika waa harada ugu dheer dunida, dhererkeedu wuxuu gaadhaa 420 mayl waana ta labaad ee dunida ugu qotanka dheer, waxayna gaadhaa qotan dhan 4,710 fiit. Waa harada labaad ee ugu baaxada wayn Afrika Fiktooriya uunbaa ka wayn. Waxaa lagu qiyaasaa 12700 mayl laba jibbaaran. Ballaceedu wuxuu dhan yahay 45 mayl Bari waxaa ka xiga Taansaaniya, dhinaca waqooyina Burundi, galbeedna waxa ka xiga kongo ( Kinshasa) oo hada ka hor loo yaqaanay Sayiir, koonfurna Saambiya.

Harada Tanganyika oo keliya, waxaa ay leedahay meel biyuhu ka baxaan oo ay ka sii dayso, waxaana halkaas ka bilaabma wabiga Lukuga kaasoo u qulqula kuna darsama wabiga Koongo. Haradani ku taalla Rifti waxa ay gaar u leedahay Macdano aad u sareeya oo laga helo. Waxayna tahay sababtu biyaha ku soo qulqulaya ee ay milixda ugu badani la socoto ee aan meelna uga baxaynin biyaha soo gaadhaa inta uumi ahaanta uga baxaysa mooyee. Waxaya haradani caan ku tahay noocyo kala duwan oo kaluun ah oo ku dhow (200)ka u eg ama nooca layidhaahdo. Qolaf-ka-baxayaasha ama carrooga. Yaxaaska iyo Jeerta waa kuwa badanaa laga helo agagaarka haradan. Haradan nooca carradeedu waa camuud bataax ah oo islamarkaana ah ta ugu fiican ee kaluun ka lagu hayn karo weel ay carradani la socoto oo aan Jay ahayn. Tani run ahaantii waa ta sida gaar ahaaneed ay noocyadani ay hoos uga degaan biyaha. In badan oo jaadadkan noole ee laga helo Tanganiyika waa kuwo aad u yar yar waxaana lagu hayn karaa weel ay ku jiraan 10 ilaa 20 gallaan oo biyo ah qaadi kara. Noocyadan waxaa ka mid ah:- kuwa qolofta ka dhexbaxa; dameer biyood, iyo lugo badan

## 2.3.2 Webiyada iyo Baddaha Bariga Afrika

Webi waa Tog dabiici ah, oo ay biyihiisu dhex qulqulayaan kannaalo. Bariga Afrika wabiyada ugu waawayn waxaa kamid ah wabiga Niil oo ah, wabiga ugu dheer dunida uguna caansan dhinacyada waxsoosaarka Quwada korontada; sida:- Semalik, Aswan, Kafu Katonga 1.w.m Webiyada kale ee ugu muhiimsan waxay ku yaallaan laba dal oo Afrikada bari ah. Waxa kamid ah:- Rifiji, Rufuma, Bangani, Ugaalla, Ruwaaha, Malagarasi oo ku yaalla Taansaaniya. Tana, Galana, Sooya (Nzoia), Taarkwell, oo iyana ku yaalla dalka Kiiniya: Rufiji iyo Asi (Athi) oo loo adeegsado Quwada dhalinta korontada.

# Sheeko-gaaban 2.2

## Webiga Niil

Webiga Niil, waa webiga ugu caansan islamarkaana ugu dheer dunida oo lagu qiyaaso dhererkiisa 6695 km laga bilaabo Bariga Afrika ilaa iyo dhinaca waqooyi ee Afrika gaar ahaana ku dhamaada Badda Midhitireeniyanka. Waa wabiga keliya ee dhinaca Waqooyi u qulqula qaarada oo dhan wabigan wuxuu leeyahay labo laamood oo waawayn oo kala ah Niilka cad iyo Niilka Buluuga ah. waayahan dambe waxay noqdeen ilo ka biyo badan oo ka carro san wabiga Niil laakiin waayadii, hore ayuu labadoodaba ka dheeraa.

Niilka cadi waa webiga ka soo bilaabma Gobolka harooyinka waawayn ee Badhtamaha Afrika, wuxuuna leeyahay ilaha ugu fogaanta dheer dhinaca koonfooreed. Ruwanda una qulqula waqooyi laga bilaabo halkaas isaga oo uga sii gudbaya Taansaaniya, harada Fiktooriya, Yugaandha iyo koonfurta Suudaan. Meesha uu webiga Niilka Buluuga ahi ka soo bilaabmo Harada Daana ee Itoobiya. Labadan webi ee Niilka cad iyo Buluuga ahi waxay ku kulmaan magaalo madaxda suudaan ee khartuum.

Haddaba Labadan webi ee Niilka cad oo ka soo bilaabmay dhul badhaha Bariga Afrika iyo kan Buluuga ah ee ka soo bilaabmay Itoobiya oo Markay ku kulmeen suudaan sameeya wabiga Niil, kadib wuxuu u qulqulaa dhinaca waqooyi isaga oo sii dhexmaraya gebi ahaanba Lamadagaan laga bilaabo Sudaan ilaa Masar. Masar oo ahayd waddankii ay ka dhalatay ilbaxnimadii dunida ugu horaysay kuna tiirsanayd webiga Niil. Tirada dadka iyo ay laha ayeen Magaalooyinka ugu badan Masar waxay ku ag yaallaan oo ay la dhereran yihiin qaybo ka mid ah dooxada webiga Niil ee waqooyiga Aswaan, waxa ka ag dhow oo ku yaalla goobo dhaqameedyadii iyo taariikhdii hore ee ay lahaayeen ee masaaridii hore oo dhereran daafahan (daamaha) webiga Niil.

Wabiga Niil wuxuu ku dhamaadaa dhul faafka webiga ee loo yaqaano Dhelta (Delta) kaasoo ku furan Badda midhitereeniyanka (Mediterranean sea) oo ah halka uu ku dhamaado webiga Niil.



## Hawl-galka 2.14

Falanqeeya idinka oo koox-koox ah webiga Niil waxtarkiisa, ilaha, wadiiqooyinkiisa (marinadiisa kala duwan) iyo Afkiisa (Halka uu ku dhamaado)

Bariga Afrika Baddaha uu xuduudaha la wadaago waxaa ka mid ah:

Badda cas oo xadla leh Gobolka Geeska Afrika, oo dhinaca Bari ka xigta, Badwaynta hindiya, oo ah dhinaca bari ka xigta iyo Badda Midhitireeniyanka oo kala soocda waqooyiga Afrika iyo yurub. Badda cas waa mid ku taalla Affaafka Badwaynta Hindiya. Biyaha Baddahani waa kuwo ahmiyad wayn oo istiraatijiyadeed iyo siyaasadeedba u leh gobolka

## 2.3.3 Biyaha Macaan iyo kuwa Cusbada leh



### Hawl-galka 2.15

1 Tax shan (5) Biyo macaan iyo saddex Biyaha milixda leh ee Haraha Bariga Afrika?
2 Waa kee wabiga Harada Tanganyiika uga qulqula dhinaca galbeed?
3 Magacaw shan (5) webi oo ku dhamaada Badwaynta Hindiya oo ka taga Bariga Afrika?
4 Tilmaan Noocyada. Biyaha iyo heerka midka sabada Biyaha kharaar (milixdaleh) iyo ka sabada Biyaha macaan?

Biyaha macaan waxaa laga yaabaa inay ka yimaadeen dhulka oogadiisa sare ama dhulka hoostiisa midkood. Oogada biyuhu waa biyaha laga helo webiyada, haraha ama biyaha macaan ee dhulka qoyan. Oogada biyuhu waa kuwo ay si debiici ahaaneed ugu soo celiyeen noocyada kala duwan ee da'aagu sida: Roobabka caadiga ah, Roob iyo Baraf wada socda, Barafka da'a i.w.m. kuwaas oo ahaa kuwo si dabiici ahaaneed uga bara-baxay qaabuumi-bax ahaaneed Baddaha waawayn iyo qayba dhuleedka berriga ah ee biyaha badda hore u sii gashan ee biyaha badda hore u sii gashan.

Haraha biyaha macaan ee ugu waawayn diinidu waa kuwo dhamaantoodba laga helo Dooxada Eift, waxaa kale oo laga helaa Dooxadan Rifti ee firfircoon dhaxalka taariikhiga ah ee dunida Harada Baykal waxay ku taalaa Gobolka saybeeriya ee dalka Ruushka waana harada ugu qotonka dheer uguna mugga wayn dunida, islamarkaana leh 20% ka mid ah dhamaan biyaha macaan ee laga helo dhulka dushiisa. Hadaba Bariga Afrika waxaa ku taala Harada Tanganiika oo ah harada labaad ee ugu qotonka dheer uguna mugga wayn dunida, waana harada Bariga Afrika eek u taala gacanta galbeed ugu xigta ee Dooxada way nee Rifti.

## Harada Fiktooriya waa Harada Ugu wayn haraha Biyaha macaan



Jaantuska 2.3: Harada Fiktooriya

Haradan waxaa loo yaqaanaa oo kale Nayaansa haradan waxaa wadaaga Kiiniya, Taansaaniya iyo Yugaandha Bedkeedu waa 26830 mayl oo laba jibbaaran (Baaxada dalka Irelanda) Ballaceeduna waa 250 mayl, waana ta labaad ee dunida ugu baaxada wayn, waxaa ka wayn oo keliya Harada Subeeriyar.

Celceliska qatonkeedu waa 120 feet, meesha ugu qotonka dheer wuxuu gaadhaa 250 fiit. Webiyo badan aya biyaha u keena sida kagera. Haradu waxay biyaheeda saaidka ah siisaa webiga Niilka waxaa laga dhaliyaa quwada korontada, waxaa laga helaa ilaa 500 nooc in ka badan oo kala duwan oo ka mid ah kaluunka waxaa la ag degay oo ay dadku ka ag bilaabeen wax soo saarka kaluumaysiga ganacsiigiisaba sannadkii 1950dii kaluumada qaarkood waxay ku koraan ilaa 6fiit kuwa kalana waxaa laga soo saaraa ilaa 250 nooc oo kamid ah 500 nooc. Nooc yadaas kala duwan waxaad garowsani markaad aragto galbeedka yurub oo dhan noocyadan kaluunka ee ay ka haystaan wax ku dhow 60 nooc oo Biyaha macaan ku nool.

### Hawl-galka 2.16



Sidee bay uga faaiidaystaan dadyowga Yugaandha, Kiiniya iyo Taansaaniya Harada biyaha macaan ee Fiktooriya?

# 2.4 BIYAHA BARIGA AFRIKA IYO KA FAAIIDAYSIGIISA DHAQAALE

***Marka uu casharkani dhamaado ardaydu waxay awoodi doonaan inay:***

- Fahmaan kahyraadka Biyaha Bariga Afrika iyo waxtarkiisa dhaqaale,
- Tilmaamaan (aqoonsadaan) qaar ka mid ah Tusaaleyaal ka,
- Fahmaan ahmiyada Istiraatijiyadeed ee ay biyuhu leeyihiin.

### Ereyada Furaha u ah Casharka

- Khayraadka Biyaha
- U adeegsi Dhaqaale
- waraabka
- Bariga Afrika
- Quwada dhalinta korontada



## Hawl-galka 2.17

1 Maxaad u malayni ahmiyada kheyraadka biyaha?
2 Gobolkaaga ma jiraan beero dalagyada kala duwan oo ay beeralaydu u adeegsanayaan webiyo ama Togog?

Bariga Afrika dhamaantoodba waxaa lagu lagu rajo wayn yahay inay si wamaagsan u isticmaalaan Biyaha macaan. Wadarta celceliska Biyaha laga faaiidaystay Yugaandha ayaa ugu horaysa Halka ay Eriteriya ugu hoosayso.

Waxaa jira gobolo ku yaalla Bariga Afrika oo leh tiro badan oo webiyo iyo Harooyin Halka kuwo kalena ay ku yar yihiin.



## Hawl-galka 2.18

Adiga oo Adeegsanaya khariirad Tilmaan (Tus) meesha ugu haraha iyo wabiyada badan iyo halka ay dhacaan ee Bariga Afrika?

Labada marin biyood ee ugu caansan Bariga Afrika waa wabiga Niil iyo Harada Tanganyika. Dhamaan Harooyinka ugu waawayn iyo kuwa kale ee yaryar iyo wabiyaduba dadyawga Bariga Afrika ahmiyad wayn bay ugu fadhiyaan waxayna uga faaiidaystaan dhinacyada xoolaha, warshadaha, Beeraha, iyo kuwo kaleba, Tusaale:- kambala (caasimada Yugaandha) iyo Jinja oo ah magaalo ku taala harada Fiktuuriya agteeda waxaa laga sameeyay warshado hogaamiya goobahaas dalka Yugaandha. Tirada dadka ee sida xawilga u koraysa, baahida loo qabo Biyo macaana waxay noqotay durbaba qodob muhiim ah. Baahida Biyaha macaan ee ay u qabeen xoolihii la dhaqanayay ayaa iyana sare u kacday maxaa yeelay, waxaa kordhay isticmaalkii biyaha, dhaqaalihiina saamayn ku yeeshay.

Baahida waxaa korodhay waxsoosaarkii dhinaca beeraha khaas ahaan biyihii loo isticmaalayay waraabka ee Bariga Afrika. Itoobiya waxay leedahay kayd waraabin kara dhul dhan 3.7 milyan hektaar oo ilaa hada laga faaiidaystay 160,000 hektar Itoobiya waxay hada wadaa dadaal lagu balaadhinayo dhaqdhaqaaqyada waraabka togaga ama webiyada kala duwan. Kiiniya 16% ayay ka faaiidaysteen dhulkii waraabka ku haboonaa.

Biyaha waxaa loo isticmaali karaa, waraabka hadii si fiican loo adeegsado oo aan khasaare ku keenayn Deegaanka. Dhamaan dalalka Bariga Afrika wuxuu

dhaqaalahoodu ku xidhan yahay Beeraha. Waxaana jira qaybo badan oo ka tirsan dalalka Bariga Afrika oo ay dhibaato ka haysato, Roobabka sii yaraanaya ee aan laysku halayn karin, carradii nafaqada lahayd oo nabad guurtay. Wadamo baban oo ka tirsan Bariga Afrika oo ka mid ah kuwa dhibkaasi ku dhacay ee isku dayay inay adeegsadaan habka waraabka waxa kamid ah: mashaariicda waawayn ee Tendaho oo ah meelaha sannadka oo dhan looga adeegsada habka waraabka qalab lagaga soo tuurayo biyaha wabiiga Awash ee Itoobiya. Suudaan iyo Masar waxay biyaha ka helaan kaydadkooda biyaxidheenada ay ka samaysteen Niilka Buluuga ah. Muwiitabeera iyo Galole oo Kiiniya ku yaal. Kilombero Dooxo kutaal Taansaaniya. Mobuku oo dalka Yugaandha ku taala oo dhamaantood caan ku ah waraabka Bariga Afrika.

Carada hodanka ah ee folkaanaha agagaarka harada Fiktooriya waxay qayb wayn ka qaataan baadka, Aale sonkorka, cudbiga, shaaha iyo Bunka.



## Hawl-galka 2.19

1 Ma adeegsadaan beeralayda deegaankiinu habka waraabka?
2 Miyey u adeegsadaan webiyada. Togoga, berkedaha, Ballayada ama Biyaha dhulka hoostiisa Habka waraabka?

Wabiga Niil wuxuu door muhiim ah ka qaatay xadaaradii, Nolosha iyo taariikhda dalka Suudaan iyo Masar. Maadaama wabigani uu soo marayo dalalka faraha badan ee Bariga Afrika islamarkaana carrada uu sidaana ay tahay tii ku haboonayd waxsoosaarka wabigani wuxuu suurogeliyay inay dadku uga faaiidaystaan dhinacyo badan oo ay kamid yihii: Waraabka, Qalabka Dhismaha, Quwada korontada 1wm.

Dalka Masar oo intiisa badan ku yaallaa dhul lamadagaan ah oo qalalan. Sannadka intiisa badana roobka ay helaan aad u yar yahay, ayuu wabiga Niil u yahay laf dhabarta Dhaqaalaha iyo nolasha Masar oo dhan.

***Waxaa la yidhaahdaa " Masar waa Deeqda wabiga Niil" maxaa looga jeedaa?***

Gobolkan Bariga Afrika waxaa soo wajahday baahida sii koraysa ee Biyaha ay u isticmaalayaan:- xoolaha, Beeraha, Tamarta korontada iyo warshadaha. Hada oo lagu jiro tartan sii koraya oo xaga Hawlaha kala duwan ee looga faaiidaysto khayraadka biyaha. Kaas oo uu ka dhaxeeyo wadamada wadaaga wabiga Niil.



## Hawl-galka 2.20

Isla falanqeeya mawduuca sare aynu ku soo xusany ee ah dalalka uu maro wabiga Niil?

Khayraadka biyaha waxaa kale oo looga faa iidaystaa dhinaca quwada korontada ee dalal badan oo Bariga Afrika ku yaalla maadaama qiimihiisu yahay mid hoose, oo Jaban, wasakhow aan lahayn sidoo kale la bedeli karo. Biyaha Soconaya waxaa looga faaiidaysan karaa koronto. Dalka Itoobiya waxaa ka jira goobo oo loo isticmaalo dhalinta quwada korontada maxaa yeelay quwada biyaha ayaa loo isticmaala yaa habkan. Marka hore waxaa daamaha ama daafaha wabiyada laga sameeyay warshaddo dab-dhaliyayaal awooda biyaha u bedela tamar danab.

Maanta Bariga Afrika khayraadka biyaha waxaa loo adeegsadaa korontada loo yaqaano Quwada koronto biyeedka. Waxaana jira saldhigyo badan Quwada dhalinta korontada ah. dalka Itoobiya waxa kamid ah Koka oo ku taal Awash, Tis issat oo kuyaal Biyo dhaca Webiga Abay (Niilka Bulugga ah), Tana Beles oo ku taal Harada Tana, Gilgel Gibe oo ku yaal wabiga Omo.



## Hawl-galka 2.21

1 Dugsigiina ama magaaladiinu Halkay ka helaan korontada? Saldhigee Quwad koronto ee idinku dhow?

2 Magacaw qaar kamid ah B/xidheenada ugu muhiimsan wabiyada Bariga Afrika?

Biyo-xidheenada waawayn ee laga dhaliyo quwada korontada waxaa kaloo loo isticmaalaa habka waraabka. Biyo xidheenka Aswaan oo ku yaalla Masar waxaa loo adeegsadaa Quwada korontada iyo waraabka islamarkaana waa ka ugu wayn dunida ee dadsameega ah.

Quwada Biyaha Korontada dalka Kiiniya oo dhan 60%, khayraadka Biyaha waxaa kaloo loo adeegsadaa xaga isgaarsiinta. Gaadiid ku marida maxaa yeelay, waxaa lagu qaadaa Badeecadaha iyo dadkaba. Bariga Afrika oogada biyaha waxaa loo adeegsadaa deked ahaan. Tusaale Bada cas, Gacanka cadameed iyo Badwaynta Hindiya oo isku xidha saddexda qaaradood ee kala ah Afrika, Aasiya iyo Bariga Dhexe.

Magaalooyin qadiim ah iyo Tuulooyin badanayaa ka ag dhisnaa wabiyada. Dekedu waxaysi aad ah ugu kortaa Afka wabiga oo ah halka uu ka galo Badwaynta.

halkaasoo ay uga faaiidaystaan ganacsiga wadamada kale, kuwa u dhow iyo kuwa ka fog labadaba.

Waddamada aan xeebaha Bada lahayn ma helaan ka faaiidaysiga Badda ama meel ay u maraanba

Sidaa daraadeed dalalka aan lahayn dakado waxay isticmaalaan hadba dalalka leh dakadaha, hadba mida ugu qiimaha Jaban oo ay wax ka dhoofsan karaan waxna kala soo degi karaan. harada, Fiktooriya waxaa loo isticmaalaa isgaarsiinta Gaadiidka waxayna isku xidhaa dalalka Kiiniya Taansaania iyo Yugaandha ganacsigoodana kor u qaaday.



## Hawl-galka 2.22

Ma taqaanaan Webi ama Harada Kutaalla dalkeena Itoobiya ee loo isticmaalo isgaarsiin ahaan?

Webiyada iyo Haraha Afrikada Bari waxaa kale oo ay aad muhiim ugu yihiim dhinaca kaluumaysiga. Waa ilaha cunto sida: Kaluun iyo noocyo kala duwan oo kale. Harada Tanganyiika waxay caan ku tahay noocyada ka duwan ee kaluunka oo laga helo ku dhawaad 200 nooc oo kala duwan sida yaxaaska, iyo Jeerta oo badanaa laga helo agagaarka Haraha. Kala duwanaanshaha noocyadan waxay noqotay wax aan la malayn Karin markii aad aragto in yurub oo dhan ay haysato qiyaastii 60 nooc oo keliya oo laga helo Biyaha macaan oo ka mid ah noocyada kaluunka.

Harada Oaana iyo Harooyinka laga helo Dooxada Rifti sida: Abaya iyo chamo (Jaamo) waxay caan ku yihiin wax soo saarka kaluunka.

## Sheeko-gaaban 2.3

### Kalumaysiga Harada Fiktooriya

Harada Fiktooriya waa harada labaad ee ugu wayn dunida oo lagu sheego inay dhan tahay baaxada oogadeedu (64,484 $km^2$). Ururka kaluumaysatada ee harada Fiktooriya waxaa lagu sameeyay heshiis ay kala saxeexdeen sannadkii 1994 kii dalalka ku bahoobay Bariga Afrika ee ay xubnaha ka yihiin dalalka Kiiniya, Taansaaniya iyo Yugaandha. Waxayna ka dhalatay markii loo baahaday in la maareeyo kheyraadyada kaluumaysataada harada. Fiktuuriyana habka ugu fiican

la isugu dubarido. Ururka waa xarunta waxsoo saar oo ay leeyihiin dalalka ku bahoobay ururka Beesha Bariga Afrika (EAC) oo ay ujeedadiisu tahay sidii la isu waafajin lahaa horumarin iyo daryeel iyada oo la qaadayo talaabooyin lagu maaraynayo adkaynta ka faaiida ysiga kheyraadyada noolaha. Harada fiktooriya inay si habsami leh uga faa iidaystaan dhinacyada bulsho-dhaqaale waaddamada xubnaha ka ah ama wadaaga biyaha harada Fiktooriya eek ala ah: Kiiniya, taansaaniya iyo Yugaandha oo aad si wayn uu uga soo galo dakhli, shaqo, cunno iyo lacagta Adage e dalalka. Bariga Afrika. Haradu waxa ay soo saartaa kaluun dhan in ka badan 800 000 Tan sannadkiiba. Waxaana kasoo xerooday lacag dhan. 590 milyan oo Doolarka maraykanka ah oo 340 milyan oo lacagtaas ka mid ah dib loogu kharash-gareeyay isla Harada inta soo hadhay oo ah 250 milyanna ay tahay macaash sannadkii ka soo gala haamaha kaluumaysi ee laga dhoofinayo webiga Niil. Laanta ugu dheer ee Niil waa isha lacagta adag iyo hantida dagaanka ka kaluumaysiga Haradu waxay taageero siisaa dadku dhow ilaa haba (2) milyan ooqof.



### Hawl-galka 2.23

1 Haradee ama wabigee baa dalkeenam Itoobiya laga kaluumaystaa?

2 Waa maxay Natiijada ka dhalanaysa hadii aynu maarayn wayno si caqli ku jiran u isticmaali wayno ?

## 2.5 GIBILKA HAWADA

***Marka uu casharkani dhamaado waa inay Ardaydu kadib:***

- Aqoon u yeeshaan lakabyada dhulka Hawooyinka ku xeeran ( Gibilka),
- Sharaxaan waxyaabaha uu ka kooban yahay Gibilka inagu xeerani,
- Sawiraan lakabyada kala duwan ee Gibilkeena iyo xuduudaha u dhexeeya lakabyada.

### Ereyada Furaha u ah Casharka

- Gibilka
- Wareega dhexe
- wareega kulka
- wareega Ayoonada
- Hawooyinka Gibilka



## Hawl-galka 2.24

Hawadee (Gaaskee) baa ugu caansan qaybta Hoose ee Gibilka?

Markii aynu cirka sare u fiirino waxaynu arkaynaa daruuro waawayn oo inaga sareeya. Gibilka inagu xeerani waa midka ugu qarada yar marka la barbar dhigo, Baaxada dhulka. Gibilka inagu xeeran waa lakabka hawooyinka ah ee inagu daboolan xataa wuxuu aad uga qara yar yahay meeraha aadka uga wayn ee Jubiitar.

Gibilka inagu xeeran waxaa ugu caansan labo hawo (Gaas) oo ugu cuf, Baaxad iyo mugaba wayn waxaana ka mid ah: Naytroojiin oo 78% ka ah Gibilkeena iyo Ogsajiinta oo 21% ka ah Gibilka. Inta soo hadhay oo ah 1% waa gaasas kale oo laga helo Gibilka hawada. Gibilku (Atmosfeerku) wuxuu ka difaacaa oo uu nuugaa falaaraha Halista ah ee cadceedda, kululaanshaha oogada dhulka ee kulka soo noqon lahaa ee sababa saamaynta Guriga cagaaran (Green House effect) iyo yaraynta Heerkulka xad – dhaafka ah inta u dhaxaysa Dharaarta iyo Habeenka.

Intaas waxaa sii dheer oo laga helaa Gibilka qurubyada yar yare ee maatarka sida: siigo, dambaska Folkaanaha, Roobka, iyo Barafka waana kuwo aan joogto ahayn oo is bedbedalaya. Waana kuwo guud ahaanba uu jiritaankoodu ka yar yahay Hawooyinka kale laakiin marmarka qaarkood ku hadha Gibilka mudo dheer.Hawooyinka lakabkan hoose waa kuwa suurageliya inay nololi ka jirto meerahan aynu ku noolahay ee laga helo:- Dadka, Dhirta iyo xayawaankaba. Gibilka inagu xeeran waxaad moodaa Buste inagu hagoogan. Waana ka inaga difaaca kulaylka dharaartii iyo Qabowga difaacaana Gabalo yar yar oo maatar ah (Cuf, la taaban karo, lana dareemi karo) oo samada shishe heehaaba oo marmarka qaarkood iyagoo oo ololaya soo gaadha Gibilka hawada. Ka hor intayna sagxada dhulkeena soo gaadhinna xoogaa walax-cireedyo ah ayaa awood u yeesha inay soo jiidhaan gibilka.

Gibilku waxaa kale oo uu suurogeliyaa inay Aadamigu u diran karaan fariimaha hawada sare sida: Raadyaha Telefishinada 1wm. Gibilku wuxuu noqonayaa mid marba marka ka sii dambaysa kasii qaro yaraanaya markii uu jooguu kordho ee loo kaco Hawada shishe.

## Gibilka iyo shaqooyinkiisa

- *Wuxuu noolayaasha oo dhan ka difaaca falaaraha halista ah ee cadceeda.*
- *Il tamareedka ugu muhiimsan ee jira muhiimkana u ah Dhulka (Bad iyo Beri).*
- *Difaaca uu inaga difaaco kulka iyo Qabowga.*
- *Suurogeliyaa Dhulka Heerkulkiisa + 15$^o$C oo haduu noqdo – 18$^o$C ka dhigan Gibil la'aan (ma jiro) (laguma noolaan karo).*
- *Raritaanka Tamarta (Hawada diiran oo ah mid la dareemi karo balse aan la arki Karin oo ah Biyaha uumiga) laga bilaaboo Gobolada Dhulbadhaha, Dhexdhexaadka (kul-dhexaadka ah) iyo cidhifyada ama qaboobaha ( loolasha sare).*
- *qaadista biyaha uumiga ah ee sida firfircoon u maraya hababka guud ee wareega Hawada taasoo go'aamisa Da'aaga ( Roob, baraf Dhedo, sayax, 1wm).*
- *Keydinta xadiga Naytroojiinta (oo muhiim u ah Dhirta).*
- *Kaydinta Ogsajiinta iyo kaarboon laba ogsaydhka.*
- *Waa qayb kamid ah meertada nolosha ee maatarka.*
- *Inuu inaga difaaco walax cireedyada Hawada shishe ka soo dhacaya iyaga oo gubanaya markii ay soo dhexmarayaan Gibilka iyaga oo samaynaya isliska laakiinse aan ina soogaadhin.*

## 2.5.1 Lakabyada Gibilka

Gibilka Dhulku waa lakabyo dhawr ah oo kala duwan kuwaasoo lagu qeexi karo iyada oo loo eegayo: heerkulka hawada.

Heerkulka markii loo eego wuxuu ka kooban yahay Afar lakab oo kala duwann oo kala ah:

- *wareega kulka (Troposphere) - Lakabka koowaad*
- *wareega Lakabka (stratosphere) - Lakabka Labaad*
- *Wareega Dhexe (mesosphere) - Lakabka saddexaad*
- *wareega is jiidanaya (thermo sphere) - ama (Ionosphere) wareega Ayoonada - Lakabka Afraad*
- *Wareega Balaadhan (Exosphere) - Lakabka shannaad*

Xusuus: lakabka shannaad waa Lakab ka wada dhexeeya dhamaan meerayaasha oo dhan oo uu dhulkuna kamid yahay. Laakiin (4) Afarta hore waa kuwo u gaar ah Gibilka Dhulka.

Gibilka hawada lakabka dhulka u soo xiga waxaa la yidhaahdaa Taroobo isfeer (wareega lakabyada). Waxaa looga sii gudbi wareega dhexe ee (mesosphereka) kadhibna wareega is jiidanaya (waxaa laga helaa Ayoono Togan (+) iyo Taban (–) oo is jiidanaya) (Thermosphere ama lonosphere).

Xaduudaha u dhexeeya lakabyada waxaa ka mid ah:

- *Torobobaws (xuduudka uu dhexeeya wareega kulka iyo wareega lakabyada) (Tropopause)*
- *Istratobows (seeraha u dhexeeya wareega lakabyada iyo Wareega dhexe) (Stratopause)*
- *Mesobaws (seeraha u dhexeeya wareega dhexe iyo Wareega isjiidanaya) (Mesopause).*

Tamarta cadceeda ugu horaynba waxaa nuuga Dhulka oogadiisa Tamartaas qayb kamid ah dhulka ayaa kul ahaan u qaata. Islamarkaana ah tan diirmaadka aadka u wayn siisa wareega kulka (Tropospthereka).



**Hawl-galka 2.25**

Maxaa lagu salleeyay markii Gibilka (Atmosfeerka) Afar lookala qaybiyay?

Inta ugu badan Gibilka hawada ee ugu cufan waxaa laga helaa oogada sare Dhulka. Waxaa jira shan lakab oo waawayn. Fiiri midka ugu dhow iyo midka ka fog dhulka.

## Wareega kulka (Taroobo-isfeer): Lakabka koowaad

Waa lakabka ugu dhow dhulka, waa lakabka leh cimilo gooreed, wuxuu gaadhsiisan yahay inta u dhaxaysa 7 km (23000 fiit) oo ah dhinaca cidhifyada dhulka iyo 17 km (56000 fiit) oo dhinaca dhulbadhaha ah. Sababta ugu wayn ee kala duwanaanshahan waa Jawiga ama isbedelka cimilo gooreedyada kala duwan ee dhulbadhaha iyo cidhifyada.

Heerkulka lakabkani hoos buu u dhacaa markii jooggu kordho, lakabkan waxaa kaloo loo yaqaanaa lakabka hoose ee Gibilka. Lakabkani waa ka keliya ee ay ka jiraan Daruuro maxaa yeelay waa mid ku xidhan cimilo gooreedka, lakabkani wuxuu tamarta ilayska cadceeda u bedalaa kul. Cufka hawada 80% ee Gibilku waa wareega kulka.

Wareegani wuxuu ka kooban yahay Neefahan (Gaasaskan) kala duwan sida:- Biyaha uumiga, kaarboon laba ogsaydha, Misayn (methane) nitroos (nitrous) ogsaydh (oxide) iyo kuwo kale. Waxay Neefahani (Gaasaskani) inaga caawiyaan kaydinta kulka, markii falaaraha cadceeddu ay dhulka soo gaadhaan ee dib uga noqonaya. Qaybaha hoose ee lakabkani waa meelaha ay ku xoogan yihiin kulaylku maadaama ay ku soo fidayaan diirimaadka heerkulada kulaalayaasha ka dhaca.

Laga bilaabo kulaalayaasha dhulka ilaa iyo gobolada cidhifyada dhulka, lakabkani wuu sii khafiifaa ama wuu sii qaro yaraadaa. Lakabkani cidhifyada dhulka ee qaboobaha ah qoton ahaan qarada wuxuu noqdaa badhka kulaalayaasha markii la isbarbar dhigo. Celceliska qotada lakabkan wareega kulka (Troposphere) wuxuu yahay qiyaas ahaan 11 km.

## Wareega Lakabyada (Istaraato-isfeer) Lakabka Labaad

Wareegani wuxuu dhacaa inta ka saraysa wareega kulka 12 – 50 km heerkulkiisu wuxuu kacaa inta lagu jiro lakabkan. Laakiin wixii ka hooseeya waa kuwo si fiican u fadhiista (qaboobay).

Lakabkani wuxuu fidsan yahay laga bilaabo Tarobobawska (seeraha u dhexeeya wareega kulka iyo lakabkan) qiyaas dhan 51 km ama 32 mayl (170000 fiit). Waa halka uu ka jiro dahaadhka loo yaqaano Ozone ($O_3$) ilaa 30km oo joog ah Heerkulku wuxuu la kordhaa Joogga. Wuxuuna gaadhaa ($0^oC$) ku dhawaad 50 km.

Kani waxaa sababa inuu kordho Ozone ka oo nuuga falaaraha qoraxda ee halista ah. Lakabkani wuuxuu faaiido wayn ugu fadhiyaa noolaha dhulka. Lakabkan roob kama jiro ama Daruuro waayo waxaa aad u xadaysan qaaditaanka ama raritaanka uumi biyoodka kayimaada wareega kulka ilaa wareega lakabyada-kale gayn lahaa. sababta oo ah heerkulka oo si aad ah u hooseeya. Tarobobawska. ku dhawaad 99% cufka atmosfeerka waxaa laga helaa gudaha hoose oo 30 km ah.

Heerkulka sare wuxuu ka jiraa oo laga helaa gobolkan Wareega lakabyada, sababta oo ah molukiyuulada gaaska Osoone oo halkaas ku xoogan.

Osoone waxaa laga helaa Gibilka oo joogiisu u dhexeeyo 10km ilaa 50 km, goobtan waxaa kale oo loo yaqaanaa Lakabka Osoonka. Ku dhawaad 90% oo ka mid ah Osooneka guud ahaan Gibilka dhulka waxaa laga helaa wareega lakabyada (stratosphere).

## Wareega Dhexe ( Meso-isfeer) Lakabka saddexaad

Wuxuu wareegani fidsan yahay laga bilaabo seeraha kala guurka labada lakab ee wareega lakabyada iyo wareega dhexe oo ah Istaratobawska 80km ilaa 85 km waa ka ugu wada qabow lakabyada Gibilka hawada.

Lakabka Dhexe inta u dhaxaysa 50 km ilaa 85 km dabeecada uu leeyahay waa hoos u dhac heer kuleed oo Joogto ah halka ugu hoosaysa ee uu gaadhana uu yahay qiyaas dhan ama ku dhow 100$^{o}$C qiyaastii 80km kan oo ah xuduudka ama seeraha sare ee kala guurka. Mesobowska waa lakabka walax cireedyada (meteors) gubanaya ay uga soo gudbaan Gibilka.

## Wareega is jiidanaya (Termo-isfeer) Lakabka Afraad

Lakabkani wuxuu kacaa Boqolaal dhawr oo mayl oo kasareeya dhulka oogadiisa laga bilaabo 50mayl  oo kor ah ilaa ku dhawaad 400 mayl. Heer kulku wuxuu la koradhaa Joogga dhulka, wuxuuna gaadhaa halka ugu saraysa oo ah 3,600$^{o}$F (2000$^{o}$C). sikastaba ha ahaatee hawadu waa qabow ay sababeen molikiyuulada aadka u kulul ee ilaa xad kala fog. Lakabkani waa lakabka ugu sareeya Gibilka hawada; Heerkulkiisuna wuxuu gaadhaa halka ugu saraysa oo ah 1200$^{o}$C.

Heerkulkani sare waxaa dhaliya nuugitaanka falaaraha cadceeda ay nuugeen Molokiyuulada ogsajiinta ahi ($O_2$) Hawada lakabkani waa kuwo ilaa xad qaro yar Molikiyuuladuna ay u kala go’een midba midka uu ka wayn yahay xaga fogaanta Aakhirkiina waxaaba u adkaaday si aad ah habkii ama nidaamkii lagu soo cabbiri lahaa (Heerkul Beega) Kulka ka jira awgii.

Heerkulbeegga waxaa loo adeegsadaa oogooyinka ay dhex marayaan dhaqdhaqaaqyada Tamarta kulku.

## Wareega Balaadhan (Iksoo-isfeer) Lakabka shannaad

Dhab ahaantii wareega is jiidanayo waa wareega Balaadhan. Wuxuuna u fidsanyahay si aan isleekayn 500 mayl in ka saraysa oogada dhulka. Kani waa ka ugu wada sareeya Gibilka, waana gobolka ama seeraha kala guurka ee hawada sare. Wareega Balaadhan waa in ka badan 500 km laga bilaabo oo lagu qeexo 500 – 1000 km Joog dhan. Cadaadiska goobtani waa mid aad u hooseeya oo waxaa mar horeba loogu  magacdaray “shey aan walax ahayn” Lakabkan  molikiyuuladiisu waa kuwo xoogaa (inyar) ah. Kuwaas oo u firxada xagaa iyo hawada shishe ee fog (space) wareega Balaadhan wuxuu ka kooban yahay gebigiisuba Haydroojiin iyo hiliyam.

Sidaa daraadeed waxaan arki karnaa inuu Aadamuhuu saddexdan lakab uga faa iidaysto siyaabo kala duwan:

- ***Wareega kulka:*** *Neefsiga iyo Qoyaanka ku haboon dalag beerashada.*
- ***Wareega lakabyada:*** *socdaalka xaga Hawada meel ilaa meel xawli aad u sareeya.*
- ***Wareega is jiidanaya:*** *Dhinacyada isgaarsiinta la xidhiidha sida Raadiyaha, Telefishinada Telefoonada 1wm.*



**Hawl-galka 2.26**

1 Heerkulku miyuu kordha ama Hoos u dhacaa Dhinaca saraynta jooga ee:

Wareega kulka ? ______________ wareega lakabyada? ______________

Wareega dhexe? ______________ wareega isjiidanaya?______________

2 Sawir Heerka lakabyada Gibilka?

## 2.5.2 Lakabka koowaad iyo waxa uu ka kooban yahay

***Maxaad u malaynaysaa qaybta ugu hoosaysa Gibilku u taageerayo Nolosha?***

Wareega kulku waa lakabka ugu wada hooseeya lakabyada Gibilka. Qaradiisuna waxay u dhaxaysaa 8km oo cidhifyada dhulka ah ilaa 16km oo ah Dhul – badhaha wareegani waa laga bilaabo dhulka oogadiisa oo kor uga kaca joog dhan 7km ilaa 20km oo ka sareeya heerka Badda. Lakabkani waa midka ugu badan ee ay ka dhacdo xaaladaha isbedel cimilo gooreed ee dunida oo dhan. Cufnaanta ugu badan Gibilka oo dhan (ku dhawaad 75 – 80%) waxa ay ka dhacdaa ama laga helaa Lakabka Koowaad (Troposphere).

Hawada ugu diiran lakabkan waxaa laga helaa heerka hoose ee u dhow sagxada dhulka. Inkastoo uu kala duwan yahay Heerkulka ka dhaca oo hoos u dhaco Heerkulka lakabkan markii kor loo sii kacaba ay ka sii qaboobaanayso. Cadaadiska Hawo sidoo kale wuu yaraada markii uu joogu kordho. Lakabkani hoose waa mid ka bilaabma sagxada dhulka ama Badda korna u kacsan 10 km – 12 km joog dhan. Waana ta keentay hababka ugu badan jawiga cimilo gooreedka (weather) sida: samaysanka Daruuraha

Muuqaal ahaanna waxaa lagu yaqaanaa Heerkulka hoos u dhacaya ee joogtada ah markii jooggu kordhaba. xuduudka (seeraha) sare Tarooboisfeerka ee Tarobobaws oo ah seeraha kalaguurka wareega kulka iyo wareega lakabyada (Troposphere and stratosphere)

Joogga seeraha kala guurku waa mid ku xidhan Juqraafi ahaan Loolka iyo xiliga. Lakabkani wuxuu jooggiisa ugu badan ku yaallaa gobolada kulaala yaasha. Lakabkan wuxuu 80% ka kooban yahay cufka Gibilka hawada, sidoo kalena Lakabka sare ee seeraha kala guurka (Tropopause) Heerkulku wuxuu gaadhaa qiyaas dhan 60°C. Meelahan leh jooggan waxay u dhow yihin hawooyin yaryar oo teelteel ah, dabaylo xawli ama xawwaare sare lihi weheliso (ilaa 500 km saacadiiba). Waxaana adeegsan kara goobtan diyaaradaha yaryar.

Qiyaastii 80% cufka Gibilka hawada waxaa laga helaa lakabkan koowaad (Wareega kulka) sidoo kalena waa lakabka isbedelka cimilo gooreed ama Jawigu uu ka dhaco meesha ugu badan. Heerkulka Hawada ee ugu badan sidoo kale uu ka dhaco agaagaarka sagxada sare ee dhulka ee lakabkan markii uu joogga dhulku kordho heerkulkuna wuxuu hoos ugu dhacaa si la mid ah Joogga saraynta saamigiisana lagu qiyaaso $\frac{6.5\ ^{o}C}{1000\ m}$ (1000 kii mitirba, 6.5°C oo Heer kulka kor ama hoos ah). Inta badan uumibiyoodka iyo qurubyada siigada ah waxaa Gibilka oo dhan laga helaa Lakabkan. Waana sababta keentay inay ka jiraan daruuraha laga helo Lakabka hoose lakabkani wuxuu u kululaadaa markii hoos loo kaco. Falaaaraha cadceeduna waxay diirimaadka siiyaan sagxada sare ee dhulka ama Baddaha waawayn taasoo shucaac ahaan ku sii daysa hawada laftigeeda.

# 2.6 CALAAMADAHA IYO ASTAAMAHA CAALAMIGA AH

***Markii uu casharkani dhamaado kadib Ardaydu waxay awood u yeelan doonaan inay:***

- Garwaaqsadaan ahmiyada ay u leeyihiin midabadu khariiradaha,
- Tilmaamaan ama aqoonsadaan calaamadaha iyo Astaamaha caalamiga ah ee ugu muhiimsan,
- Isticmaalaan calaamadaha iyo Astaamaha loo isticmaalo khariidadaha,
- Sameeyaan furaha khariidadaha sahla.
- Aqoonsadaan muuqaalada duleed iyo muuqaalada Dabiici ama Dad sameega ah ee bedka khariidadaha iyo sawirada.

## Ereyada furaha u ah Casharka

- Astaamaha iyo Calaamadaha
- Midab
- Khariirad
- Khariirad muuqaaleed
- Xariiqaha marsinada siman
- Qiyaas cabbirka khariirada
- Furaha khariirada
- Khariirad siyaasadeed

## Waa maxay Khariiradu?

Khariiradu waa sawir fidsan oo dhulka oogadiisa sare ah. Wuxuu tilmaama ama tusaa baaxada iyo qaababka dhulka Berrigiisa iyo biyihiisa oo korka laga sawiray ama laga fiiriyay. Ku dhawaad wax kasta way ka muuqan karaan oogada khariirada marka laga reebo magacyada qoraalka ah, waana astaamaha caalamiga ah ee laysku waafaqsan yahay.

Khariiradaha waxaa lagu muujin karaa warbixinno kaladuwan si ay u matalaan warbixinada laga yaabo inay ka mid yihiin:- waddooyinka, soo jiidashada dalxiiska, Garoomada ama goobaha laga helo wax u taagan qaybaha cimilo maalmeed ee ugu dambeeyay.

Walaxda khariirada dusheeda ee wax u taagan waxaa loo adeegsadaa calaamado. Calaamadi waa sawir laga helo khariirad dusheed oo u taagan shay dhab ah oo dunida ka mida. Fahamka calaamadan waxay ubaahan tahay fure. Furaha loo adeegsado khariirad waa si loo faahfaahiyo macnaha calaamad kasta oo loo isticmaalay khariirada dusheeda. Furayaashani waxay sida caadiga ah ina tusaan sawir yar oo calaamadihiisa mid kasta oo kamid ah loo adeegsaday khariirada dusheeda qoraalo kale oo la raaciyo oo ah macnaha mid kasta oo calaamadahaan ka mid ah.

Khariirada juqraafiyeed ee halka ay goobuhu dhacaan waxay ku tusinaysaa waxa laga helo meesha iyo meesha shay walba yahay.

Khariiradaha waxa aynu u isticmaalnaa:

- *Helitaanka wadiiqo meel ilaa meel kale*
- *Barashada magacyada la siiyay Dhulka qaybihiisa Berriga iyo biyaha ah*
- *Warbixin soo jeedin habka ugu fudud ee lagu fahmi karo.*

Khariiradaha waxaa loo isticmaalaa si ay inoo tusaan noocyo badan oo kala duwan oo warbixinno ah. Sida: dal, shaqo la'aanta, Qorshaynta goobaha dukaamada waawayn sagxadooda, Qiimaha shidaalka, Basaska wadooyinkooda, Haraha, Dhulka la isticmaalo, khariiradaha Beeraha Heerkulka, Dariiqyada (Jidadka), is bedelka Tirada dadka, 1.wm.

*Si ay inooga caawiyaan fahanka ama "Akhriska" Khariiradaha waxaa aad iyo aad muhiim u ah. Kuwan soo socda:*

- ***Cinwaanka*** *– Waxa ay khariidadu ku tusayso.*
- ***Furaha*** *– Sidaynu mar horeba soo sheegnay khariiradi waa wax in badan ka yar dunida dhabta ah ee ay matalayaan. Suurogala ma'aha in ay ku tusto wax walba oo aad kartid. Sidaa darted khariirad sameeyayaashu waxay isticmaalaan calaamado u taagan Goobaha iyo walxaha khariirada dusheeda. Marmarka qaarkood waxaad arkaysaa shay u taagan sida wado tareen ama Buur. Marmarka qaarkoodna waa uun xariiqo ama qaabab calaamaduhu. Furaha khariiradu wuxuu ku sheegayaa waxa ay calaamad kastaa utaagan tahay.*

***Sawir khariirad gacmeed fudud oo ah dugsigaaga una samee furaha calaamadaha aad u isticmaasheen?***

- ***Qiyaas cabbirka*** *– Markii wax la sawiro waa in la cabbiro waxaa looga jeedaa tilmaamida ka duwanaanta baaxada ta dhabta ah. Khariiradaha badankood tani waxay ka dhigan tahay wax walba inuu in badan ka yar yahay. Halkaan waxaynu ku arki karnaa in dal dhamaantii aynu hal warqad ah oo yar ku sawiri karno gacantana ku qaban karno.*

*Khariirad sameeyayaashu waxay Qiyaas cabbirka u adeegsadaan si uu inooga caawiiyo fahamka fogaamada khariirada dusheeda. Halbeega cabbiraada khariidada dusheedu wuxuu la mid yahay fogaanta dhabta ah ee dhulka: 1 inch = 100 mayl ama 1 cm = 10 km. ayay u dhigmaan*

*Markaa waa inaad xasuusnaatiin in khariiradu tahay muuqaal matalaya in ka badan oo ka wayn oo dhulka ah markii qiyaas cabbirku uu yaraado waxaa fidaya macluumaadka warqada ama khariirada.*

*Khariiradaha qaarkood aad bay u waawayn yihiin, halka qaar kale aad u yaryar yihiin. Khariiradu waxaa ka wayn dhulka ay matalayso, qaab bedelka cabbirkuna wuxuu noqo doonaa mid ka wayn.*

- *khariiraduhu waxay sidoo kale u baahan yihiin in lagu muujiyo Jihooyinka, sida: waqooyi, koonfur, Bari iyo Galbeed oo loo yaqaano Afarta (4) Jiho ee waawayn. Waxaa kale oo jira: waqooyi Bari, Waqooyi Galbeed, Koonfur Bari, iyo koonfur Galbeed. Fiiri Jiheeyaha ama falaadha waqooyi waxaa lagaga qoraa dusha sare ee khariirada. Oo ah sidan N*
- ***Xariiqaha*** *– Dhigaha iyo loolasha:- Khariiradaha qaarkood waxaa xariiqahan loo adeegsadaa helitaanka halka ay meeli dhacdo. Waana halka ay isko Jaraan loolka iyo dhiguhu ama isgoyska labada xariiqood ee dhigaha iyo loolka.*

Haddaba calaamadaha iyo Astaamahani waa kuwa awood inoo siiya inaan cadadka ugu badan ee warbixin helno kuna muujino khariirad calaamadahani waa qayb kamid ah "Luuqada" khariiradaha muuqaaleed.

Calaamadaha khariiradi waxay ku tusinayaan waxyaabaha Dhaqameed (ay dadku samaysteen). Waxyaabaha dhaqameed waxaa ka mid ah Dhismayasha, Magaalooyinka, xadhkaha korontada. (midab madow baa calaamad u ah) Biyo xidheenada kanaalada (Buluug) Geedaha, Mashaariicda Beeraha iyo Goobaha waxsoosaar (cagaar) calaamadahani waa kuwo laga soo jaray kharirada maxaa yeelay aad bay u yaryaryihiin si ay u matalaan baaxadooda saxda ah.

Calaamadaha khariiradu sidoo kale waxay ku tusaan waxyaabaha dabiiciga ah sida Buuraha Taagaga, Dooxooyinka iyo Bannanada kuwana waxay leeyihii calaamado u gaar ah waxaana ugu muhiimsan kuwa laga helo khariiradaha muuqaaleed oo ku tusinaya waxyaabaha Dabiiciga ah ee aadka muhiimka u ah.

Khariiradaha habka biyo dhaca bedad gaar ahaaneed waa kuwa ku tusaya webiyada iyo isku – soo darayaalkooda oo lagu muujiyay Buluug khariiradaha muuqaaleed markii ay biyaha wabigu hoos u dhacaana waxaa lagu muujiyaa isla khariiradahan dhibco madow oo xariiqo kala go' go' an ah. Jihadana u qulqulayana sidoo kale loogu cadeeyay ama muujiyay warbixin ku saabsan meelaha sare iyo hoose ee wabiga Had iyo jeer webigu meelaha jooga sare ayuun ka yimaadaa wuxuuna u qulqulaa meelaha jooga hoose.

***Fiinta (Fiiqa):*** waxaa lagu muujiyaa dhibic madow iyo qiimaha joogga oo agtiisa ku qoran sida:

- *1419*

Tusaale: Farqiga u dhexeeya laba meelood oo sare oo qumaati ah. Meesha sare oo laga jaray meesha hoose : A = 800 m, B = 200 m Farqiga Jooggu = 600 m

## Waa maxay Xariiqyada Marsinada siman?

Waa xariiqa kala go' go' an ama waa xariiqaha isku xidha meelaha isku joogga ah ama isku qiimaha yahay joogoodu, markii loo eego heerka Badda xariiqaas oo ku tusinaya jooga saxda ah mitir ahaan.

Farqiga u dhexeeya laba xariiq oo ka tirsan xariiqaha marsinada siman waxaa loo yaqaanaa Tiigta ama fogaanta labada xariiqood wuxuuna had iyo jeer noqdaa 20 mitir. Labada xariiq ama in ka badani hadii ay kala durkaan waa dhul ku tusaya siman oo fidsan. Hadii ay isku xidhmaan Hal xariiq ama in ka badan waxaa loo yaqaan janjeedh ama dhul buura lay ah. Meelaha laalaadka ahna xariiqahani waa meelaha ay iska taabtaan. Markaa kadib aad sidaa u ogaato ayaad go'aansan doontaa jihada uu webigu u socdo.

***Intaad fiiriso khariiradaha muuqaaleed ee fogaanta labada xariiqood ee xariiqaha marsinada siman go'aanso jihada wabigu u socdo?***

## 2.6.1 Adeegsiga Midabka Khariiradaha



### Hawl-galka 2.27

1 Midbkee baa u taagan Bad wayn khariidada dusheeda?

2 Waa maxay adeegsiga midbka khariidaduhu?

Khariidad sameeyayaashu waxay midabyada uga faaiidaystaan muuqaalada ay muujinayaan khariiraduhu. Badanaa midabka waxaa loogu isticmaalaa in lagaga gudbo farqiga kala duwan ee noocyada khariiradaha kala duwan ee la soo saarayo. Midabada khariiradi waa kuwo had iyo jeer ka kooban hal khariirad oo keli ah (inay ahaadaan kuwo xirfadlayaal ay fiiriyeen) in badan oo midabada la adeegsaday ka mid ahi waxay xiriir la leeyihiin walaxda ama muuqaalka dhulka. Tusaale:- midabka Buluuga ahi inta badan had iyo jeer waxaa loo xushay Biyaha macaan ama Badwaynta.



### Hawl-galka 2.28

1 Tilmaan farqiga ugu wayn ee u dhaxeeya khariiradaha siyaasadeed iyo kuwa muuqaaleed?

2 Maxay yihiin midabada loo adeegsado khariiradaha siyaasadeed iyo kuwa muuqaaleed?

Khariiradaha siyaasadeed, waa kuwa ina tusa muqaalo badan oo dadku sameeyeen (gaar ahaan xuduudaha) oo badanaa sida caadiga ah loogu isticmaalo midabada si ka badan kuwa khariidadaha muuqaaleed.

Khariiradaha siyaasadeed waxaa loo isticmaalaa aalaaba Afar ama in ka badan oo midab oo u taagan dalalka kala duwan ama gudaha dal keliya loogu sii kala qaybiyo sida: Gobollo ama ismaamulo. Sidoo kale khariiradaha siyaasadeed waxaa loo isticmaalaa midabka Buluuga Biyaha madowga iyo/ama casaanka magaalooyinka (xadiidka).

Sidoo kale khariiradahan midabka madow waxaa loo isticmaalaa xuduudaha. Waxaa ka duwan nooca dhibic-dhibicda ah oo u taagan nooca xuduudka – caalami, ismaamul, ama wadan ama qaybqabin siyaasadeed oo kale.

Khariiradaha muqaalka dhulka caadiyan waxaa loo adeegsadaa isticmaalka midab ee ugu haboon in la tilmaamo isbedelka kala saraynta ama kacsanaanta. Cagaarka dhexdheexaadka ah waxaa loo adeegsadaa meelaha uu si caadi ah u kacsan yahay joogoodu cagaarka madowga xigana meelaha Jooga hoose, meelaha uu joogoodu ka sareeyana cagaar khafiif ah oo hadhaysan meelaha uu joogoodu aadka u Sareeyana Buni (maariin) khafiif ah ilaa Buni madow xiga oo ku tusaya jooga sare khariiradaha qaarkood waxay si caadi ah u adeegsadaan midabada casaanka ama caddaanka ama guduudka madow-xigeenka ah meelaha uu joogoodu aad u sareeyo khariirada muuqaaleed Biyaha waxaa loo adeegsadaa Buluuga (dhaayaha) Buluuga madowga xiga meelaha Bada ugu qotoda dheer. Buluuga khafiifka ahna meelaha Qotoda gaaban Halka Buluuga dhexdhaxaadka ahina yahay meelaha qotoda ka yara dheer (ka qotoda gaaban) markii kacsanaanta ama saraynta joogu ka hoosayso Heerka badda waxaa la adeegsanayaa cagaar cadaan xiga ama casaan ama buluug – caddaan xiga.

***Adiga oo adeegsanaya khariirad tilmaan muuqaalka loo adeegsaday midab kasta adoo taxaya ama ka qoraya? Tusaale; Biyaha – Buluug***

Khariiradaha loo adeegsado wadooyinka iyo kuwa kaleba guud ahaan waxaa loo adeegsadaa habab kala duwan:

- ***Buluuga*** – *Harooyinka, Webiyada, Togoga, Badwaynada, Biyo Keydiyeyaasha, marin biyoodyada, xuduudaha deegaan,*
- ***Casaan*** – *Marin biyoodyada ugu mihiimsan, wadooyinka, Bedka magaalooyinka, Gegida Diyaaradaha, Goobaha si-gaar-ahaaneeed loo*

*daneeyo, saldhigyada ciidamada, magacyada Goobaha, Dhismayaasha, xuduudaha.*

- ***Huruuda*** – *Dhismayaasha sare ama Bedka magaalooyinka*
- ***Cagaar*** – *Beerta xayawaanka lagu dhaqo, lagu cayaaro kubada Goolafta, kaymaha, seeraha la soo oodo, wadooyinka W/Wayn Beeraha waawayn ee khudaarta*
- ***Bunni*** – *Lama degaan, Goobaha dhaxalka, Beeraha xayawaanka, seeraha ciidamada, xariiqaha marsinada siman,*
- ***Madow*** – *Wadooyinka, Jidka Tareenka, wadooyinka w/wayn, Buundooyinka (kaabadaha), magacyada Goobaha, Dhismayaasha, Xadadka*
- ***Buluug-Casaan Xiga*** – *Wadooyinka waawayn.*

Markii aad fiirisid khariiradaha kala duwan ee loogu isticmaalay midabada hababka kala duwan. Waxaa muhiim ah inaad furaha u siticmaashid midabaada aad baratay.

## Dabeecadaha Midabada

Midabada qaarkood waxay leeyihiin macno dhaqameed xoogan. Kaas oo macnihiisa ay ku kala duwanaan karaan dhaqan ilaa dhaqan kale bal aan fiirino midabada kaalinta hore loo tixgeliyo.

Casaan waa midab xoogan oo meel fog laga arki karo oo dhex socona kara cidlo badan waxaa loo adeegsadaa calaamadaha digniinta, muuqaalada khariirada sida:- wadiiqooyinka, wadooyinka khariirada korkeeda, Gacanka. Buluuga Waxaa loo isticmaalaa webiyada Harooyinka

Huruudu saamayn aragtida ah buu leeyahay kaasoo si aad u saraysa isugu xiran waana mid hadii meel la mariyo aan laga masixi karin.

Madowga iyo Caddaan ka labadooduba waxay leeyihiin dabeecado isku mid ah, labaduba warbixin la'aan bay matalaan, dhexdhexaad bayna ka yihiin meelaha madowgu in kasta oo uu kakan (adag) yahay hadana qaabka dhismaha gudaha ee khariirada dabeecadaha juqraafiyeed ee kale buu ku jiraa.

## Tixgelinta Midabada

- ***Xooga saarid:*** *Midab ma u adeegsan kartaa si aad xooga u saarto qaybo kamid ah khariidadaada taas oo aad doonaysid inaad ugu sawirtid (muujisid) dareenka?*

- ***Soo Bandhigyada:*** *Waxaan isku dayay imam soo bandiigo khariidado taasoo laga fiirinayo shaashadayda wayn laakiin waxaa argagax ku muujiya gidaarka (Projectors). Hadii aad soo bandhigaysid khariidadaada, tijaabi farahana ka qaad kuwa aad hubto inay is diidan yihiin, kuna midabee bidhaamaha habkii aad doonays inay u bedhaamaan.*
- ***Midababada Indhoolaha:*** *Waxaa jira goobo xariiqaha dushooda oo ku tusikara sidii dadka indhaha la'ay ku heli lahaayeen kharii dadaada. Qaad shaashadda khariidadaada sidaheeda hubi in cinwaanadu yihiin kuwa aad doo naysay in si heerkoodu sareeyo qof waliba u garwaaqsado*
- ***Midabka iyo isdiidmada:*** *Markii aynu abuurno muuqaalo (Aragtiyo) waxay ka mid noqonayaan in la akhriyo daawadahana ugu yabooha diidmo kurulan oo u dhaxaysa  a salkooda (warqad ama shaashad) iyo iskadhalkooda Tusaale midabka huruuda ahi waa iskadhal hadii lagu midabee iyo meel midabka asalka ah ee cadi marsan yahay suurogal noqon may so inla akhriyo in badana abidkii isma bedbedalo*
- ***Isticmaalka xad-dhaafka ah:*** *xadid qindigaaga midabada laba ama sadaxda (2 ama3) ugu waa wayn ku hadhee meelaha kala duwan kuna badi midabka warbixinada ama xagfa. Dusha sare xusuusnow, in midab ka yaraan karo ama ka badan.*
- ***Macnaha dahsoon:*** *Goorma ayay tahay inaad adeegsato Buluug ama casaan? Waa marka ay xambaarayaan macnayaal dahsoon.*

## 2.6.2 Caalamadaha iyo Astaamaha Caalamiga ah

Calaamadaha, Astaamaha iyo sawirada waa mawduuc aragtiyeed ama xidhmooyin muuqaaleed oo loo dejiyay inaad kaga qayb qaadatiin fikirkiina kaasoo idinka caawin doona dugasigiina sidii aydin fikradaha iyo qaybta argatida ee maskaxdiinu sida ugu fiican u isticmaali lahayd. Macnaha calaamadaha iyo Astaamuhu waa isgaadhsiin degdeg ah waxaa laysugu gudbiyaa intii la  adeegsan lahaa ereyo badan Dhaqsana looga fahmi karo ereyada.

Calaamadaha, Astaamaha iyo sawiradu waa habab u taagan habka ugu fudud ee fahan dhamaystiran sidaa daraadeed markii laysku wada geeyo ee la isku daro si ay u sameeyaan khariidado iyo Jaantusyo si lamid  ah siday ereyadu u samayn karaan weedhaha.

***Sawir oo magacaw calaamadaha iyo Astaamaha meelaha warshadaha, Dugsiyada, kaniisadaha, masaajidada, Jidadka Tareenka, wabiyada 1wm***

## Furaha khariiradaha oo la fahmo

Macluumaadka kala duwan ee ay sidaan khariidaduhu waa kuwo lagu muujiyay furaha khariiradaha. Maclumaadkaas waxaa ka mid ah:- wadooyinka, Dalxiiska iyo fadhiisimada ama Hab socodka ugu dambeeyay ee xaga cimilo maalmeedka isbedelkeeda.

Walaxda khariidad dusheeda waxaa metalaya oo u taagan adeegsiga calaamadaha. Calaamaduna waa sawirka laga helo khariidadaha dusheeda oo u taagan walaxdaa.

Hadaba si loo fahmo calaamadahan waxaa loo baahday Fure. Furahani waxaa badanaa la raaciyaa qoraalo sawirka yar ee ku tusinaya calaamadaha khariidada dusheeda.

- ***Midabadu waa heerka macnaha uu leeyahay:*** *Madowgu Nooc ahaan wuxuu tilmaamaa muqaalada dad sameega ah xaqiiqo ahaan iyo warbixin ahaanba. Tani oo looga jeedo muuqaalada Dhismayaasha iyo xuduudaha. Maskax ama caqli ahaaneed sida xariiqaha la tiriyo ee Madow casaankuna wuxuu tilmaamaa wadooyinka' xuduudaha dadka, markii casaanka lagu calaamadaynayo xuduudaha meelaha magaalooyinka waawayn, xariiqaha isku xidha iyo muqaalada juqraafiyeed waxaa lagu muujinayaa Bunni Halka kaymaha iyo goobaha kale ee ka waawayn ay ku tusayaan cagaar.*
- *Qiyaas cabbirka khariidada marka lagu muujinayo cabbirka khariidadaha tusaale 1:100000 Hadaba si loo akhriyo waa inaan isticmaalno cabbirka qiyaasta 1cm: 1km oo ka dhigan 1cm oo ah fagaanta laba barood ay oogada khariidada isu jiraan oo u dhiganta 1km oo ah labadii meelood ee ay matalayeen fogaanta u dhaxaysa.*

Jiheeye: wuxuu ka kooban yahay 360$^{o}$ oo lagu calaamadeeyay (4) jiho oo waawayn iyo jihooyinka kale ee ka farcama

- *Haddii aad haysatid Jiheeye, waxaad si toos ah ula xidhiidhi kartaa waxa ku xeeran oo ay khariidadu ku ogaanayso. Oogada khariidada dusheeda waxaa laga helaa jiheeye sahlan ama fudud, kadib markii khariidda hoos loo leexiyo waxaa sare u kacaya irbada yare ee tilmaanta jihada jiheeyaha.*

## Wadooyinka

Waxaa jira calaamado dhawr oo loo adeegsado wadooyinka iyo Jidadka Waa wayn gaar ahaanna dadka aan garanaynna ay ku wareeraan calaamadahooda kakan. Labada xariiqood iyaga oo isbarbar socda ayay tilmaamaan una kala qay biyaan

- *Jidadka waa wayn nooc ahaan waxay la heer yihiin ismaamul ama Federaal waxaana lagu calaamadeeyaa tirooyin ku dhexjira goobo*
- *Wadooyinka caadiga ahna waxaa lagu calaamadiyaa xariiq dhaash-dhaash ah*
- *Cinwaanka: cinwaanku wuxuu xambaarsan yahay khariiradu fahanka ay gudbinayso nooca ay tahay. Wuxuuna tilmaamaa xogta oo aad u cad oo la fahmi karo.*



### Hawl-galka 2.29

1 Sawir Khariirad gacmeed oo aad bedkeeda u adeegsatay midabo, calaamado iyo fure?

2 Samee fure fudud oo aad u adeegsatay calaamadahoodii?

# GUNAANADKA CUTUBKA

Cutubkani waxaad ku soo barateen dhulka iyo waxyaabo aad u khuseeya oo gaar ahaan xooga saarayay Bariga afrika oo ay kamid ahaa yeen:

- Dhulka oogadiisa
- Qaaradaha iyo oogooyinka Biyaha
- Adeegsiga Dhaqaale ee Biyaha Bariga Afrika
- Qaybaha dhulka ugu muhiimsan ee Bariga Afrika
- Khayraadka Biyaha ee Bariga Afrika
- Biyaha iyo faaiidadooda Dhaqaale ee Bariga Afrika
- Lakabyada Gibilka Hawada
- Calaamadaha iyo Astaamaha Caalamiga ah

# LAYLISKA GUUD EE CUTUBKA

## Qaybta I *Ka jawaab su'aalahan*

1. Tax qaaradaha Aduunka?
2. Qeex muuqaalada duleed isla markaana magacaw muuqaalada ugu muhiimsan ee Bariga Afrika?
3. Qor isbarbardhiga iyo is diidista Biyaha macaan iyo Biyaha milixda leh?
4. Tax Dhaqaalaha ugu muhiimsan ee looga faaiidaysto Bariga Afrika Biyaha?
5. Magacow Afar qaab waraab oo laga isticmaalo Bariga Afrika?
6. Calaamadee lakabyada kala duwan ee Gibilka iyo xuduudaha u dhaxeeya lakab kasta?
7. Sharax waxa uu ka kooban yahay lakabka ugu hooseeya Gibilka ee wareega kulka?
8. Calaamadee guud ahaan Halka uu dhaco (laga helo) Lakabka Ozone?
9. Adiga oo adeegsanaya khariirad gacmeed tilmaan oo calaamadaha iyo astaamaha ugu muhiimsan ku muuji?
10. waa maxay faaiidada midabadu?

## Qaybta II *Ka dooro jawaabta saxda ah*

1. Wadarta guud ee bedka dhulka, Biyuhu waxa ay ka yihiin

   B 30% - 40% J 60% X 70%

2. Kuwan soo socda waxaa ka duwan

   B Aasiya T Afrika J Itoobiya X Yurub

3. Muuqaalada duleed ee ugu waawayn Afrikada Bari waa

   B Dooxada Rifti J Haraha
   T Webiyada X Dhamaan

4. Halka ay buurta kilimanjaaro ugu dheertahay Afrika ay Raas Dhashanna ugu dheer tahay

   B Itoobiya T Aasiya J Kiiniya X Midna

5 Lakabka Gibilka hawada ee inoogu dhow waa

B Istaraato-isfeer
J Toroobo-Isfeer
T Meso-Isfeer
X Iskoo-Isfeer

6 Webiga Niil biyaha ugu badan waxaa ugu deeqa

B Niilka cad
T Niilka Buluuga
J Shabeele
X Takase.

## Qaybta III *Isku aadi jog-u taxa "B" iyo "T"*

| B | | T | |
|---|---|---|---|
| 1 | Afrika | B | Harada ugu wayn Afrika |
| 2 | Itoobiya | T | Webiga ugu dheer |
| 3 | Niil | J | Muuqaal metelaya wax ka wayn |
| 4 | Daana | X | Harada ugu wayn Itoobiya |
| 5 | Fiktooriya | Kh | Waa qaarada labaad xaga baaxada |
| 6 | khariirad | D | Dalka Bariga Afrika ugu dadka badan |

## Qaybta IV *Buuxi Meelaha Bannaan*

1 ____________ waa meel biyo fadhiyaan oo uu ____________ ku hareeraysan yahay.

2 Badwaynta ____________ waa ta ugu wayn dunida.

3 Bar-fadhiisadka Biyaha ____________ way ka hooseeyaan biyaha ____________.

4 Lakabyada Gibilka hawadu ka kooban yahay waa:

b ______________________

t ______________________

j ______________________

x ______________________

kh ______________________

# CUTUBKA 3

# DEEGAANKA



## Ujeedooyinka Cutubka

***Marka uu casharkani dhamaado kadib Ardaydu waxay awoodi doonaan inay:***

- Ogaadaan noocyada iyo baahsanaanta Baadka dabiiciga ah iyo xayawaanka duur-joogta ah ee Bariga Afrika,
- Garwaaqsadaan arimaha saamaynta ku leh baahsanaanta baadka dabiiciga ah iyo xayawaanka duurjoogta ah ee Bariga Afrika,
- Gartaan sababaha iyo saamaynta Faragelinta uu Aadmigu ku hayo deegaanka,
- Garwaaqsadaan hababka daryeelka iyo ahmiyada ay dhulseereyaasha qaranku u leeyihiin dalalka Bariga Afrika,
- Tilmaamaan danaha laga leeyahay faragelinta waxyeelada u geysanaysa deegaanka.

## Tusmooyinka Muhiimka ah


**3.1** BAADKA DABIICIGA AH IYO XAYAWAANKA DUUR JOOGTA AH EE BARIGA AFRIKA

**3.2** SAAMAYNTA UU AADAMIGU KU LEEYAHAY DEEGAANKA

**3.3** HABABKA DARYEELKA CARRADA IYO BIYAHA.

**3.4** SEEREYAASHA QARANKA IYO AHMIYADOODA AY U LEEYIHIIN ITOOBIYA IYO BARIGA AFRIKA

- *Gunaanadka cutubka*
- *Layliska Guud ee Cutubka*

# HORDHACA CUTUBKA

Fasalkii shannaad waxaad ku soo barateen casharo ku saabsan Geeska Afrika. Deegaamada dalalka Geeska Afrika, Muuqaaladooda ayaa lagu soo falanqeeyay. Baadka dabiiciga iyo xayawaanka duurjoogta ee gobolka Geeska Afrika waxay ahaayeen kuwo aynu diiradda ku saaray ee ugu muhiimsanaa. Sida aad wada xasuusan tihiin, waxaynu soo falanqaynay noocyada iyo ahmiyada baadka dabiiciga iyo xayawaanka duurjoogta ah ee Geeska Afrika, daryeelkooda iyo dhibaatooyinka haysta.

Cutubkani, waxa aynu ku falanqayn doonaa Bariga Afrika. Gaar ahaan deegaankeenu wuxuu noqon doonaa halka aynu diiradda saari doono. Cutubka waxaynu ku falanqayn doonaa baadka dabiiciga ah iyo xayawaanka duur joogta ah ee Bariga Afrika, xaaladaha saamaynta ku leh baahsanaantooda, saamaynta aadamuhuu ku leeyahay deegaanka, hababka daryeelista carada, biyaha, dhul seereyaasha qaranka iyo ahmiyada ay u leeyiliin Itoobiya iyo Bariga Afrika.

## 3.1 BAADKA(DHIRTA) DABIICIGA AH IYO XAYAWAANKA DUUR – JOOGTA BARIGA AFRIKA

***Marka uu casharkani dhamaado kadib, ardaydu waxay awoodi doonaan inay:***

- Aqoonsadaan Noocyada ugu waawayn baadka dabiiciga ah iyo xayawaanka duurjoogta ah ee Bariga Afrika,
- Xidhiidhiyaan jiritaanka xayawaanka duurjoogta ah ee ku baahsan baadka dabiiciga ah ee bariga Afrika,
- Sharaxaan siday xayawaanka duur-joogta ahi ula qabsan lahaayeen laguna hormarin lahaa deegaamo ku haboon.

Baadka dabiicig ah iyo xayawaanka duurjoogta ahi waa qaybaha deegaankeena laga helo. Sidaa awgeed Cashar-hoosaadkan ayaa loogu talagalay si aynu u falanqayno, noocyada iyo baahsanaanata baadka dabiiciga iyo xayawaanka duur – joogta ah ee Bariga Afrika. Intaas waxaa u dheer kala duwanaanshaha hawlaha la qabsiga taas oo xayawaanka duurjoogta ah loogu adeegsanayo sidii ay ula qabsan lahaayeen laftigoodu xaaladaha deegaan ee aynu falanqayn doono.



## Hawl-galka 3.1

### Su aallo la-isla falanqaynayo

Su'aalahan soo socda u falanqeeya kooxo yaryar:

1 Ma taqaaniin noocyada ugu muhiimsan baadka dabiiciga ah iyo xayawaanka duur – joogta ah ee laga helo Bariga Afrika? Isku daya inaad magacawdaan qaar ka mid ah?

2 Ma tixi kartiin qaar Kamid ah muuqaalada ugu muhiimsan ee kaymaha, dhul cawseedyada iyo baadka lamadegaan xigeenka ee laga helo Bariga Afrika?

3 Noocyadee baa ugu caansan baadka laga helo deegaankiina?

4 Sidee bay ula qabsanayaan xayawaanka duur – joogta ahi sabada ay ku nool yihiin? Tax habab laqabsi oo aad kartid?

## 3.1.1 Noocyada iyo Baahsanaanta Baadka Dabiiciga ah iyo xayawaanka Duur joogta ah

Sida aad wada ogsoontihiin deegaamada Bariga Afrika waxay leeyihiin muuqaalo duleed oo kala duwan. Waxay leeyihiin muuqaalo xaga kala saraynta jooga ah oo kala duwan oo u dhaxeeya laga bilaabo ilaa xad dhulalka buuralayda ah ilaa dhulalka joogoodu hooseeyo. Kala duwanaanshaha jooga kala saraynta, sidoo kale waa natiijooyinka ka dhasha kala duwanaanshaha xaga cimilada.

Inkastooy sidaas tahay, waxaan haysanaa noocyo kala duwan oo baadka dabiiciga ah iyo xayawaanka duurjoogta ah kuwaas oo laftigoodu laqabsanaya xaaladaha deegaameed ee kala duwan.



## Hawl-galka 3.2

Adiga oo la kaashanaya fasalkaaga, isku day sida ugu saxsan ee aad ugu kuur – geli kartid deegaankiina kana jawaabaya su'aalahan:

1 Waa sidee cimilada deegaankiinu? Dhinaca heerkulka:- (makulayl baa? ma diiran tahay? ma qabow baa? Dhinaca roobka:- Ma qoyaan baa mise qalalan?)

2 Waa noocee baadka dabiiciga ah ee deegaankiina ka baxa? Ma ka jiraan kaymo dhul cawseedyo, lamadagaan iyo lamadagaan – xigeen baadkoodu? Xayawaanka duur joogtana?

3 Waa maxay sababta ay kula tahay in noocyada baadka dabiciga ah iyo xayawaanka duur-joogta ahi ugu kala duwan yihiin meel ilaa meel?

Inkastoo aad isku daydeen inaad faahfaahisaan jawaabihiina su'aalahan sare, noocyada baadka dabiiciga ah iyo xayawaanka duur joogta ah ee laga helo deegaanka hubaashii waa kuwo si toos ah uga horimaanaya xaaladaha muuqaaleed ee deegaanka.

Sidii aynu mar horeba soo sheegnay joogga kalasaraynta Bariga Afrika waa ka ugu wacan ee abuuraya inay ka jiraan xaalado cimilo oo kala duwan. Hadana, waxaan haysanaa noocyo kala duwan oo ka mid ah baadka iyo duur joogta laga helo Bariga Afrika.

## Noocyada iyo Baadka Dabiiciga ah

Bariga Afrika. Waxaa saamayn ku leh. Joogga kala saraynta. Waana ta keentay markii loo dhabo galo kala duwanaanshaha qumaatiga ah ee noocyada kala duwan ee baadka goobahaas ku shareeran. Meelaha jooga hoose ilaa xad ee gobolka waa kuwo ay caadi ahaan ku shareeran yihiin baadka nooca iska caabiya ama u adkaysta abaaraha ee lamadagaanka iyo lamadegaan xigeenka. Markii aynu ka sii fogaanno meelaha joogga sare waxaynu u kuurgelaynaa si tartiibtartiib ah dhul cawseedyo raacsan kaymaha noocyada kala duwan ee dhulka joogga sare leh, (Baadka laga helo dhulka jooga sare leh sida: Albaynka iyo Albayn xigeenka). Baadka noocyadiisa ugu muhiimsan ee laga helo wadamada Bariga Afrika waxaa ka mid ah:

### I *Baadka lama-degaanka iyo lama degaan – xigeenka*

Lama – degaanku waa meel ilaa xad roobka uu helaa aad u hooseeyo. Lama-degaanada kulaalayaasha waxaa lagu yaqaanaa ilaa xad roob yaraan iyo heer-kul aad u sareeya. Xaaladaha noocan ahi ee heerkul iyo roob da'a waa kuwa dhaliya horumarka ama bixitaanka baadka lama-degaanka iyo lama degaan xigeenka. Bariga Afrika wuxuu ka mid yahay gobolada Afrika ee ay saameeyaan lamadegaanadu. Deegaanka joogga hoose leh waa mid leh cimilada lama-degaanka iyo lama-deegaan xigeenka, meelahaan waxaa laga helaa dhir nooca la qabsada ama adkaysiga u lehi, xaaladaha cimilo ee kulul islamarkaana qalalan.

Tusaale ahaan dhulka jooga hoose leh ee Itoobiya ee leh nooca cimilada lamadegaanka baadka laga helo ee lamadagaanka iyo lama dagaan xigeenka ee u adkaysta abaaraha. Waddamada kale ee leh cimilada noocan ah waxaa kamid ah: Soomaaliya iyo waqooyiga kiinya oo sidoo kale laga helo nooca baadkan oo kale.



## Hawl-galka 3.3

1 Idinka oo koox – koox isu qaybinaya, oo kooxdiiba Afar Arday tahay, isku daya inaad tilmaantaan noocyada ugu muhiimsan ee dhirta ka baxda Gobolada lama – degaanka iyo lama degaan – xigeenka?

2 Sidee bay dhirtani ula qabsatay xaaladaha cimiladan?

Noocyada baadka ugu muhiimsan ee meelaha lama – degaanada iyo lama degaan xigeenadu waa kuwo iska caabiya (u adkaysta) abaaraha waxay u koraan si ka fiican cimilada xaalada halista leh. Sida caadiga ah noocyada baadka ee meelahaas ka baxana waxaa ka mid ah: Tiinka, dhirta qodoxda leh iyo Dhirta isku cufan.

Dhirta noocan ahi waxay leeyihiin dabeecado isku eg oo awood u siinaysa inay u adkaysato xaaladaha cimilo ee goobahan. Hababka ula qabsi ama adkaysi ee ay caanka ku yihiin Dhirtani waxaa kamid ah:

- *Caleemo caag lamoodo oo dib isaga celiya falaaraha cadceeda si ay uga yareeyaan oogadooda heerkulka ugana neefsadaan;*
- *Caleemo qodax leh si ay isaga difaacaan xayawaan ka nooca ugaadha loo yaqaano iyo si ayna biyuhu uga lumin ayay caleemaha biyaha ka baro bixiyaan ama ka raraan ama iska daadiyaan;*
- *Caleemo aad uyaryar si ay u yareeyaan biyihii kaga lumi lahaa hab neefsiga;*
- *Caleemo faaxsan oo qaro leh si ay ugu keydiyaan biyaha una isticmaalaan xilliyada qalalan;*
- *Xididadoodu waxay gaadhi karaan dhulka hoostiisa si ay biyaha hoose ula soo baxaan*
- *Midhahooda ayay kasoo reebaan inta lagu jiro qalaylkana way soo duubantaa. Waxayna dib usoo noolaadaan markii ay roob helaan.*



Jaantuska 3.1: Tiinka, Geed abaareed



## Hawl-galka 3.4

1 Deegaankiina ma laga helaa dhirta u adkaysata abaaraha?

2 Falanqeeya sida ay dhirtani ula qabsato xaaladaha cimilada lama degaanka iyo lama dagaan xigeenka?

In kastoo gobolada lama degaanku ay yihin kuwo baadkoodu aad u liito, hadana waxay hoy u yihiin noocyo ka mid ah xayawaanka duur joogta ah. Noocyo badan oo kamid ah xayawaanadan waxay ku nool yihiin lama-deegaanka. Waxaana kamid ah: shimbiraha, kabojaanka, masaska, maso lugalayda iyo qaar kamid ah noocyada Naasalayda ah.

## II *Dhul-Cawseedyada*

Dhul cawseed waa meel uu caan ku yahay oo laga helo noocyada kala duwan ee cawska. Dhul – cawseedyadu waa meelaha uu sida fiican uga baxo islamarkaana hela roobabka fiican marka la barbar dhigo meelaha lama degaanka ah laakiin dhirtu halkaas kama baxdo.

Bariga Afrika meelaha uu cawsku ka baxo waa meelaha u xiga lama degaanka iyo lama-degaan – xigeenka waxaynu tusaalaha ugu fiican usoo qaadan karnaa dadka meelahaas la qabsaday sida: Masayda oo ah dad xoolo dhaqato ah oo laga helo kulaalaha dhul – cawseedka Kiinya. Dhul cawseedku wuxuu aad u caawiyaa

dadyawga xoolo dhaqatada ah. Waxay gebi ahaanba ku tiirsan yihiin xoolahooda daaqa dhul – caw seedka.

Inta badan gobolada dhul – cawseedka, Bariga Afrika asalkoodu waa kulaalaysaasha. Si kasta ha noqotee Heerkulka dhul – cawseedka waxaa horumariya oo lagu xidhiidhiyaa Joogga dhulka ka sareeya ee leh nooca cimilada kul-dhexaadka ah. Xataa hadii aynu niraahno dhulcawseedyadu waxay caan ku yihiin cawska waxaa sidoo kale laga helayaa dhir teel – teel ah oo keli – keli u taagan. Meelo badan oo Bariga Afrika oo caan ku ah baa jira oo laga helo dhul – cawseed dhir-teel – teel ah leh. Dhul – Cawseedka waxaa laga helaa oo sabo cawseedkaa laqabsadaynoocyo badan oo kamid ah xayawaanka duur – joogta ah. ee kala duwan.

Xayawaanada caanka ah ee gobolka waxaa kamid ah: dhamaan noocyada ugaadha, dugaaga iyo kuwo leh dabeecadaha ugaaadha (caws ku nool) iyo dugaaga (Hilib ku nool) oo dhamaantood ah xayawaanka laqabsaday dhul – cawseedkan. Baadka dhul – cawseedku uu qaniga (Hodanka) ku yahay waxay gobolkan ka dhigtay gobolka qaarada oo dhan ugu hodansan khayraadka dabiiciga ah ee xayawaanka Duurjoogta ah.

Waa gobolka laga helo noocyada ugu badan ee Duur-joogta. Xayawaankan waxaa kamid ah: Geriga, shabeelka Jeerta, Libaaxa, maroodiga, Goodirka, iyo wiyisha, waraabaha iyo noocyada kala duwan ee Daanyeerka oo caan ah. shimbiraha sida gorgorka, Guumaysta iyo shimbiro kale oo qoor dhaadheer oo halkaas laga helo.



b) *Dhul-Cawseed, Ruwenzori Taxan, Uganda*




t) *Xayawaanka dhul – Cawseedka, Kenya*

**Jaantuska 3.2: Dhul-cawseedka**



b) *Maroodiga agagaarka Buurta kilimanjaaro*



t) *Haramacad*



j) *Libaaxyo*



x) *Waraabe*




Kh) *Gumburi, mid kamid ah xayawaanka gaarka u ah Gobalka Bariga Afrika*




d) *Deero*



r) *Niyaala Buureed*



s) *Biciid*



Sh) *Haramacad cunaya Dameerfarow*

**Jaantuska 3.3: Qaar Ka mid ah xayawaanka Duur-joogta ah**



## Hawl-galka 3.5

1 Agagaarka halka aad degen tihiin ma laga helaa dhul – cawseed? Maxaase ku aragtay?

2 Ma magacaabi kartaa qaar kamida xayawaanada duur joogta ah ee laga helo dhul – cawseedka? Mid kee baa ah midka gobolka mooyee aan meel kale lagu helin?

## III *Kaymaha*

Kaymuhu waa dhul ay geeddo qariyeen, meelaha ugu qoyan dhulka jooga sare ee Bariga Afrika waxaa ku shareeran noocyo kala duwan oo kaymo ah. Dhulka meelahaa ka diiran ee kulaalayaasha joogga sare, kaymuhu aad bay u baxaan.

Geedahani aad bay ugu eg yihiin kaymaha rooban ee kulaalayaasha. Weligoodba waa cagaar, caleemo bal-balaadhan. Sidoo kale, waxay leeyihiin kala duwanaansho jinsi oo sare, Heerkulka dhex dhexaadka ah oo dhulka ka sareeya kulaalayaasha jooga sare leeyahay, dhirta ka baxda halkaas aad bay u baxdaa. Kaymahani waxay aad ugu eg yihiin keymaha gobolka kul-dhexaadka dunida.

Buuralayda sare ee Yugaandha waa tusaalaha ugu fiican ee la qaadan karo ee kaymaha kulaalayaasha iyo kul – dhexaadka labadaba. Dalkeenan Itoobiya sidoo kale, markii dhulka jooga sare ee diiran ay kaymaha ku shareran yihiin ayay meelaha ka qabowna ku shareeran yihiin kaymaha kul dhexaadka ahi.

Tidh(Gaaltir) waa geedaha caanka ah oo ah nooc (Jinsi) kaymaha kuldhexaadka Itoobiya laga helo.

Muuqaalada ay leedahay buurta kiiniya waxaa kamid ah; cimiladeeda oo ah mida laga helo gobolada dhul-cawseedka dhirta sida aadka ah uga baxday ee buurta salkeeda ilaa figta sare, waxaana laga helaa kaymo cufan oo rooban isla markaana ku daboolan joog dhan 3200 mitir.

Kaymahan rooban ee sare, waa nooca baadka ee Albayn oo ku daboolan Buur fiiqeedu dhan yahay 4600 m, meesha ay ka yaraanayaan geed nagarka yar yare ee quuta marka barafku ku dhidido dhagaxa.

Dhinaca xayawaankana waxa laga helaa laga bilaabo raxanraxan gorgor ah oo ku soo urura oo la qabsaday buuraha dhaadheer ilaa maroodiyaal, wiyil, noocyo daanyeero ah oo kala duwan. Kaymaha cufan ee rooban waxaa xayawaanada kala jaad jaadka ah u keenay degenaasho, baadka kala duwan i.w.m. Gobolada kaymaha leh ee Bariga Afrika waxaa jira xayawaano laqabsaday oo Jinsiyo kala duwan leh. waxaa kamid ah – Daanyeero kala duwan sida: Goriila oo ah daanyeer aad u xoog badan iyo noocyo kala duwan oo shimbiro ah. waxaana dhamaan soo jiitay kaymaha quruxda badan ee la qabsiga leh.



b) ***Daanyeerka Qalamiga***



t) ***Daanyeerka Babuun***

**Jaantuska 3.4: Noocyada Daanyeerka**

Meelaha ay kaymahan ku daboolan yihiin ee dhulka joogga sare wuxuu leeyahay cimilo aad u qabow. Meelahan waxaa laga helaa Baadka noocyo kamid ah sida Albaynka iyo albayn xigeenka dhirtani waxay adkaysi u leeyiiin qabowga daran way gaagaaban yihiin oo waxay kaga gabadaan ilaa xad heerkulka qabow iyo dabaylaha xoogan.



**Jaantuska 3.5: Baadka Albaynka ee Buuraha Baali**



## Hawl-galka 3.6

Deegaankiina ma ka jiraan wax kaymo ah oo la yaqaan? Hadii aad "Haa" tiri Fadlan isku day inaad samaysay booqasho aad ku tagtay kayn jiq ah, markaa tilmaan naga sii kuwan soo socda:

a Abuurka Rabaaniga ah ee kaynta

b Jaadadka (Jinsiyada) Caanka ah.

c Noocyada guud ee xayawaanka duur joogta ah.

## Xayawaanka iyo la qabsigooda sabada ay ku nool yihiin

Muuqaalada kalasaraynta, cimilada iyo Baadka kala duwan ee Bariga Afrika waa mida. Sababta u ah in duurjoog badan ku soo ururto, hoyna ka dhigato. Xayawaanku waxay leeyihiin gobolo kala duwan oo ay siyaabo badan u la qabsadeen. La qabsigooduna waa mid dabeecad ahaaneed iyo mid muuqaal dul ahaaneed labadaba.



### Hawl-galka 3.7

Intaad koox-kooxo yar yar isu qaybisaan ka jawaaba su'aalahan.

Sideebay xayawaanada laftigoodu ula qabsadaan deegaamadan soo socda?

a Lama dagaanada
b Dhul-cawseedyada
c Kaymaha
d Buuralayda

Aad bay u badan yihiin siyaabaha xayaawaanka duur joogta ahi u la qabsadaan deegaankooda qaar kamid ah waa kuwan soo socda:

### I *Qaar kamid ah xayawaanada gobolada lama – degaanada*

- *Waxay leeyihiin midab cad, Kaasoo celiya falaadhaha cadceeda.*
- *Qaarkood caraday isku aasaan sida: xamaaratada (maska, qorotada dib – qalooca 1wm).*
- *Qaarkooda waxay yareeyaan habka isnaaxinta*
- *Waxay qaar kalena yareeyaan biyaha kaga lumaya si kale*
- *Qaarkood sida: Dacawada iyo Bakaylayaashu waxay leeyihiin dhago waawayn oo ay hadhsadaan.*
- *Qaarkood cunada iyo biyaha calooshay ku kaydiyaan si ay u isticmaalaan xiliyo kale oo cuno iyo biyo yaraadaan.*
- *Qaarkoodna qolof adag ayaa dahaadh u ah sida diinka.*

### II *Xayawaanada Dhulka kaymaha leh.*

- *Qaarkood baaxada jidhkooday fudaydiyaan si ay u boodi karaan*
- *Qaarkood waxay leeyihiin adimo dhaadheer oo waxay iska soo laalaadiyaan geedaha.*

### III *Xayawaanka meelaha qabow*

- *Maqaarkoodu wuxuu leeyahay dhogor badan*
- *Waxay leeyihiin baruur aad u wayn*
- *Hurdo dheer bay galaan inta uu qabowgu jiro.*

## 3.1.2 Arrimaha saamaynta ku leh baahsanaanta Baadka (Dhirta) iyo xayawaanka Duurjoogta

Baadka dabiiciga ah iyo xayawaanka duur joogta ah meelaha laga helo isku wada mid ma aha. Waxayna ku tusaysaa, kala duwanaanshaha deegaan ilaa deegaan, waxaana jira arimo badan oo dhaliya kala duwanaanshaha nooca iyo baahsanaanta xayawaanka Duurjoogta ah.

Cashar – hoosaadyadan ayaynu ku falanqayn doonaa, Arrimaha saamaynta ku leh baahsanaanta xayawaanka duurjoogta ah iyo baadka dabiciga ah ee dalalka Bariga Afrika.



### Hawl-galka 3.8

Su'aalahan isla falanqeeya, idinka oo kooxo yar yar isu qaybinaya:

1. Ma u malaynaysaan inay isku mid yihiin xayawaanka duur juugta ah noocyadoodu meelaha kala duwan ee ay ku nool yihim? Waayo?
2. Waa maxay arimaha saamaynta ku leh nooca iyo baahsanaanta xayawaanka duur joogta ah ee laga helo meelo cayiman.
3. Kuweebaa ah arimaha dhaliya asal ahaan ba Dabiici iyo dad samee?

Nooca xayawaanka duur – joogta ah ee caanka ku ah deegaamada qaarkood waxaa jira arimo badan oo ka masuul ah ama ka dambeeya. Habka xayawaanka duur joogta ahi u kala baahsan tahay ama u kala firidhsan tahay sidoo kale, waxaa jira xaalado badan oo saamayn ku leh oo ay hoos tagaan. Markaas natiijadu, waxay noqonaysaa, waxaa laga yaabaa inaan haysano jaadad kala duwan oo dhir iyo xayawaanba leh oo laga helo meelo xaaladahooda deegaan iyo muuqaal duleed kala duwan yahay.

Kala duwanaanshuhu waa natiijada arrimaha ama xaaladaha badan ee alkuma, taasoo si wada jir ah u go'aamiya sida ama habka ay xayawaanka duur joogta ahi ku baaheen. Arrimahaan ama wacaalahan waxay si wayn ugu kala saari karaan labadan qodob ee kala ah: Arrimo Dabiici iyo Arrimo Aadami

## *Arrimaha Dabiiciga ah*

Arrimahani waa kuwa ay keenaan (dhaliyaan) xaaladaha duleed ee deegaanka waxaana loogu yeedhaa dabiici maxaa yeelay dad-samee ma aha. Waxayna la xidhiidhaan xaaladaha dabiici ee deegaanka laftiisa.

Waxaana ka mid ah:

- ***Cimilada:*** *xaaladaha heerkulka iyo roobda' meel go'aaminteeda nooca iyo baahsanaanta baadka iyo xayawaanka. Tusaale:- lama degaanada waxay ka caawiyaan koritaanka dhir abaareedka, halka meelaha qoyaanka ugu badan ay u wanaagsan tahay horumarinta kaymaha. halkan waxaa sidoo kale ka jira kala duwanaashaha nooca xayawaanka duur – joogta ah ee ku dhaqan gobolada cimlada kala duwan*
- ***Saraynta Joogga:*** *Bariga Afrika  waa gobol buuralay ah. Waana ta keentay inay xayawaanadiisa duur joogta ahi si qumaati ah u baahaan. Markii aynu lug ku marno buuraha sare dushooda waxaynu u kuur – gelaynaa xayawaanka duur-jaagta ah ee sida tartiiib – tartiiba ah is xig – xiga ee kala duwan laga bilaabo meelaha joogga hoose ee ka qalalan ilaa iyo dusha sare ee buuraha waxaa dhir – abaareedyada inoo soo  raacaya dhul-cawseedyo, kaymo iyo baadka albaynka. Nooca xayawaanka duur – joogta ah ee kala duwan sidoo kale wuu is bedbedalaa sida baadka.*
- ***Carrada:*** *carradu waa kheyraadka ugu muhiimsan ee dhinaca koriinka dhirta. Kala duwanaanshaha nooca carrada waxaa saamayn ku yeesha nooca baadka halkaas ka baxaya. Waana ta keentay carrooyinka kala duwani ay yeelato dabeecado kala duwan oo ay u caawiso noocyada baadka.*
- ***Baahida Biyo iyo cunno:*** *kala baahsanaanta xayawaanka duur joogta ah waxaa ugu horaynba xakameeya baahida khayradka kaa soo ah mid lagama maarmaan u ah noloshooda oo Biyaha iyo cunnada. Waana ta keentay meelaha ay khayraadyadani aad hodanka ugu yihiin inay xayawaanka tiradoodu aad u cufnaan sareeyaan.*

## II Arrimaha Aadami – sameega ah

Waa arrimaha ay keenaan farogelinta uu Aadamigu ku samaynaiyo deegaanka dabiiciga ah.

Sida aad ogsoon tihiin waxaynu u adeegsanaa khayraadka dhulka si aynu u daboolno baahideena. In badan oo inaga mid ahi dareenba ma siiyaan hawlaha daryeelka khayraadka. Tani waxay keentay waxyeelayn deegaanka dabiiciga ah. Arimaha dad-sameega ah ee saamaynta ku leh baahsanaanta baadka dabiiciga ah iyo xayawaanka duur – joogtaa ah waxaa ka mid ah:

- ***Dhir-xaalufka:*** *Waa ka ugu baaxada wayn ee uu aadamigu ku baabiiyo dhirta ama kaymaha. Waana mid ka mid ah isticmaal xumida khayraadka dabiiciga ah. Dadka dhirta goynaya danta ay ka leeyihiin waa keliya inay: dhul beereed ka dhigtaan, shidaal ahaan u isticmaalaan, qalabka dhismaha ama qormo ay degaan. Markii dhirta laga sifeeyo dhulka ama deegaankeena Masiibooyin ayaa iman doona oo dabadeed ay ka dhashaan, isbedelka cimilo oo dhici doona.Tusaale: kululaansho (Global warming) Heerkulka Gibilka dhulka oo aad u kordha, waa mid ka mid ah natiijooyinka ka dhasha dhir-xaalufka. Kaasoo sababa isbedelo khatar ah oo ku yimaada noolaha kala duwan, una hogaamiya ama u horseeda in ay dabar go aan noocyo ka tirsan dhirta iyo xayawaankaba.*
- ***Daaqsinta Xad-dhaafka ah:-*** *waa xaalada meesha dhul – daaqsimeed ka ah oo loo daaqo si ka baxsan awoodii uu qaadi karayay ee xayawaanka ama xoolaha. Daaqida xad-dhaafka ahi waxaa kale oo ay deegaanka ku keentaa dhibaatooyin ay ka mid tahay Caro-guurku sidoo kale waxaa saamayn ku yeesha xayawaanka duur – joogta ah oo kala kulma cunto yaraan. Waana ta keentay inay isaga qaxaan ama dhintaan. Nooleyaasha kala duwan ee goboladan sida aad ka ah loo daaqay waxay sidoo kale noqon doonaan kuwo yaraada ugu dambayntiina noqda kuwo dabar go'a, oo la waayo cidhibtooda.*

## Sheeko-gaaban

Abaaraha waxaa keena roobka oo yaraada. Abaartu waa midka mid ah natiijooyinka ka dhasha isbedelka cimilada oo ay sababeen dhibaatooyinka uu aadmigu u gaystay deegaanka. Dalal badan oo kamid ah dalalka bariga Afrika oo waxaa jira ay abaaruhu saameeyeen waana ta dhalisay markii ay roobabkii laysku halaynayay dadkii badnaa ee beeralayda ahaa ee gobolku inay si caadi ah

uga qaxaan uyaga oo baadi goobaya meelo kale oo ay wax kala soo bixi karaan. Arimaha kale ee ugu waawayn ee dhacay waxaa ka mid ah iyaga oo baadi goobkii uu ula galay oo ay ku sigteenba in ay gudaha u galaan seerayaashii iyo beerihii xayawaanka lagu daryeelayay. Oo ay halkaas daaqsin u keenaan xoolahoodii Tani waxay waxyeelo ku keenaysaa xaywaankii duurjoogta ahaa sabadii ay ku noolaan lahaayeen cunno yaraan iyo badbaadadooda waana ta keenaysa inay ka baro kacaan sabooyinkoodii una haajiraan meelo kale oo ay ku badbaadaan. Arintani waa mid haysata seerayaasha xayawaanka lagu dhaqo ee Bariga Afrika. Tusaale: Maroodigu wuxuu kunool yahay dhul – cawseedyada gobolka waxayna u qaxeen meelo kale sababtoo ah baadi goobka dadku ku raadinayaan meelo ay ka samaystaan beero oo ah  sabadooda. Itoobiya waxay saamaysay arintani seereyaashii qaranka ee lagu dhaqayay xayawaanka duur joogta ah. Tusaale: waxaad arkaysaa iyada  oo ay xoolihii u daaqsin imanayaan banaanada. Seeraha qaranka ee Awaash Taasi waxay sababtay inay saamayn ku yeelatao daryeelkii seerayaasha qaranka ee xayawaanka duur joogta ah lagu dhaqayay.

- ***Baadi goobka Aadmiga**: Markii dadka tiradiisu korodho si dhaqso ah, daaqii baa yaraanaya iyo dhul beereedkii meel kastana waa la degi waxaana taas keenaya baadigoobka ay dadku ku raadinayaan meelaha baadka leh taas oo ah sabooyinka kala duwan ee noocyada duurjoogta. Tani waxay dhalisay loolan dhexmara  Aadmiga iyo xayawaanka duur joogta ah oo dhinaca khayraadka dabiiciga ah. Waana sababaha keenaya inay xayawaanku ka qaxaan halkii ay ku noolaayeen:*

- ***Ugaadhsiga sharci darrada ah**: Ugaadhsigu waa  dilitaanka ama laynta xayawaanka ujeedooyin kala duwan. Markii si caqli ku jiro looga faaiidaysto waxay noqon lahaayeen ilo laga helo raashin, Agab cayriin iyo lacag sikastaba hanoqotee, hawlgallada ugu badan ee ugaadhisiga xaaraanta ahi waa mid ka dhaca Bariga Afrika oo dhan. Ugaadhsiga sharcidarrada ahi waa mid loo yaqaano ugaarsatada harag ku solid waxay duurjoogta u laayaan hilibkooda maqaarkooda, geesahooda, Foolasha (ilkaha) 1wm oo ay ujeedooyin kala duwan kaleeyihiin. Habkani ma aha hawl gal fiican. Ugaadhsadeyaashuna ma daneeyaan nooca xayawaan iyo mustaqbalkooda:*

Marka aynu isku soo wada duubno waxay naqonaysaa inay dabargooyaan xayawaanka duur joogta ah ee deegaanka ku tarmi lahaa. Hadii tani sii socotana waxay keenaysa isbedelo khatar ah. Maantana waxaa jira xayawaano badan oo qaarkood dabar go’een qaarkoodna qarka saaran yihiin.

## Sheeko-gaaban

### Ugaadhsiga

Waddamo badan oo bariga Afrika ah ugaadhsigu wuxuu noqday mid caadi ah. Dadka ugaadhsadayaasha ahina waxay sababo ka dhigteen dhinacyada Bulsho, Dhaqaale iyo dhaqan ahaaneed. Wadamada qaarkood waxaa jira kooxo dhaqan ka dhigtay oo aaminsan ugaadhsadaha fiican inuu yahay Nin reer dhaqi kara oo fiican. Waana ta keentay in wiilka dhalinyarada ahi uu soo dilo xayawaan sida:- Libaaxa, maroodiga, shabeelka 1wm kadiban la dhaho waa geesi oo gabadh uu guursadana la siiyo. Tusaalaha ugu fiicanna waa dadka dega galbeedka dalka Itoobiya wadamo kale oo iyagana sidan looga dhaqmaa jira. Tusaale: wiyisha oo geeskeeda loo dilo shabeelka oo haragiisa loo dilo iyo maroodiga oo isna foolkiisa dartii loo dilo. Kuwaas dhamaantood waxay keentay inay tiradii xayawaanku si tartiib ah u soo dabar go'aan qaar kalena loo ugaadhsado hilibkooda qiimaha leh. Daanyeerka loo yaqaano Goriila ee dalalka Ruwaandha iyo Yugaandha inuu dabar go'o ayaa laga baqayaa maxaa yeelay, sabadii uu ku noolaan lahaa baa la baabiiyay isaga qudhiisana inta uu yar yahay waa la iib geeyaa. Waana khatarta ugu badan maanta ee Afrika si kasta hanoqotee, waa arin aad khatar u ah in xayawaankii meelahaas ku noolaa ee ahaa nooca aan meel kale laga heli Karin ay maanta ku sugan yihiin in aan dib dambe loo arag. dalka Itoobiya xataa ugaadhsiga noocaas ahi wuu saameeyay xayawaankii u gaarka ahaa ee aan meel kale laga heli Karin.

- ***Dagaamada Fidaya**: koritaanka xawliga ah ee tirada dadka gobolka Bariga Afrika ee darajadiisu aadka u sarayso waa mid looga dayrinayo xayawaanka duurjoogta ah. Dagaamada siifidaya waxay keeneen inay gaadhaan baadkii dabiiciga ahaa iyo xayawaanadii ku noolaaba. Waxaa tana looga baqayaa inay dabar go'aan dhir iyo xayawaanba.*

Arrimahaas aynu kor ku soo sheegnay waa kuwa cidhib jaraya xayawaankii gobolka Bariga Afrika. 1minka waxaa loo yaqaanaa xayawaanka khatarta ku jira. Waxaana kamid ah:

- *Gumburiga laga helo: dalalka Itoobiya, Soomaaliya iyo Suudaan Oo qarka saaran*
- *Harama cadkii oo sabadiisii la baabiiyay*
- *Goriile oo isna deegaankiisii la baabiiyay*
- *Wiyishii madoobayd oo iyana Geeskeedii dartii loo dilayo*

- *Waaliya iyo Niyaala buureedkii Kamid ahaa xayawaanka naaslayda ee gaarka u ah dalka Itoobiya ayaa la ugaadhsaday*
- *Dacawadii casayd ee iyaduna kamid ahayd kuwa aan meel kale laga helin ayay dadkii ugaadhsadeen si looga dhigto dad-la joog intay ku talaaleen aygii lajoogay si ay isaga dhalaan nooc u dhaxeeya sidii: Gumburigii kii dadka la joogay inta lagu talaalay nooc karti leh iska dhaleen.*

## 3.2 SAAMAYNTA UU AADAMIGU KU LEEYAHAY DEEGAANKA

***markii casharkni dhamaado Ardaydo waa inay awood u yeeshaan:***

- Aqoon u yeeshaan xaaladaha ku qasba Aadamigu inuu saamayn ku yeesho Deegaanka
- Falanqeeyaan saamaynta Aadamiga ee dhinaca deegaanka.

Ilaa xad ayaynu soo falanqaynay waxaana inooga baxay fikrado badan cashar yarahanna waxaynu isla falanqayn doonaa, saamaynta uu Aadmigu ku leeyahay deegaanka dabiiciga ah iyo cawaaqibka ka dhasha.



### Hawl-galka 3.9

Su'aalahan falanqeeya idinkoo la kaashanaya fasalkiina oo koox – koox isu qaybinaya

1 Waa maxay sababta ay dadku u saamaynta ugu leeyihiin deegaanka?
2 Sidee bay dadku saamayn ugu leeyahay deegaanka?
3 Maxaa kamid ah saamaynada dadka ee deegaanka

Waxaynu ku qanacsannahay baahida bini aadamku u qabo khayraadka dhulka. Waana ta keentay inaynu si xoogan ugu xidhnaano Deegaanka si kasta hanoqotee, waa is dhexgalka ta saamaynta ku keentay deegaanka

## Sababaha



### Hawl-galka 3.10

Idinka oo koox-koox ah falan qeeya su aalahan:

waa maxay sababta ay dadku saamayn ugu leeyihiin deegaanka? Waxaad magacowdaan sababo badan intaad kartaa?

Sababahin aad bay u badan yihin kuwa ugu badan waa kuwa la xidhiidha koriinka xawliga ah ee tirada dadka ee cadaadiska ku haya khayraadyada waana kuwa keenay in deegaamka ay waxyeelo soo gaadho faragelinta deegaanka ee dadka waxaa kamid ah:

a ***Baahida dhul-beereed iyo Daaqsin:*** Markii tirada dadku korodhaba si degdeg ah, waxaa badanaysa baahida ay dadku u qabaan dhul-beereed iyo dhul-daaqsimeed si isku saami ah. Kadib halkaa waxaa ka innanaysa in dhulkii ku yaraado dabadeedna Deegaankii lagu fido oo dhibaatana loo gaysto.

b ***Baahida Qalab Dhismo:*** waa uun si lamid ah oo markii tirada dadku korodhaba waxaa sii badanaysa baahida guryaha wadamo badan oo Bariga Afrika ah waxaa aad u sii kordhaya dalabka guryaha kororka dhaqsaha ah ee dadka awgii sida aynu la wada soconana inta badan gobolkan gurguyaha laga samaystaa Dhoobo iyo Geed. Sidaa darteed waxay dadku faraglinayaan Deegaankii dhibaatana ay uga imaanayso.

c ***Qixitaanka Dadka:*** Qixitaanku waa dadka dhaqdhqaaqiisa meel ilaa meel waxan uu ku xidhaan yahay isbedelka degenaanshihii joogtada ahaa ku yimid ee ay sababeen arimo Bulsho, Dhaqaale, Dhaqan iyo mid siyaasadeedba. Bariga Afrika Deganaansho la'aanta siyaasadeed iyo isbedelka cimiladu waa kuwa ugu waa wayn ee keena qaxootiga iyaga oo raadsanaya meelo ay ku badbaadaan si la mid ah ayay isbedelka cimilada xageeduna ay dadkii xoog kaga saaraysaa guryahoodi. Tusaale: Abaaro badan oo ka dhacay gobolkan ayaa dad badan guryahoodii ka barbakicisay una dalandooleen meelo cusub oo ay ku nabad gelayaan beerana ka falan karayaan. Tanina deegaanka cusub ayay waxyeelaysaa.

## Saamaynada

***Idinkoo koox koox ah isla falanqeeya saamaynta aadamigu ku leeyahay deegaanka***

Sida aynu sare ku soo aragnay saamaynta aadamaha ee deegaanka sababo badan oo kala duwan oo badankoodu la xiriira baahida dadka iyo sidii ay u dabooli lahaayeen. Hadaba raadadka ay kaga tageen deegaanka waxaa kamid ah:

i ***Dhir – xaalufka:*** mar horeba waynu soo qeexnay, xakamayn la aanta dhirta lagu hayo dadku dhirta waxay u jarayaan si ay u helaan:

- *Dhul ku haboon beero, daaq iyo degmo*
- *Qalabka dhismaha guryaha 1wm*
- *Midhaha qayriin ee warshadaha*

ii **Daaqsin xad-dhaaf ah:** Inta badan dalalka Bariga Afrika dhibaaatadu meelaha ay ka haysato waxaa kamid ah daaqsinta xad dhaafka ah oo deegaankii aad u waxyeelaynaysa.

iii **Carro – guurka:** waa ka qaadista carada dusha sare ee dhulka ee macdanta iyo nafaqada lahayd waxaana ka dhasha waxsoosaarkii beeraha oo hoos u dhaca Bariga Afrikana aad bay u saamaysay Dhir xaaluf, Daaqsin-xad – dhaafa iyo carro guurkuba.

Meelo badan ayay carradii ka nabaad guurtay qiyaas lamid ahna caro cusub baa ka samaysmaya meelaha aanu aadmigu degenayn. Meelahaas aan weli taaban lakabyada baadku waxay difaacaan carada. Markii ay roobabka badani da'ayaan cawska ama caleemaha dhirta dushooda waxaa dul fuula dharab, iyo qoyaan intii aanay dhulka gaadhin. Geedaha iyo cawskuna waxay u adeegaan sidii derbi ama dayr dabaysha celiya iyo shabakadaha xididada ah oo caawinaya, qabanaya cartada kana difaacaya roobka iyo dabaylaha. Beeraha, Geedo jarista (xaabaysiga) iyo sidoo kale Dhismaha guryaha horumarka warshadaha iyo dhismayaasha wadooyinka waa wayn waa qayb ka mid ah burburinta baadkii cufnaa iyo xawliga carroguur ee noocyada carrada

iv **Biyo – yaraanta:** Baadka dabiiciga ah waxaa aad muhiim ugu ah adkaynta isku dheeli tirka Dabeecadda. Tusaale:- waa qayb ka mid ah meertada biyaha waxay caawisaa wareega u dhexeeya oogada dhulka iyo Gibika hawada markii uu biniaadamku dabar gooyay dhirta deegaamkuna wuxuu hoos u dhigaa dheelitiraantii waxaana ka dhasha biyo yaraan.

v **Abaaraha iyo Gaajada:** Halka ay abaartu ka tahay roob yari, gaajadu waa xaalad dad badan haysata oo ah cunno la'aan ama cunno yari, dad aad u badanina u dhintaan. Abaarta iyo gaajada badanaa waa natiijooyinka ka dhasha deegaanka oo xumaada. Dadku markay waxyeleeyaan deegaanka dabiciga ah waxay saamayn ku yeeshaan isu dheelitirnaantii dabiiciga ahayd waxaana ka dhasha isbedelka cimilada oo u hogaamiya Abaaro iyo gaajo dhacda.

vi **Qaxootiga (Haajirida):** Marka ay abaaruhu ku dhiftaan dadka gaajada iyo dhibaatooyinka kale ee deegaanka. Waxaa khasab ku noqota inay qaxaan dad badan ayaana ka haajira goobihii ay deganaayeen oo ay ugu wacan tahay dhibaatooyinkaasi aynu sare ku soo xusnay.

# 3.3 HABABKA DARYEELKA CARRADA IYO BIYAHA

***Markii uu dhamaado kadib cashirkani Ardaydu waxay awoodi doonaan inay:***

- Tilmaansadaan (aqoonsadaan) xeeladaha daryeelka carrada iyo biyaha.
- Sharaxaan ama faah-faahiyaan sida mid kasta oo ka mid ah daryeelka carada iyo biyuhu u shaqeeyo.
- Aqoon u yeeshaan seereyaasha qaramada Afrikada Bari.
- Ka heli karaan khariirada dusheeda halka ay dhacaan seerayaasha qaranka Itoobiya ee xayawaanka lagu dhaqo.

Biyaha iyo carraduba waxay ka mid yihiin khayraadyada ugu wada muhiimsan ee doorka wayn ka cayaara sidii ay dadku u sii jiri lahaayeen meeraha dushiisa. Si kasta ha noqotee aadmigu wuxuu ku xad-gudbay khayraadkii garasho ama garasho la'aamba waana ta keentay dhibaatooyinka halista ah ee khayraadkii haysta. Tani markaa waxay ka dhigaysaa in la qaato talaabooyin daryeel oo kala duwan casharkana waxaa loogu tala galay sidii khayraadyada kala duwan loo ilaalin lahaa.



## Hawl-galka 3.11

Isla falanqeeya suaalahan idinka oo koox – koox isu kala qaybinaya:

1 Sidaynu khayraadyada Biyaha iyo carradaba u daryeeli karnaa? Magacow qaar ka mid ah istiraatij iyada daryeel iyo mid waliba sida uu u shaqeeyo?

2 Majiraan talaabooyin ay ka qaateen daryeelka deegaankiina dadka aad la degan tihiin? Falanqeeya sida iyo sababta ay u daryeelayaan Biyaha iyo carrada?

3 Dhibaatooyinka biyo yaraantu ma ka jirtaa deegaankiina? Falanqeeya halka ay biyaha kahelaan?

Waxaa jira habab kala duwan oo biyaha iyo carrada lagu daryeeli karo. Waxaana ka mid ah kuwan soo socda:

1 ***Dhiraynta:*** kordhinta baadka dabiiciga ahi waxay caawisaa daryeelka biyaha iyo carrada taasoo dhirta caleemaheeda iyo xididadeeduba ay xajiyaan carradii nabaad guuri lahayd ee ay dhibcaha roobabku aafayn lahaayeen. Biyuhuna ay si tartiib ah carrada ugeli lahaayeen tani biyaha


dhulka hoostiisa ku jiraana waxay ka helayaan biyo – dheeraad ah. Habka dhiraynta waxaa loo samayn karaa qaababkan

i ***Dhiraynta – dhirkale:*** waa dhirta laga beero meelo aanay asal ahaantoodii ka bixi jirin looguna beero meelo cusub

ii ***Dib – u – dhirrayn:*** waa meelaha ay ka baro baxday ee la jaray ujeedooyin ay dadku ka lahaayeen isla markaana kuwo cusubdib loogu dhireeyo oo isla iyagoo kale.


iii ***isku dhafka:*** waa hab beeraha loogu garab dhireeyo. Waa hab dhaqan labo ujeedo leh dalag beeris iyo dhirayn wada jira ah. Midka hore si loo helo:- Alwaax, Hoy khudrad ama miro 1wm midka xigana daryeelis deegaanka ah sida: Biyaha iyo carrada

2 ***Naxarayn:*** waa hab carrada loo daryeelo oo lagaga dhaqmo dhulka buuralayda ah. Waxayna dadku ka qotaan beeraha buuraha Janjeedhkooda si ayna caradu uga nabaad guurin ayuu habkani difaacaa. Waxaa loo dhisaa hab meegaar ah oo sidii derbi loogu soo wareejinayo si loo yareeyo xawliga ay biyuhu kaga soo daadanayaan buuraha. dalka Itoobiya waxaa aad caan ugu ah dadyowga loo yaqaano “ konso” oo habkan ku dhaqma.



Jaantuska 3.6: Naxarayn

3 ***Qodaalka marsin*** – simanada: waa hab – qodaal dhulka buuralayda ah lagaga dhaqmo oo dhinacyada laalaadyada ay beeralaydu uga beertaan meelaha marsinada siman ee janjeedha tanina waxay yaraysay carro-guurkii habkani wuxuu dalagyada iyo dhirta u qabtaa carrada nafaqada leh.



Jaantuska 3.7: Qodaalka Marsinada Siman

4 ***Habka Dalag-gediska:*** Hadii aynu Hal shey meel ku beerano oo hadana isla shaygii uun aynu wakhti kasta isla halkii uun ku beerno waxaa yaraanaya tayadii carada si loo adkeeyo carrosantaas wax bixin og waa in aynu adeegsano habka dalag gediska ah oo sanadba ama xilliba dalag gaar ah qodano. Waxayna inaga caawinaysaa adkaynta carada – san iyo wax-soo saaristeedaba.

5 ***Adeegsiga Bac-riminta ka soo jeeda Noolaha iyo yaraynta Bacriminta xad-dhaafka ah ee kiimikaada:*** Habka bacriminta kiimikadu waa mid casri ah oo la geliyo beeraha wax ayna ka kooban tahay nafaqooyinka dhirta. Si kastaba ha ahaatee markii aad loo isticmaalo waxay keenaysaa wasakhow xaga deegaanka ah xataa waxay yaraynaysaa carradii waxsoo saaari lahayd. Sidaa awgeed waxaa ka fiican tan ka soo jeeda noolaha sida caleemaha dhirt ka daadata. Digada xoolaha 1wm. Oo aad uga fiican beeralayda.

6 ***Habka Biyo qobatinka:*** waa hab biyaha roobka ee iska qulqulaya loo qabto. Habka waxaa laga sameeyaa dhagxaan yaryar oo sidii derbi ama dayr dhulka taaga ah dhinacyadiisa loo hakiyo (Joojiyo). Ceelasha xataa laga qodo ee biyaha lagu ururiyo beeralayda aad buu u anfacayaa meelo badan ayaa dalka Itoobiya lagaga dhaqmaa:

7 ***Dhisitaanka Biyo xidheeno:*** waxaynu leenahay webiyo iyo togog aynu biyo xidheeno iyo kaydiyeyaal (Berkado) ka samaynay oo aynu ka helno dhinacyada Beeraha, Cabitaanka iyo dhalinta quwada korontada.

8 ***Qodista ceelasha:*** Biyaha waxaa laga helaa dhulka hoostiisa qotoda dheer. Biyahan waxaa looga faaiidaystaa beeraha iyo waxyaabo kale. Ceelasha marka la qodo kadib bambooyin biyaha ka soo tuura ayaa loo sameeyaa. Ceelashan waxaa caan ku ah dhulka jooga hoose ee Itoobiya.

9 ***Biyo Nadiifinta:*** inkastoo biyaha dunidu uu aad u wayn yahay, hadana xayawaan la wadaagistu aadamiga faaiido uma laha maxaa yeelay waa biyo aan kala degin oo aan nadiif ahayn maadaama ay biyaha la socdaan waxyaabo noole ama ma noole ihi kadib waxaa loo isticmaalay daawo isku dhisyada kaarboonka ah looga kaxeeyo urta iyo dhadhankaba, lana shaandheeyo iyo kaloriin lagu daro biyaha si ay uga disho noolayaasha yaryar ee ilima argtayda ah. Tani dadku waxay uga faaiidaysanayaan ujeedooyin kala duwan sida:-Beeraha iyo xoolahaba.

10 ***yaraynta wasakhowga:*** wasakhow ga deegaanku waa mid ka midah halista Isticmaalka Bacriminta kiimikaad ee lagu qubayo deegaanka isla markaana wasakhaynaysa. Wasakhowga Biyaha iyo carradu gobolka meelo kamid ah ayay caan yeeshay isbedelo hor leh. Habab looga hortegi karo oo lagu xakamayn karo ayaa jira hadii la adeegsado wasakhowga lagu dhimi Karo

11 ***xafidaada Ballayada iyo durdurada oo la nadiifiyo:*** Ballayada iyo durdurada waa ilo biyood faaiido badan u leh gobolka ilo – biyood kani nadiifin iyo xafidid mooyee way wasakhoobi karayaan meelaha miyiga digada xoolaha ayaa wasakhaysa oo saamayn karta tayadii biyaha. Hadaba si loo badbaadiyo biyaha waa in aad loo ilaaliyo meelahaas aynu soo sheegnay.

## 3.4 DHUL-SEEREYAASHA QARAN IYO AHMIYADA AY U LEEYIHIIN ITOOBIYA IYO BARIGA AFRIKA

***Marka uu casharkani dhamaado kadib Ardaydu waa inay:***

- Aqoon uyeeshaan seerayaasha qaranka ee itoobiya iyo Bariga Afrikaba.
- Sharaxaan ahmiyadooda seerayaasha qaranka.
- Tilmaamaan ama ka heli karaan khariirada dusheeda seereyaasha qaranka Itoobiya.
- Falanqeeyaan isbedelada iyo guulaha seerayaasa qaranka ee gobolka Bariga Afrika

Baadka dabiiciga ah iyo xayawaanka duurjoogta ahi waxay door muhiim ah ka cayaaraan buuxinta baahida faraha badan ee Aadmiga iyo adkaynta isku dheelitir naanta, sidaa awgeed waa in la daryeelaa hadii aynu u baahan nahay inaan ka helo wax soo saarka ugu wada fiican. Mid ka mid ah hababka ugu caansan ee loo ilaalin karo duur joogta waa samaynta seeraha qaramada casharkan waxaad ku baran doontaan seeraasha qaranka ee Itoobiya iyo Bariga Afrika waxaa idiin barbar soconaysa oo aadku baran doontaan ahmiyadooda ibedelada iyo Guulaha laga soo hooyo.

Seereyaasha qaranka iyo Ahmiyada ayu leeyihiin Dalka Ethiopia iyo Dalalka BAriga Afrika



## Hawl-galka 3.12

Idinka oo koox – koox ah isla falanqeeya suaalahan:

1 Waa maxay seere qaran? Maxay ahmiyada u yeesheen? Raacisababta
2 Miyaad ka taqaana wax seere qaran ah itoobiya? Maxaa loo aasaasay?
3 Wax seere qaran ah oo idiin dhow ma jiraa? Hadii ay jiraan maxaa loo aasaasay?

Seereyaasha qaranku waa meelo beri ama biyo ah oo ku taalla waddan kaasoo ay dawladu u diyaarisay inay ku difaacdo: Geyiga, Dhirta iyo noocyada kala duwan ee xayawaanka, Bilicda dhulka, xogta barasho-dhuleed (jiiyoolojiyeed) Taariikh ahaaneed iyo goobaha aataarta (hadhaagii dadkii hore).

Seereyaashsa qaranku waa kuwo muhiim ah sababo badan oo jira ujeedooyinkooda waxaa kamid ah: madadaalada dadwaynaha, waxay diyaar gareeyaan meelo laga helo oo ay dalxiisayaashu ku arki karaan xayawaanka duur joogta ah oo aad looga helo.

Guud ahaan goobahan la ilaashay waxaa ka mamnuuc ah: in la ugaadhasado, duunyo loo daaq-geeyo, dhir laga jaro, miino lagu aaso, iyo hawlaha kale ee khayraadka dabiiciga wax loogu qabsado. Tani waxay ilaalinaysaa oo ay daryeelaysaa duurjoogta iyo khayraadyada kale ee goobtaas.


Dalkeenan Ethiopia waxaa ka jira sagaal (9) seere qaran. Seereyaashani waxaa loo aasaasay ujeeddooyinka daryeelkooda xayawaanka duurjoogta ah, khayraadyada iyo deegaankaba. Waxaa ka mid:

- *seeraha Qaranka ee Awaash.*
- *Seeraha Qaranka ee Buuraha waqooyi (simeeyn).*
- *Seeraha Qoranka ee Nejsaar.*
- *Seeraha qaranka ee Buuraha Baali.*
- *Seeraha Qaranka ee Maago.*
- *Seeraha Qaranka ee Oomo*
- *Seeraha Qaranka ee Gambeela*
- *Seeraha Qaranka ee Yaan gaadhi Rassa.*
- *Seeraha Qaranka ee Abiyaata shaalla.*

Seerayaashani dalka Itoobiya waxay ugu fadhiyaan ujeedooyin badan mida ugu horaysa, xaga daryeelka Duur-joogta khayraadyada dalka. Inta ugu badan seereyaashan waxay hoy u yihiin xayawaanka dalka Itoobiya mooyee aan dal kale oo dunida ah laga heli Karin. Waana sabo ay xor ka dhigeen seereyaashu oo ka madax bannaan saamaynta aadmiga.

Mida labaad, seereyaashu waxay xaqiijiyeen fursad baaxad wayn oo loo helo in daraasad lagu sameeyo xayawaanka duurjoogta ah. Waxaa yimaada Aqoonyahano waawayn oo soo booqda seereyaasha qaranka si ay uga sameeyaan daraasado cilmiyeed xayawaanka duurjoogta ah. Ugu dambayn, seereyaashan qaran waxay inaga caawiyaan haynta Dhaxalka Dabiiciga iyo Dhaqameedka ah ee taariikhiga ah. Tusaalee ahaan:

Seeraha qaran ee Buuraha waqooyi (simeyn) waxay inaga caawiyaan ilaalinta dhaxalka Dabiiciga ah ee quruxda badan kaas oo ah muqaalka layaabka leh ee qaab-dhismeedka dhulkaas.




Jaantuska 3.8: Meelaha laga helo seereyaasha qaranka Itoobiya

# GUNAANADKA CUTUBKA

- Waddamada Bariga Afrika waxay qani ku yihiin Baadka Dabiiciga ah iyo khayraadka xayawaanka duur joogta ah.
- Noocyada Baadka kala duwan waa:- Baadka lama degaanka iyo lama degaan – xigeenka, Dhul-cawseedka, kaymaha iyo Baadka Albayn oo laga helo gobolka Bariga Afrika.
- Kala baahsanaanta baadka dabiiciga ah ee meelo badan waa mid qummaati ah. Geed abaareedyada caanka ku ah dhulka joogga hoose waxaa soo raaca Baadka Ban – cawseedyada, Kaymaha iyo Baadka Albaynka.
- Baadka dabiiciga ah ee  gobolkani waa sabada xayawaanka duur-joogta ah ee kala jaad – jaadka ah uga dhigtay gobolka ugu qanisan qaaradda oo dhan oo la odhan karo Noole – kaladuwan.
- Baahsanaanta xayawaanka duur – joogta ah waxaa saamayn ku leh xaalado dad-samee iyo dabiici ba ah.
- saamaynta aadmigu waxay sababtaa deegaanka dabiiciga ah. Carro – guur, waxyeello deegaan ahaaneed, dhir-xaalufin, abaaro iyo gaajo daran oo dhamaantood ah raad- reeb guud.
- Hababka kala duwan ee loo daryeeli karo khayraadyada Biyaha iyo carrada waxaa kamid ah: Dhiraynta – dhirkale, dib-u –dhirayn, isku – dhafka, meegaarka, Qodaal – marsin – simeedka dalag- gediska, Biyo – qabatinka, Biyo nadiifinta iyo yaraynta wasakhawga (Diqowga)

# LAYLISKA GUUD EE CUTUBKA

## I *Ka dooro Jawaabta saxda ah*

1 Baad noocee ah baa laga helaa meelaha aadka u roobka hooseeya?

B Keymaha
J Dhul-Cawseedka
T baadka lama degaanka
X B yio J

2 Waa kee xayawaanka Bariga Afrika uun laga helo?

B Dhurwaaga
J Libaaxa
T Haramacadka
X Dameer – dibadeedka

3 Dhamaan waxay caawiyaan yaraynta carro – guurka, marka laga reebo?

B Naxarayn
J Dib-u- dhirayn
T Dhirynta – dhir
X Qodaal – marsin – simeed

4 Seeraha qaranku wuxuu muhiim u yahay

- B Daryeelka xayawaanka Duur-joogta
- T Soo jiidashada dalxiiska
- J Cilmi daraasayno
- X Dhamaan

## II *Ku qor tii run ah Run tii been ahna Been*

1 Bariga Afrika aad buu ugu liitaa baadka dabiiciga ah iyo xayawaanka duur-joogta ah

2 Saddex seere qaran bay leedahay Itoobiya

3 Daaqsinta – xad – dhaafka ahi waxay caawisaa yareynta carro – guurka

4 Baahsanaanta baadka dabiiciga ee Bariga Afrika waxaa saamayn ku yeesha xaalado dabiici iyo dad-samee ah.

## III *Isku aadi joogtaxa "B" iyo joogtaxa "T"*

| | "B" | | "T" |
|---|---|---|---|
| 1 | Naxarayn | B | Xayawaanka – u – gaarka |
| 2 | Dhir – xaaluf | T | Seere Qaran |
| 3 | Niyaalaha | J | Isticmaala meelaha Buuraha. |
| 4 | Yangudhi Rassa | X | Dhir-jarid aan la xakamaynin. |
| 5 | Geed-Abaareed | KH | Noocyada Baadka lama-degaanka |

# CUTUBKA 4

# ARIMAHA DADWAYNAHA




## Ujeedooyinka Cutubka

***Marka uu cutubkani dhamaado kadib, ardaydu waxay awoodi doonaan inay:***

- Kaqayb qaataan hawlaha bulshada ee la dagaalanka HIV/AIDS;
- Kobciyaan garaadka toosan ee ku aadan dadka qaba HIV/AIDS;
- Sharaxaan dhibaatooyinka koriinka xawliga ee dadka;
- Aqoonsadaan xuquuqda carruurta;
- Tusaale ka bixiyaan meel uga dhacyada xuquuqda caruurta iyo sidii looga gudbi lahaa;
- Ka sheekeeyaan waxyaabaha dhaliya shilalka iyo talaabooyinka amaan lagaga badbaadi karo;
- Aqoon u yeeshaan urur – gobol-leedyada Bariga Afrika.

## Tusmooyinka Muhiimka ah

**4.1** ARRIMAHA LA XIDHIIDHA DADWAYNAHA

**4.2** XUQUUQAHA CARUURTA IYO ISTIRAAATI JIYADAHA BADBAADADOODA

**4.3** ARRIMAHA ISKAASHIGA

- *Gunaanadka cutubka*
- *Layliska guud ee cutubka*

# HORDHACA CUTUBKA

Weli waxaa inoo socda cutubkii arimaha dadwaynaha ee aad ku soo dhigateen fasalka shannaad.cutubka ugu horeeya waa mid ku saabsan HIV/AIDS iyo koritaanka xawliga ah ee dadka cutubkan waxaad ku baran doontaan muhimada qodobada la dagaalanka HIV/AIDS sida: ka qayb gal Bulsho oo firfircoon ceebayn laga dheeraado, iyo takoorid, daryeelsiinta iyo caawinta dadka la nool HIV/AIDS. Waxaa intaas dheer oo aynu falanqayn doonaa, saamaynta taranka dadka ee xawliga ah ee deegaanka dabiiciga ah, cunno helista, guriyaynta iyo kuwo kale.

Xuquuqda caruurta, dhaqamada keena shilalka qodobada wax-wadaagista iyo kuwo kaleba waa casharada cutubkan. Casharadan waxaad ku baran doontaan xuquuqdiina xadgudubyada xuquuqda caruurta iyo sidii looga gudbi lahaa. Intaas waxa sii dheer dhaqamada shilalka keena iyo talaabooyinkii lagaga badbaadi lahaa sidookale urur-goboleedyada laga helo Bariga Afrika.

## 4.1 ARRIMAHA DADWAYNAHA

***Markii uu casharkani dhamaado kadib ardaydu waa inay:***

- Faahfaahiyaan muhimada kaqayb galka bulsho ee la dagaalanka HIV/AIDS ka
- Fuliyaan masuuliyadahooda ladagaalanka HIV/AIDs ka .
- Kana dheeraadaan Takoorida iyo ceebaynta dadka la nool HIV/AIDS ka
- Ka qayb qaataan hawlaha daryeelka iyo caawinta dadka lanool HIV/AIDS ka
- Sharaxaan sida taranka xawliga ee dadku u sababayo deegaan waxyeelid, cunto yari iyo gaajo iyo Abaaro.

### Ereyada Furaha u ah Casharka

- Kaqaybgalka Bulsho
- Mas uuliyad
- HIV/AIDS
- Takoorid
- Waxyeelo degaameed
- Dadwayne
- Abaar
- Gaajo
- Cunno-yaraan

## 4.1.1 La dagaalanka cudurka Dilaaga ah ee HIV/AIDS-ka




Jaantuska 4.1: Astaanta kahortaga AIDS ee Deegaankeena

Fasalka shannaad waxaad ku soo barateen in HIV/AIDS-ku yahay halis aad u daran oo ku wajahan jiritaanka aadamaha ee dunida. Wuxuu saamayn ku leeyahay xaaladaha bulsho-dhaqaale. HIV/AIDS wuxuu aafeeyay: shaqsiyaad, qoysas, Bulsho iyo dalal.



### Hawl-galka 4.1

Laba kasta oo ardayda kamid ahi ha isla falan qeeyaan su aallahan:

1. wax fikir ah maka haysataa HIV/AIDS?
2. Isla falanqeeya hawlaha ay qabtaan: shaqsiyaadka, kooxaha ururada, iyo sida ay ula dagaalamaan HIV/AIDS bulshadiina?

Waqtigan waxaa jira dad gaadhaya qiyaastii 40 milyan qof oo uu hayo cudurkani HIV/AIDS oo aduunka ah. Ku dhawaad 95% oo dadkan kamid ah waxay ku nool yiliin wadamada soo koraya, Afrika ha u badnaatee. Afrika inta saxaaraha ka hoosaysa waa meelaha dunida ugu daran. HIV/AIDS. Itoobiya waa mid ka mid ah dalalkaas. Dadka uu hayo Itoobiya waa da'dii waxsoosaari lahayd ee inta u dhaxaysa 15 ilaa 49 jirka.

*Itoobiya waxaa lagu qiyaasaa 1.4% dadka da'doodu u dhaxayso 15 ilaa 49 jir ee uu hayo HIV/ADIS waxaa kaloo jira in ka badan Hal milyan oo caruur agoomo ah oo waalidkood dilay HIV/AIDS.*

Sidaa daraadeed, HIV/AIDS-ku waa mid faro baas ku haya dalalka ka hooseeya saxaraha oo ay itoobiyana kamid tahay, waxaana loo baahan yahay in foojignaan iyo ficilba laysku daro dhamaan shaqsiyaad, Bulsho iyo dawladba.

## Ka qayb-galka Bulshada Ee ku aadan La Dagaalanka HIV/AIDS-Ka

Kaqayb-qaadashada bulsho waa xaalad ay bulshadu si firfircoon ugu lug-yeelanayso arimaha Bulsho – dhaqaale iyo siyaasadeed ee bulshadooda.

Kaqayb-qaadashada bulsho waxay astaan u tahay muwaadinka suuban. muwaadinka suubani waa kuwa masuuliyada iska saara ee, daneeyana dhibaatooyinka bulshadooda haysata, kana qayb-qaata xalinta mushkiladaha bulshadooda iyo sidoo kale dalkoodaba.

Ka qayb-qaadashada firfircoon waa mid ka mid ah, kuwa ugu muhiimsan ee lagaga hortagi karo cudurkan HIV/AIDS-ka dhibaatadiisa sababta oo ah cudurkani HIV/AIDS-ku waa mid qof walba khatar ku haya oo loo baahan yahay in lays abaabulo qof kastoo bulshada kamid ahi la dagaalamo HIV/AIDS-ka muwaadin kastaana uu kaalintiisa ka cayaaro.

Waana waxtarka dhamaan shaqsiyaad, Bulsho iyo dalkaba taas oo qof waliba looga baahan yahay inuu buuxiyo masuuliyadiisaa la xiriirta ladagaalanka cudurka.



### Hawl-galka 4.2

Koox-falanqayn iyo soo bandhigid isku day inaad ku salaysid hawl-galkan talaabooyinkan lagu siiyay:

1 Qaab-kooxeed-yaryar oo uu baruhu caawinayo.

2 Koox walba ha qorto warbixin gaaban oo ha falanqayso qodobadan soo socda:

  a Waa maxay mas'uuliyadaha la dagaalanka ee HIV/AIDS ee bulshadiina?

  b Maxay tahay inaad qabataan si aad u buuxisaan masuuliyadihiina?

  c Waa maxay faaiidada masuuliyada oo la buuxiyo?

3 Koox kastaa ha u soojeediso fasalka warbixintooda.

Kaqayb-galka muwaadiniinta ee ladagaalanka HIV/AIDS wuxuu u dhacayaa heerar kala duwan. Tusaale: kaqayb galkaagu wuxuu ka bilaabmayaa: Gurigiina,

Dugsigiina, iyo deegaankabu. Heer dugsi iyo heer bulsho oo keliya kuma koobnaanayo la dagaalanka HIV/AIDS-ku ee wuxuu ku fidayaa heer gobol iyo heer qaran.

Kaalinta shaqsiyada ee ladagaalanka HIV/AIDS-ka ay ka qaadanayaan bulshadooda iyo buuxinta masuuliyadahooda:

- *Ogaanshaha iyo ka hortegida HIV/AIDS-ka*
- *Kawacyi gelinta sida: xubnaha qoyska, saaxiibada qaraabada 1wm:- isu gudbinta iyo joojinta HIV/AIDS-ka.*
- *Isku hawlida dhaqdhaqaaqyada bulsho ee la xiriira, HIV/AIDS-ka.*
- *Kamid noqosho iyo kaqayb qaadasho ururada la dagaalanka HIV/AIDS-ka.*
- *Ka fogaansho ceebayn iyo Takoorida dadka uu hayo HIV/AIDS-ka.*
- *Daryeelka dadka uu hayo HIV/AIDS-ku.*

Midnimada iyo wada shaqaynta bulshada xubnaheeda kala duwan aad bay aasaasi ugu noqonaysaa sidii looga hortegi lahaa HIV/AIDS-ka. Bulshadooda si uuna ugu faafin inta lays abaabulo oo ururo la samaysto la dagaalama HIV/AIDS-ka oo bulshada rayadka ahina ka dhex-muuqato.

Bulshada Rayidka ahi waa bulsho iskaa wax u qabso ah oo dawlad ka madaxbanaan. Aad bay muhiim u yihiin maaadaama kicin iyo abaabul ku jiraan la dagaalanka cudurada sida HIV/AIDS-ka.

Tusaale ahaan "Jamacu" waa qaab dhaqameed ay bulshada rayadka ah ee Itoobiya ay caanku ahayd. Inkastoo uu ku koobnaa "Jamacu" xiliyada geeridu dhacdo hadana waxaa la mid ah ururada maanta la dagaalamaya HIV/AIDS-ka.



## Hawl-galka 4.3

Koox-koox isula falanqeeya

Sidee bay "Jamacu" ama ururada kale ee la dagaalanka HIV/AIDS-ku bulshada u caawin karaan?

Dhamaan noocyada kala duwan ee ka jira dugsiyada, Bulshada rayadka, ururada la dagaalanka, waxay gacan buuxda ku qaban karaan dhibka bulshadeena ka haysta HIV/AIDS-ka. Hadii aynu isku soo wada duubno, dhamaan muwaadiniinta dalka ha noqdaan ururo – dawli ah iyo kuwa aan dawli ahaynba waxaa ay sidoo kale

noqdeen kuwo muhiim ah la dagaalanka HIV/AIDS-ka.

Ururka laanqayrta cas waa tusaalaha ururada aadanaha u dhaqdhaqaaqa iyaga oo caawinaya dadka taageerada u baahan tusaale ahaan dadka qaba HIV/AIDS-ka.



### Hawl-galka 4.4

Mashruuc qof-qof ah

1 Dooro urur, Naadi, xidhiidh i.w.m la dagaalama HIV/AIDS-ka oo caawiya bulshadiina?

2 Soo ururi warbixino ku saabsan dhaqdhaqaaqyadan kana qor warbixin gaaban?

3 Usoo jeedi warbixintaada fasalka

## Hayb-sooca lagu hayo dadka la nool HIV/AIDS-ka



### Hawl-galka 4.5

1 Maxaad dareemi lahayd ama aad samayn lahayd hadii uu kuu soo dhawaado qof qaba HIV/AIDS?

2 Sideebaad u caawin lahayd qof qaba cudurkan?

Hadii cudurkani uu ku dhaco qof waxaa wejigiisa laga dareemayaa dhibaatooyin dhaqaale, bulsho iyo nafsi ahaaneed. Waxaa suurowda in qofkii qabay cudurka ee isu haystay qof-fayow bulshadiina markay ka war hesho ay hayb sooc ku samayso maxaa yeelay, hayb-soocu waa falal aan lagaga hortegi Karin HIV/ AIDS-ka Dhibka oo sii xumaada bay keeni sida:

- *Dhibaneyaasha oo aan u soo bandhigayn xaaladahooda kuwa kale*
- *Dhibaneyaasha qaarkood oo aan qaadanayn talaabooinka ugu haboon ee lagaga hortagayo iyaga laftigoodu si aanay u gudbinin HIV/AIDS.*
- *Dhibanihii oo cuqdadaysan inuu aargoosi ahaan si ula kac ah u aafeeyo bulshada.*

Sidaa awgeed bulshadu waa inay iska ilaaliso inay fikir xun ka qaataan HIV/ AIDS.



## Hawl-galka 4.6

Labo – labo u falanqeeya

1 Ma jiraa qaab lagu takooro dadka lanool HIV/AIDs ee deegaankiina? Hadaad" Haa" tiri, ka hadal?

2 Ma jiraan hawlo ay qabtaan shaqsiyo, kooxo ama ururo taageero siiyo, kooxo ama ururo taageero siiya dadka qaba HIV/AIDS deegaankina? Kahadal .

# 4.1.2 Koriinka Degdega ah ee Dadka



## Hawl-galka 4.7

Lammaane u falanqeeya

Maxay kula tahay oo ugu wacan sababaha korodhka dadka ee degdega ah dalalka qaarkood iyo kuuwa uu hooseeyo koriinkoodu?

Baaxada tirada dadka kuwa ugu badan waa dalalka soo karaya ee Afrika. Itoobiya waa ka mid, si kastaba ha noqotee, waxay arintani khatar ku haysaa khayraadkii dhulka iyo biyaha oo laga batay natiijada ka dhalatayna ay noqotay Dhibaatooyinka kala duwan ee bulsho – dhaqaale, iyo deegaanba.

## Arimaha saamaynta ku leh Koritaanka dadka

Dhalashada, dhimashada iyo qixiduba waa saddex arimood oo saameeya. Koriinka dadka ee gobol kasta ama dalkasta.

- ***Dhalasho*** *Waa inta dhalatay ee saxda ah gobol ama dal*
- ***Dhimashada*** *waa inta dhimatay ee saxda ah gobol ama dal*
- ***Haajirid*** *Waa dhaqdhaqaaqa dad ee meel ilaa meel si ay u helaan*



## Hawl-galka 4.8

Lammaane ahaan u falanqeeya

Muxuu noqonayaa koriinka dadka ee dabiiciga ahi:

a Markii dhalashadu ay ka sarayso dhimashada?

b markii dhimashadu ay ka sarayso dhalashada?

c Markii dhalashada iyo dhimashadu isu dheeli tiran yihiin?

Wadamaada soo koraya ee Afrika tarankooda dadku dhaqsaha yahay intooda badan dhalashadu way saraysaa. Wadamadan saamiga dhalashadu wuu ka sareeyaa saamiga dhimashada.

## Saamaynta korodhka xawliga ah ee dadka

Fasalkiinii shannaad waxaad ku soo qaadateen in dadka kortiaankiisa xawliga ah ay ka dhalato dhibaatooyin raad ku yeesha dhinacyada:- waxbarasho iyo daryeel caafimaad labadan oo kamid ah adeegyada bulshada.

Bal hadaba aynu isla falanqayno in ka badan oo ah raadadka ay ku yeeshaan deegaanka dabiiciga ah, cunno ku fillan, Guryo iyo dhul-beereedyo.

### I *Raadka ay ku yeelatay Deegaanka Dabiiciga*

Taranka dadka ee degdega ahi wuxuu sababaa waxyeelayn deegaan oo ah meelaha ay ka dhacaan Tusaale: Dhir-xaaluf, wasakhow iyo carroguur.

Akhri daraasada soosocota oo ku tusaysa raadadka ay deegaanka ku reebaan taranka deg dega ah ee dadka mid ka mid ah meelaha laga helo Dawlada Deegaanka Soomaalida

**Sheeko-gaaban**

## isbedelada Deegaanka Errer

Errer waa mid ka mid ah Degmooyinka uu ka kooban yahay Gobolka shiniile ee Dawlada Deegaanka Soomalida. Waa magaalo yar oo miyi ku taal, waxayna dhinacyada kaga taal oo ay la dhereran tahay dhismaha wadada tareenka ee isku xidha Itoobiya ilaa Jabuuti, Dadka degan magaalada iyo agagaarkeeduba waxay aad ugu dadaalaan beeraha, xoolaha iyo hawlo kale oo ganacsi- Agagaaraha meelahaas waxaa lagu yaqaana soo saarista khudaarta iyo geedmirroodka Togga wayn ee Errer mara waa laf dhabarta nololeed ee ugu wayn ee ay dadyowga Errer ku tiirsan yihiin. Waa isha ugu muhiimsan ee ay dadku biyihiisa u Isticmaalaan cabitaanka, Nadaafada iyo waraabka beeraha.

Waxaa intaas u sii dheer, soo jiidashada aadka u saraysa ee baadkooda cufan iyo carrada-san ee wax bixin og, gaar ahaan labada dhinac ee toggan Erer. Hase yeeshee, tirada dadka degmadan ee sida degdega ah u koraysa ayaa saamayn daran ku haysa bilicdii ama quruxdii meelihii cagaarnaa wakhtiba, Wakhtiga

uu ka sii dambeeyo taasoo sababi karta dhibaatooyin halis ah oo ka dhan ah deegaanka iyo nolosha dadkaba.

Wakhtiyadan xaadirka ahna kheyraadyadii carrada, biyaha iyo baadkii meelahaas waxaa fara ba'an ku haya koritaanka deg-dega ah ee beeralayda iyo xoololeyda. Tusaale ahaan, baadkii cufnaa ee meelahaas waa la gooyay (banneeyay) oo ay ugu wacan tahay, dalabka ama doonista dhul- beereedyada sii koraya ee yaraaday. Intaas waxaa kaloo u sii dheer oo baadkii saamayn ku haysa daaqasinta xad-dhaafka ah oo ay ugu wacan tahay koritaanka tirada xoolaha ee aadka u saraysa. Yaraanshaha iyo wasakhawga biyuhuna waa mid kale oo dhibaato ku haysa meelahan waayahan dambana toggii ama wabigii yaraa wuu awoodi kari waayay inuu daboolo baahidii beeralaydii uu biyaha u siin jiray sida joogtada ah ee aan kala go'a lahayn. Sidaa awgeed beeralaydiii waxay hada isticmaalaan xoogooda oo ay beeraha ku waraabiyaan iyaga oo u adeegsanay muruqooda toggii wuxuu noqday mid wasakhooba, maxaa yeelay, koritaanka tirada dadka kuwaas oo u adeegsada, maydhasho, dhar-kumaydhis iyo xoolaha. Carradii samaydna nabaad guurtay oo qodaalkiibaa xad-dhaaf noqday oo saamayn daran iyana ku haysa waxsoosaarkii beeralayda oo yaraada Guudahaan, Nolosha dadku ee si heer sare ah ayay u sababtu waa deegaanka isbedelaya ee ay masuulka kayihiin taranka xad-dhaafka ah ee dadka, degmada Erer ku nool.



## Hawl-galka 4.9

Lammaane u wada falanqeeya

1 Maxaad ka barateen daraasadan?

2 Maxaad samayn lahayd haddiii deegaanka asalkiisii laguu celiyo?

## Dhir-xaaluf



Jaantuska 4.2: Dhirxaaluf

xaalufinta-dhirtu waa dhirtii dhulka ku shareernayd oo la jaro lana barabixiyo si aan loo aaba yeelina loo gooyo baadkii dabiiciga ahaa.

Koritaanka dhaqsaha ah ee dadku waxay sababtaa dhir-xaalufinta sababaha ugu waawayna waxaa ka mid ah:

- *Baahida loo qabo oo badatay sida: xaabo lashito, dhuxusha, dhismaha qalabka xafiisyada iwm.*
- *Baahida loo qabo dhul beereedyo kadib markii ay dadku dhirtii ka Jareen iyo baadkii cufnaan Jiray.*
- *Baahida dhul loo isticmaalo degid baadkiina halkaas lagu baabiinayo.*
- *Dhul-daaqsin la'aanta oo keenaysa'in baadkii yaraa la isugu yimaado.*

Dhir-xaalufintu waxay leedahay natiijooyin kala duwan oo deegaan ahaaneed markii dhinaca taban laga eego waxaana ka mid ah:

- *Waxay fududaysaa nabaad-guurka.*
- *Waxay sababtaa baabiinta noolaha kala duwan (dhirta iyo xayawaanka).*
- *Waxay saamaysaa roobabka sii yaraanaya ee uumibaxa.*
- *waxay dhaliisaa in alwaaxdii ama xaabadii yaraato.*
- *Waxay saamayn ku yeelataa quruxdii deegaanka.*




**Hawl-galka 4.10**

Laba – laba u falan qeeya

Dhir xaalufku dhibaato miyuu ku hayaa deegaankiina? Hadii aad "Haa" tiri:- arimahee ugu waawayn? Waa maxay se talaabooyinka lagu xalin karo dhibaatada?

## Dikhawga

Dikhawgu waa wasakhaynta wax kasta oo aan loo baahnayn oo markaa deegaanka ku keena isbedelo dhinacyada: biyaha, hawada ama waxyaabaha kale ee deegaanku ka kooban yahay. Taas oo waxyeelo xun u geysata Aadamiga iyo Noolayaasha kaleba.





**Jaantuska 4.3: Hawada iyo Biyo wasakhowga ay dadku sababeen**

Wasakhawga biyaha iyo hawada ee ay dadku sababaan waxay ka dhacdaa Guryaha, warshadaha, baabuurta, dhul-beereedyada i.w.m Waxaa kale oo jira dhibaatooyin ay sababeen dhacdooyinka rabbaaniga ah sida Qaraxa Foolkaanaha, Dabka qabsada duurka. 1.w.m

Sidaa darted markii dadku kordhaba deegaanka dhibka soo gaadhayaana waa kordhayaa.

Taranka Xad-dhaafka ah ee dadka sii kordhaya ee sababa haro iyo biyo wasakhaynta. Sababtaas oo ah korodhka cadadyada wasakh ee soo socda:

- *Qashin-qubid iyo wasakh kale oo adke ah oo ay guryahooda ku isticmaaleen.*
- *Wasakhda ay warshaduhu ku qubaan hawaada sida: kaarboon laba ogsaydh ($CO_2$), kaarboon monogsaydh (CO) salfar laba ogsaydh ($SO_2$) iyo dareerayaal ama adkeyaal kiimikaad.*
- *Naqaska ay hawada ku sii daayaan baabuurtu.*
- *Naqaska wasakhda ah ee ay sii daayaan qalabka shidaalka ku shaqeeya ee guryaha la dhigto.*
- *Wasakhda beeraha sida: Bacrimiyeyaasha, sunta cayayaanka iyo wasakhda xayawaanka.*

## Hawl-galka 4.11



Si fiican oo taxadar leh u fiiri sawiradan labada meelood ee kala duwan idinkoo hab kooxeed isula falanqaynaya.





**Jaantuska 4.4: (b) meel beer ah oo miyi kutaal (t) magaalo warshadeed**

Labada goobood teebaad u malaynaysaan inay ka wasakhow badan yihiin biyaha iyo hawadaba? Faah faahiya sababta?

## II *Raad-reebka Guryaha, Dhul-beereedyada iyo quudinta*

### Raad-reebka Guriyaynta

### Sheeko-gaaban

#### Xaalada Guriyaynta Addis Ababa

Addis Ababa waa magaalo madaxda dalkeena Itoobiya waxaana si caadi ah u degan in ka badan 3 milyan oo qof. Taranka tirada dadka ee xawliga ku socotaana waxay magaaladan ka dhigaysaa ta ugu saamiyada dhalashada iyo dhimashada sareysa uguna qaxootiga (Soo galootiga) badan marka la bar-bar dhigo qaybaha kale ee dalkeena.

Dhibaatada guryuhuna waxay noqotay natiijada ka dhalatay taranka xad-dhaafka ah. Taasoo dad badan waxyeelo ka soo gaadhay guryo la'aantii iyo qiimaha kirada guryaha sidii saacada u socota bil walba.

Inta ugu badan guryaha magaaladan Addis Ababa ilaa xad aad bay tayadoodu u liidataa ama u hoosaysaa dhinacyada  baaxada, adeega nadaafadeed ee aasaasiga ah, iyo qalabka dhismaha loo adeegsado.Dadka badankiisu waxay ku nool yihiin xaalad nololeed oo jaho wareersan (isku-buuqsan) Malaha goobo ku filan oo ay ku noolaadaan, waxaad arkaysaa dad (qoysas) badan oo wadaaga hal-guri-oo yar. Guryaha intooda ugu badani malaha adeegyadii sida: Jikada, Korontadii iyo biyo gelin. Tusaale ahaan: 90.4% iyo 24.9% oo ka mid ah guryahani malaha adeega maydhashada (qubeyska) iyo suuliyo. Siday ukala horeeyaan ahaan.

Kuwa ugu wada daran waa kuwa bilaa hooyga ah gebi ahaanba. Dadyawgani waa kuwo aan awoodi karinba xataa in ay ku noolaadaanba heernololeedka guryaha magaalada kuwa ugu ilaa xad hooseeya waxay ku nool, yihiin xaalad aad u sii libdhaysa oo waddooyinka agtooda iyo meelaha kale ee sida:- masaajidyada iyo kaniisadaha ayay ku xeeran yihiin. Markaa hoygooda dhabta ahi waa hal-ku dhagan "Dhulkay gogladaan cirkana huwadaan"





**Jaantuska 4.5: Dadka Hoyga iyo Hu'gaba aan haysan ee magaalooyinka dunida saddexaad**



## Hawl-galka 4.12

Laba laba isula falanqeeya

1 Maxaad daraasadan ka barateen?

2 Maxay kula tahay xal u helida dhibaatada guri la'aanta Addis Ababa.?

Guud ahaan, markii tirada dadku korodhaba, dhibaatada guryo la'aantuna way sii kordhaysaa wakhtigan aynu joogno ee xaadirka ah waa dhibaatada ugu dhaqsaha badan waddamo badan oo Afrikaan ah dawlad iyo mid gaar ahaaneedba toona ayna dabooli Karin baahida dadyawga guryo la'aantu haysato.Tusaale: Magaalooyinka. Waawayn sida: Nayroobi Johaanisbeega, Addis Ababa 1wm ay mar horeba hoy la'aanta iyo hu'la'aanta la daala dhacayaan.

Raad-reebka dhul-beereedyada Ahmiyada ay beeruhu leeyihiin waa midaad aasaasi aad u ah dalal badan oo Afrikaana kuwaasoo dadkooda inta ugu badani ay ku dadaalaan dhaqdhaqaaqyada xaga beeraha si kasta ha ahaatee, dhul-beereedyadan sii yaraanayana waxay noqdeen mid ka mid dhibaatooyinka ugu waawayn ee manta haysta Bulshadii beeralayda ahayd ee Afrika sababta oo ah waxaa kala batay saamigii dadka iyo dhulka waddamo badan oo Afrikaan ah qof walba intii ku soo hagaagaysay markii saamiga dadka iyo dhulka la xisaabshay. Waxaa durbaba hoos u dhacay dhulkii Hal hektaar qofkiiba intii ku soo hagaagi

lahayd. Xaaladahani waxay abuurayaan halis aad u wayn oo ku habsata dadkii iska deganaa ee waxsoosaran jiray.

## Raad – reebka quudinta

Dalal badan oo Afrika ahi, waxaa dhab ah inay tiradooda sida aadka ah u koraysaa ay ka badan tahay wixii ay soo saarayeen waana ta keentay in had iyo jeer ay cunno uga baahato waddamada qanniga ah iyo ururada caalamiga ahba.

Tusaale ahaan: laga bilaabo horaantii 1960' dii dalka Itoobiya wuxuu soo maray waxsoosaarkii cuntada oo hoos u dhacay. Xaaladuna waxay kasii dartay badhtamihii 1970'dii oo dalka oodhan cunno dibada looga keenay iyo mid dalku lasoo dagayba. Tusaale ahaan wax soosaarkii wuxuu hoos udhacay qiyaastii 1.9 kintaal 1982 kii ilaa 1983 kii na ilaa 1.5 kintaal 1988 ilaa 1989kii tirada dadku waxay korodhay 2.9% oo ah sannad kiiba Hadaba sannadahaas intii u dhaxaysay celceliska sannadlaha ah ee raashinka deeqda ah waxay gaadhay 54.8 milyan oo kintaal laakiin baahidii waxay noqotay 91.9 milyan oo kintaal. Waana farqi wayn oo u dhexeeya isu dheelitirka dalagyada raashin ee aynu la soo dagayno iyo kuwa deeqda ah ee inooga imanaya Yurub iyo Ameerika .



Jaantuska 4.6: xarun quudin ah oo Soomaaliya ku taal

## Raad-reebka Gaajada iyo Abaarta

Abaartu waa xaalada marka roobkii uu aad u yaraado ee gaadhi waayo intii laga filayay. Xiliga jawigu qalalan yahay oo Joogto noqota. Waana dabeecadaha ay leeyihiin dalal badan oo Afrikaan ah Itoobiyana ay ka mid tahay. Saamaynteedana

waxaa kamid ah: nolosha dadka xayawaanka, xoolaha, dalaga i.w.m. koritaanka degdega ah ee dadka ayaa sabab u ah gaajada iyo abaarahaba. Maxaa yeelay waxay u hogaamisaa deegaanka oo xumaada oo ay dadku mas'uul ka yihiin sida dhir-xaalufin, Daaqsin – xad-dhaaf ah, qodaal-xad-dhaaf ah i.w.m.

Abaartu dalkeenan waxay haleeshay sannado dhawr ah gaar ahaan 1970' dii iyo 1980' dii qaybo badan oo dalka kamid ah oo ay kamid yihiin waqooyiga iyo badhtamaha dalka sanadihii 1972 – 1974 iyo 1983 – 1984 qaybtan had iyo jeer Itoobiya waxay uga dhacdaa oo ay ugu soo noqnoqotaa sababahan awgood:

- *Dad badan oo sannado dhawr ah deganaa.*
- *Dhir xaalufka iyo daaqsinta badan oo saamayn sare ku yeelatay.*
- *Qodaalka xad-dhaafka ah oo daaliyay beerihii caadiga ahaa*



**Jaantuska 4.7: (A) Abaar baabisay saaxil (B) dhulka qalalan ee lama – degaanka ah**

Dhir xaaluf, Daaqsin xad-dhaaf ah iyo qodaal xad-dhaaf ahi waa dhaqdhaqaaqyada ugu waawayn ee aadmigu sababo, taasoo ku xidhan korodhkiisa xawliga ah. Waana kuwa sababa xaalufka wayn (lama dagaanada oo balaadha iyo cimilada) oo dabadeed laga dhaxlo gaajo iyo Abaar.

## Hawl-galka 4.13



Laba laba u wada falanqeeya:

1. Abaartu ma saamaysay deegaankiina maxaad u malaynaysaan waxa keenay iyo waxa ka dhashay?
2. Sideebay dadka deegaankiinu Abaarta ka yeeleen?

Natiijooyinka ugu waawayn ee ka dhalatay Abaarta

- *Gaajo: Cunto yaraan*
- *Nolol luntay: dhimasho dad iyo duunyaba*
- *Qaxooti (haajirid): Dhaqdhaqaaq ay dadku sameeyaan si ay uga baxsadaan abaarta iwm.*

## 4.2 XUQUUQAHA CARUURTA IYO ISTIRAATIJIYADAHA BADBAADADOODA

***Markii uu casharkani dhamaado kadib ardaydu waa inay:***

- Tilmaamaan xuquuqda aasaasiga ah ee caruurta;
- Tusaalayaal ka bixiyaan qaababka kala duwan ee xuquuqda caruurta iyo xad-gudubyadooda;
- Ku dhaqmaan xuquuqdooda dastuuriga ah
- Isaga difaacaan naftooda xadgudubyada kala duwan ee loo gaysanayo xuquuqdooda

**Ereyada Furaha u ah Casharka**

- Xuquuq
- Dastuur
- Xuquuq-meel uga dhaca
- Caruur ku shaqayn
- Xad-gudub Nafsi
- Xad-gudub Jidheed
- Xad-gudub Galmood
- ciqaab Gudeed
- Bayaanka Q.M
- Xuquuqaha Carbiska (dhaqdhaqaaqyada jidh-dhis)
- Xuquuqaha difaaca

### 4.2.1 Bayaanka Qaramada Midoobay ee xuquuqda Caruurta



**Hawl-galka 4.14**

Lammaane uga shaqeeya

1 Falanqeeya qodobadan:

 a Waa maxay waxtarka barashada xuquuqdiinu?

 b Waa maxay xuquuqda caruurta ee aasaasigu xasuusta fasalkiinii shannaad?

2 Qora jawaabta fasalkana u jeediya?

Xuquuqdiina oo aad barattaan aad bay muhiim u tahay. Markii laydinku xad gudbo ayaad isku difaaci doontaan xuquuqda caruurta waxaa lagu xusay Bayaanka Qaramada midoobay iyo dastuurka Iroobiya.

Ururka Qaramada midoobay (U.Q.M) wuxuu difaacaa xuquuqda Aadamaha dunida oo dhan. Kadib 1945 kii markii la aas aasay wuxuu soo bandhigay Bayaanno iyo Baaqyo laxiriira xuquuqda aadamaha. Tusaale:- Bayaanka xuquuqda Aadamiga ee caalamiga ah, Heshiiskii Qaramada midoobay, Bayaanka Q.M. ee la dagaalanka ama ka hortaga Haweenka latakoorayo.

Bayaanka xuquuqda caruurta ee Q.Midoobay iyo Dasturka Jamhuuriyada Dimoqraadiga Federaalka Itoobiya (J.D.F.I) waxaa lagu xusay qodobadan soo socda ee x/caruurta.

- *Caruurtu waxay xaq u leeyihii inay helaan nolol, yeeshaan magac iyo Dhalasho.*
- *Xuquuqda caruurta waa inay waalidiintu ogaadaan daryeelaanna*
- *Caruurtu waxay xaq u yeelanayaan inay waxbarasho helaan wakhti badanna loo huro wax barashadooda.*
- *Caruurtu waxay xaq u leeyihiin in laga difaaco in lagu shaqaysto ilaa iyo intay ka qaan gaadhayaan.*
- *Caruurtu waxay xaq u leeyihii inay xor ka ahaadaan waxyaabaha aadminimo darada ah sida:- ciqaab Gudeed iyo Ciqaab duleedba sidoo kale inay xor ka yihiin dareen ahaan iyo nafsiyad ahaanba noocyada xad-gudub oo dhan.*
- *Caruurtu waxay xaq u lee yiliin inay xor ka ahaadaan xad- gudubka galmoodka iyo fara xumayn oo dhan*

## 4.2.2 Xad-gudubyada Xuquuqda Caruurta iyo istiraatijiyadaha loogaga hortegi karo

### Ku xad-gubka xuquuqda caruurta

Ilmo (Canug) kastaa wuuxuu leeyahay xuquuq. Oo kamid ah x/caruurta hadaba waxaa jira arimo dhawr ah iyo xaalado xuquuqdooda khilaafsan waxaana kamid ah xadgudbyadan: xadgudub-duleed, dareen iyo nafsi ahaan xad gudub- Galmood iyo mid ku shaqaysi.

## I Xad-gudubka jidheed ( duleed)

Waa xad-gudubyada ka dhanka ah caruurta waxaana ka mid ah wax alaale wixii dhaawac ah oo dhan sida:- ciqaab gudeed, ciqaab duleed iyo ciqaab nafsi (dareenka ah) waana in dhinac looga soo wada jeesto min Qoys, Dugsi, Baraha, iyo ilaa Deegaanka Ku xeeranba.

## II Xad-gudubka nafsada (Dareenka)

Waa xadgudubyada ay ka mid yihiin cayda, Hanjabaada, cagajuglaynta, iyo astaamaha argagaxa leh ee tooska ah. Kuwani caruurta waxay u gaystaan degenaansho la'aan iyo dhibaato xaga dareenka ah

## III Xad-gudubka Galmoodka

Ilmo yar oo aan gaadhin da'dii guurka oo loola dhaqmo fal noocan ahi waxay noqonaysaa xad-gudub.

## IV Xad-gudubka – muruq-maal laga dhigto

Tanina xuquuqda caruurta aad bay uga soo horjeedaa ilmo yar oo aan gaadhin da'dii shaqaada iyaga oo aan qaangaadhin caqli ahaan iyo jidh ahaanba. Waxay caruurta ku keenaysaa dhibaatooyin ay ka mid yihiin:- caafimaadka, waxbarashada, koriinka, iyo horumarkoodaba.



### Hawl-galka 4.15

Falanqeeya idinkoo koox-koox ah

1 Falanqeeya kadibna qora qaar kamid ah xad-gudubyada xuquuqda caruurta ee deegaankiina?

2 Kadibna Fasalka u soo jeediya falanqeeyana.

# 4.2.3 Hab-dhaqamada Shillalka U Nugul iyo ka Badbaadidooda

Shillalka waxaa sababi kara habab kala duwan. Noocyada ugu wada caansan ee shillalka ka dhaca meelaha saamigan sare leh oo noqon kara noocyadan soo socda:

1 ***Korontada ama Laydhka:*** waa gariirka naxdinta (argagaxa) leh ee korontada oo mar-marka qaarkood dhaawac aad u wayn oo muuqaalka oogada sare ee jidhka kasoo gaadho oo ay sababtay qulqulka korontadan ee tooska u dhexmartay oogada jidhka.

Dhaawacyada ugu badan ee korontadu wuxuu shil ahaan ka dhex-dhacaa isku-dhaca ama istaaba shada ay is taabtaan ama xadhiga danabaysani intuu kala go'o qaraxna sameeyo qaybtiisii kale iyaduna goonideeda u noqota qayb dabaysan ama qaybo badan oo danabaysan.

## Ka hortaga

Ugu horayn, kaalmada ama gargaarka la siinayo dhibanaha ay koronto qabsatay, kaalmeeyuhu ama u gargaaruhu waa in uuna ku taabanin dhibanaha gacmihiisa oo qaawan ilaa iyo inta illaha korantada laga qaadayo si loo samatabixiyo ama isha quwada la daminayo

2 ***Sunta:*** Sunta Aadamiga waxaa sida caadiga ah lookala saaraa iyada oo loo ee gayo saamayntooda sida:

Sunta daxalka suntan ololka iyo sunta Neerfaha (xididada)

***Sunta Daxalka:*** waa Aysiidhada xoogan ama Alkaliyada waxayna keentaa baabiinta Tiftaafyada:

***Sunta olosha:*** waxa ka mid ah curiyeyaasha Arsinik (silfar cad) Aayodhiinta waxayna sababaan lakabka qarada yare ee maqaarka xididada yaryar ee dareen wadka ee laga helo ayay dilaan marka ay dareereyaal kale lafalgalaanna way ololaan

***Sunta Neerfaha:*** waxay ka weeraraan aadamaha hab-dhiska dhexe ee xididada ama xubnaha Jidhka kuwa ugu muhiimsan sida:- wadnaha, beerka, Sambabada ama kelyaha xataa waxay saamayn ku yeeshaan Habdhisyada Neefsashada iyo wareega dhiiga waxaana ka mid ah:- Alkoolka obyamta iyo maandooriyeyaasha kale ee la xidhiidha.

## Daawaynta

- *Haddii qof sumoobo waxaa lagu daawayn karaa hababkan:*
- *Caano ama biyo aad u badan oo loo buuxiyo caloosha*

- *Adeegsiga daawada yaraysa ama baabiisa hadii qof sumoobay calooshiisa ay gasho suntan noocyo kamida sida:- Budo ama dareere daawadan laba malqaaca dood ayaa soo raacda oo milix ah oo biyaha loogu milo*
- *Laba malqaacadood oo mastadh ah (Budo huruud ah) ayaa biyaha loogu darayaa*

## Sheeko-gaaban

### Shilkii shernobil

Shucaac lagu qiyaasay 100 ilaa 150 kiyoor (Halbeegga shucaaca) ayaa ku fakatay Gibilka isla markiiba waxaa qaaday shucaacaas loo yaqaano (Radio Activity) dabaylaha. Waxayna ku faaftay laga bilaabo waqooyiga galbeed ee dalka Belaruusiya oo ay ku taallay warshada ay suntan ka fakatay oo ah warshadaha soo saara Nuklyeerka. Suntii waxay uga sii gudubtay dalalka Boolaand iyo Iswidhan (Poland and Sweden) Celcelis ahaan markii ay noqotay dhimashada ay sababtay qiyaastii 31 qof waxaana ka firxaday 100 000 qof

Waxay baabiisay dhul beereedyo muhiim ahaa waxsoosaarkiina ka guuray dhulka oogadiisa sare iyo biyihiina. Kharibay oo shucaacii asiibay

3 ***Shillalka Dabka:*** Dabkii Baabiiyay kaymaha dalka indooniishiya

Dabkan oo ahaa mid ay dad ka dambeeyeen ayaa baabiiyay dhul baaxad leh oo ay shirkad beeralayda dhirta Alwaaxa ah soo saarta lahayd. Waxaa ka dhashay hawo diqow ama wasakhowga hawada oo dhibaatooyin khatar ah caafimaadka ku ah.

Roobab laxaad leh ayaa hadana kaymihii cagta mariyay dhaawac wayna u geystay waxay sababtay in 297 arimood ama calaamadood oo ka mid ah xanuunada ku dhaca sambabada in lagu arko laba qofna ay u dhimatay.

Intii ay gubanayeen kaymuhu waxaa iyana barbar socotay dhul beereedkii sidoo kale dabka raacay oo ay ka dhalataty Abaaaro iyo gaajo. Waxay dhaawac u gaysatay hanti sababtayna Dhaawac iyo Dhimasho.

Shillalka dabku uu sababo waxaa ugu wayn ee keena:

- *Kibriidka iyo sigaarka loo tuuro sida qayrul masuulnimaada bilaa damiirka ah.*
- *Saaqidnimada goob-dab laqabadsiiyo waxay u horseedaa kaymo badan oo duurka ah oo gubta.*

## Qaraxyada /miinada dhulka

Miinada dhulka la dhigo waata lagu aaso oogada-sare ee dhulka hoosteeda waana aalada dad iyo duunyaba gumaadda. Waxay noqon kartaa miinada lidka kaaraha iyo miinada lidka dadka. Sida caadiga ah waxaa la adeegsada xilliyada ay socdaan dagaalada sokeeye difaac awgeed ama ujeeddooyin is difaac.

Shilalkeedu waxay dhacaan markii qofaan ogayni dulmaro natiijada ka dhaltaana waxay noqotaa dhimasho iyo hanti ku baaba'da gaar ahaan bal fiiriya.

Caruurtan shilkani waxyeelada u gaystay.



Jaantuska 4.8: Caruur naafo ah

Qaraxyada miinooyinka waxay qariyeen oo ay dileen dad badan oo shacab ah sannado badan kadib goobihii lagu dagaalamay.

Sannadkii 1996 kii qiyaastii 100 milyan oo mayl oo dhul ah ayay ahaayeen meelaha lagu aasay ee ay ku jirto dalal ka badan 60 dal. Hay'ada qaramada midoobay (UN) waxay ku qiyaastay in ay u dhinteen dad gaadhaya 20000 qof. Sanad walba

### Sheeko-gaaban

## Dagaalkii Fiyetnaam

Intii uu socday dagaalkii Fiyeetnaam waxaa lagu qiyaasaa 10% kamid ah bambooyinkii iyo qoloftoodii laga tagay ay ilaa iyo maanta qarxayaan oo ay dad ku dhimanayaan gebi ahaanba dadka ku nool gobolkaas mudo dheer kadib

dagaalkii miinadii lagu aasay dalka Fiyeetnaam wuxuu ugu horeeyaa saamiga sare ee caruurta ku dhalata iyaga oo naafo ah.

Falanqayn:

Sheekada gaaban ee aynu kor ku soo xusnay, oo aan caadi ahayn miinada dhulka. Fadlan cadeeya dhamaan khataraha? Sababi kara miinada dhulka.

# 4.3 ARRIMAHA ISKAASHIGA

## Ururka Horumarinta Dawladaha Bariga Afrika (IGAD)

Waxaa la aasaasay sannadkii 1986 kii kadib heshiisku wuxuu dhexmaray dalalka Geeska Afrika. Dalalkii ugu horeeyay ee aasaasay waxay kala ahaayeen:- Jabuuti, Eriteriya, Itoobiya, Kiiniya, Suudaan, Soomaaliya iyo Yugaandha, Laakiin ay markii dambe eriteriya ay shaaca ka qaaday inay isaga baxday ururka.

Ujeeddooyinka ugu wayn ee ururku waa:

- *Xoojinta iyo adkaynta Nabada iyo Amniga gobolka*
- *Ilaalinta deegaanka iyo iskaashi dhaqaale oo dhexmara dalalka ka tirsan ururka taasoo Dalka Itoobiya uu door wayn ka qaatay dadaalka fulinta sidii loo abuuri lahaa ururka.*

## Ururka U-Ololeeya Biyaha Webiga Niil (NBI)

Iyada oo loo eegayo dhinaca waxtarka webiga Niil, ayaa u ololeynta webiga Niil macnaheedu ay tahay in si ku meel gaadh ah oo habaysan loo aasaaso dalalka wadaaga biyaha webiga Niil. Kulankii lagu aasaasay ururkan (NBI) waxaa lagu qabtay magaalada Darasalaam ee dalka Taansaaniya 22$^{kii}$ Febraayo 1999 kii.

Ujeedooyinkiisa ugu muhiimsanna waa inuu: Ku guulaysto Horumarinta degenaanshaha iyo iskaashiga Webiga Niil oo ah mid aad ugu wanaagsan dadyawga gobolka. Haddaba, dalalka wadaaga Biyaha wabiga Niil waxaa ka mid ah: Burundi, J.D. koongo, Masar Eriteriya, Itoobiya, Kiiniya, Ruwaandha Suudaan, Taansaaniya iyo Yugaandha.

***Waddamadan waa kee ka biyaha ugu badan uu ka helo webiga Niil?***

Ma jiro wax heshiis ah oo dhexmaray dalalka isticmaala Biyaha Niil. Waxaa jira dalal taageera fikirka odhanaya dhamaan dalalka uu ka dhexeeyaa si isle'eg ayay u qaybsadaan biyaha webiga. Dalalkan waxaa ka mid ah dalkeenan Itoobiya iyo dawladaha kale ee ka tirsan marka laga reebo dalalka Masar iyo Suudaan.

Dalalka Masar iyo Suudaan iyaguna waxay xooga saaraan in Meesha isticmaalka Biyaha Webiga Niil ay keligood iska leeyihiin qaybta ugu wayn iyaga oo arintan u cuskanaya Heshiis ay kala saxeexdeen xilligii gumeystayaasha oo dhexmaray dalalka masar iyo Ingiriiska sannadkii 1929 kii. Khilaafku wuxuu ka dhexeeyaa waddamada webigu meelaha uu ka soo bilaabmo ee sare (isha) iyo meelaha uu ku sii socdo ee hoose (ku dambeeyo)

## Beesha Bariga Afrika (BBA)

Ururadan Hoos ku xusan, waxay leeyihiin hab-dhaqan iyo waayo- aragnimo guud maxaa yeelay, waa dalalka laga helo gobolka Bariga Afrika. Gobolkani waxaa laga ag helaa Badda cas.

Gacanka cadmeed iyo Bad waynta Hindiya. Waxaa sidoo kale aad ugu dhaw Jasiirada wayn ee carbeed ee Bariga Dhexe. Sidaa darted, Waddamada laga helo gobolku waxay isu habeeyeen Midow (isu-tag) qaabab kala duwan oo leh ujeedooyin gaar ah. Dalalka ka tirsan gobolkani dhibaatoo yinkooda guud dhamaan way ka wada qayb galaan is fahamkooda guudna uu ka faaiido yar yahay. Waxaa ka mid ah dalalka ka tirsan (IGAD) ugu horeynba waxaa si wada jir ah ugu habsatay waxyeelada Gaajada iyo abaaraha. Si lamid ah Beesha Bariga Afrika waxay dhacdaa dhinaca Bari ee Afrika waxay heleen helitaanka ay ku xaliyaan dhibaatooyinkooda guud ee Dhaqaale.

Dalalka wadaaga Biyaha webiga Niil waayahanba waxay raadiyaan sidii biyaha webiga looga wada faaiidaysan lahaa ee ay u samaysan lahaayeen Bahwadaagta wabiga Niil.

## Fidsanaanta Juqraafiyeed Ee Bariga Afrika

Muuqaaladooda oo keliya uun ma ahee xataa waxay wadaagaan oo Bariga Afrika ahaan u dheer wadaaga Biyaha webiga qaarkood Bariga Afrika ayay dhacaan, Badhtamaha iyo waqooyiga qayb Afrika ka mid ah.

Dhamaantood waxay aad u daneeyaan hormarinta webiga iskaashigooduna aad buu u yar yahay.

## Hadafka Ururada Iskaashi

Urur goboleedyadani waxaa loo aasaasay ujeedooyinkan soo socda:

- *In wax laga qabto waxyeelaynta Deegaanka ee gobolka*
- *In xal loo helo qalalaasaha siyaasadeed iyo Dhaqaale ee gobolka.*
- *In la mideeyo iskaashiga iyo is dhex gelinta dhaqaale ee dalalka*
- *In la is waydaarsado waxtarka Bulsho – dhaqaale looguna guulaysan lahaa Nabada iyo Amniga gobol ahaaneed*

### Beesha Bariga Afrika

Markii ugu horaysay waxaa aasaasay dawladaha Kiiniya, Taansaaniya iyo Yugaandha 1967kii Markii dambena 1977 kii maxaa yeelay, kala duwanaanshaha siyaasadeed iyo waxay kala aaminsan yihiin (Aydhiyoolajiyadooda) ayaa saamaysay howlihiisii inay bilaabaan dalalka ku bahoobay Beesha Bariga Afrika gaar ahaan markii ay dawladii Taansaaniya ay si cad u bilowday inay xoogga saarayso ahmiyada ay beeruhu u leeyihin siyaasada Qorshaynta Dhexe iyo dalka Kiiniya oo u soo jeesatay suuqa Dhaqaalale ee xorta ah ee ku wajahan horumarinta warshadaha.

Kadib markii xukunka lagat tuuray madaxwaynihii dalka Yugaandha ee lidi Amiin ayay dawlada Yugaandha ka mid noqoshada (BBA) saxeexdayna heshiiska 1999 kaas oo ay hore ugu sii gashay saamayna ku yeelatay sannadkii 2000, Waddamo cusub ayaa ku soo biiray. Wuxuuna noqday sidan Kiiniya, Tansaaniya, Yugaandha, Burundi, Ruwaandha (labadan dambe waxay ku soo biireen sannadkii 2007).

Waa Urur goboleed loo assaasay inuu:

- *Isku duborido Arrimaha Dhaqaalaha iyo Dhaqdhaqaaqyada ganacssiga dalalkan*
- *Ka dhex dhaliyo iskaashi Dhaqaale waddamada ku bahoobay una yagleelo suuq ka wada dhexeeya oo ay ku midoobaan*

# GUNAANADKA CUTUBKA

- HIV/AIDS-ku wuxuu leeyahay saamayn xun oo ku wajahan: xaaladaha Bulsho-Dhaqaale shaqsiyeed, Qoysas, Bulsho iyo dalka wayn.
- Da'dii waxsoosaari lahayd ee inta u dhaxaysa 15 ilaa 49 jir ayuu HIV/ AIDS-ka Asiibay dalalka ka hooseeya saxaraha oo ay Itoobiya ku jirto.
- Ka qayb galka Bulsho ee firfircoon waa mid ka mida ladagaalanka HIV/AIDS-ka.
- La dagaalanka HIV/AIDS-ku waa masuuliyad saaran muwaadin kasta oo Itoobiyaan ah.
- Dhalashada, Dhimashada, iyo qixitaankuba waa saddex arimood oo uu taranka xad-dhaafka ah ee dadku keeno.
- Dadka xad-dhaafka ahi waa dhibaatada dalal badan oo Afrika ah u keentay in uu deegaankii ka xumaado (dhirxaaluf, wasakhow, Carro – guur i.w.m) Hoy la'aan, Beer yaraan, iyo cunno aan la isku halayn karin.
- Xuquuqda caruurta waxaa garwaaqsatay Hay'ada Qaramada Midoobay Bayaanna kasoo saartay.
- Caruurtu waxay leedahay xuquuq ka ilaalisa xad-gudubyada:- Duleed, Nafsadeed, Galmood, iyo shaqaale ka dhigid.
- Dadku si ay uga dheeraadaan shilalka ha isticmaalaan hababka looga samata baxayo.
- Urur-goboleedyada dalalku waxay qayb wayn ka qaadataan xalinta dhibaatooyinka iyo iskaashiga loo marayo Horumarka
- IGAD, COMESA, iyo kuwa u ololeeya Biyaha webiga Niil waa qaar kamid ah urur-gobol hoosaadyada Bariga Afrika.

# LAYLISKA GUUD EE CUTUBKA

**I** ***Weedhahan soo socdo tii run ah Run ku qor tii been ahna Been ku qor***

1. Midnimada iyo iskaashiga Bulshada iyo xubnaheedu waa lafdhabarta la dagaalanka HIV/AIDS-ka
2. Bulshada rayadka ahi ma laha kaalin ay kula dagaalanto HIV/AIDS-ka.
3. Takoorida iyo ceebaynta lagu hayo dadka qaba HIV/AIDS waa mid ka dhan ah La dagaalanka HIV/AIDS-ka
4. Taranka degdega ah ee dadka ayaa sababay saamiga sare ee dhimashada
5. Dad-korodhka – xad dhaaf ka ah waa mid ka mid ah dhir-xaalufka iyo waskhahaynta dalal badan oo Afrika

## II *Isku Aadi joog-taxa"B" iyo joog-taxa "T"*

| | A | | B |
|---|---|---|---|
| 1 | Dhir-xaaluf | B | Dhir-jarid |
| 2 | Laanqayrta cas ee bulshada | T | Bulshada Rayadka ah |
| 3 | Xad gudub duleed | J | Jidh-dil |
| 4 | Abaar | X | Sameeyeen dalalka Geeska Afrika |
| 5 | IGAD | KH | Fidida lamadagaannada |
| 6 | Lamadegaan ka dhigis | D | Jawi qalalan oo dheeraada |

## III *Buuxi Meelaha Banaan*

1 ____________ Waa ururo iskaa wax u qabso ah oo ay dawlada dhexe ka madaxbanaan tahay

2 Saamaynta Taranka degdega ah ee Afrika waxaa ugu muhiimsan ____________.

3 ____________ waa gobolka ugu khatarta badan ee HIV/AIDS-ka dunida

## IV *Ka Jawaab Su'aalahan*

1 Qor laba ka mid ah masuuliyadaha qofka saaran ee inuu buuxiyo ay tahay Markii lala dagaalamayo HIV/AIDS.

B ____________________________________________

T ____________________________________________

2 Magacaw saddex tusaale oo bulshada Rayadka ah taas oo ay ku kaalmayn karaan HIV/AIDS ee Bulsho.

B ____________________________________________

T ____________________________________________

J ____________________________________________

3 Qor saddex sababood oo ah sida uu Taranka degdega ahi u waxyeelo deegaanka.

B ____________________________________________

T ____________________________________________

J ____________________________________________

4 Faahifaahi Taranka degdega ah ee dadku sida uu ugu horseedo cuno la'aanta.

______________________________

______________________________

______________________________

5 Magacaw sadex tusaale oo xuquuqda caruurta xadgudubyo iyo Rabshado ku ah .

B ______________________________

T ______________________________

J ______________________________

6 Sharax waxtarka ururada iskaashi ee Ka dhexeeya waddamada.

______________________________

______________________________

______________________________

______________________________

# CILMIGA BULSHADA

## Buugga Ardayga

## Fasalka 6aad

ISBN 978-99944-2-116-9

JUMHURIYADA DIMOQRAADIGA FADARAALKA EE ITOOBIYA
WASAARADDA WAXBARASHADA

Birr 68.00